

Ujeeddooyinka Shareecada (Maqaasid Al-Shariicah)

Hagaha Dadka Bilowga Ah

W.Q

Dr. Jaasir Cawda

Waxa Turjumay

Suhayb Cabdiraxmaan

Daabacaaddii 1^{aad}

Daabacaaddii 1^{aad}

Xuquuqda daabacaadda waxa ay u dhawrsantahay turjumaha buugga. Waa ay reebantahay in qayb ka mida buugga ama geibiahaatiiba la dheegto, luguna keydyo ama lugu fidyo jaad kasta oo wax lugu keydiyo ama lagu faafiyo, iyadoo oggolaasho aan laga helin turjumaha.

Tusmada

Hordhac	6
Qaybta 1^{aad}: Waa Maxay Ujeeddooyinku?	12
Heerar kala duwan ee “Waayo ?”	12
Waxa u dhexeeya fahanka “Ujeeddooyin” iyo “Danaha” ama “Maqaasidda iyo Masaalixda” ..	17
Dhinacyada kala duwan ee Ujeeddooyinka.....	20
Ijtihaadkii Saxaabada ee “Ujeeddooyinka” Shareecada.....	37
Aragtiyihii u horreeyay ee “Ujeeddooyinka”	44
Qaybta 2^{aad}: IMAAMYADII UJEEDDOOYINKA:	54
Qarnigii 5 ^{aad} ee Hijirga ilaa kii 8 ^{aad}	54
Imaam al Juwayni iyo “Baahiyaha guud”	55
Imam al Qasaali iyo “Kala horumarinta waxyaabaha lagama maarmaanka ah ”	57
Cisudiin Binu Cabdisalaan iyo “Xikmada ka Danbaysa Axkaamta”	59
Imaam Al-Qarraafi iyo “Noocyada kala Duwan ee Falalka Nebiga (SCW)”	60
Imaam Ibnu al-qayim iyo “Xaqiiqada Shareecada”	62

Imaam ash-Shaadibi iyo dib u eegista inay Ujeeddooyinku yihiin “Asal ka mida asallada shareecada”	64
Arrinta 1aad- “Danaha furan” oo looga gudbo “asallada shareecada”	64
Arrinta 2aad- “xikamadda ka danbaysa xukunada shareecada” oo looga gudbo “qaacidooyinka xukunada shareecada”	65
Arrinta 3aad: “Danniga/Malaynta” oo looga guuro “Qadciga/sar goynta”	66
Qaybta 3aad: Kaalinta ay “Ujeeddooyinku” ku leeyihiin Cusboonaysiinta Islaamka Casrigan ..	70
“Ujeeddooyinka” Shareecada oo ah mashruuc hormuarineed iyo xuquuqda Binii Aadamka	72
“Ujeeddooyinka” oo ah Asaaska Ijtihaadka.....	83
Waxa u dhexeeya “Dawga” iyo “Yoolka”	98
Ujeeddooyinka iyo Tafsiirka Qodobaysan ee Quraanka kariimka ah.....	106
Fahanka “Ujeeddooyinka” Nebiga (SCW)	109
“Marmarsiiyo furidda” oo ka soo horjeeda “Marmarsiiyo Joojinta’	115
Xaqiijinta “Ujeeddada” Caalaminiimada Risaalada Islaamka.....	122

Ujeeddooyinku waa gogol midaysa Madaahibta Islaamka	125
Ujeeddooyinka Shareecadu oo sees u ah wada Hadal Diimeed.....	128
Fulinta Ujeeddooyinka Shareecada.....	134
Waydiimo iyo War-celinno ku Saabsan Akhlaaqda:	134
Gunaanad.....	145

Hordhac

Erayga “Ujeeddooyin” waa wadarta “ujeeddo”. Ujeeddaduna waxay tilmaanta yoolka, gunta iyo barta la abbaarayo ama loo socdo. Marka erayga “Shareeco” la raaciyana, ee aynu nidhaahno “Ujeeddada shareecada” waxaynu fahmaynaa in laga hadlayo yoolka, iyo gunta, ama dheh “Himilada axkaamta iyo shareecada Islaamka”.

Ujeeddooyinka Shareecadu waa himilooyin wanaagsan oo ay shareecadu u taagantahay hirgalintooda; waana sababta uu sharciga islaamku arrimo u faral yeelo, halka uu qaar kalena u reebo ama u xarrimo. Tusaale ahaan, ujeeddooyinka Shareecada waxa ka mid ah “Ilaalinta maanka”. Waana arrinta fasiraysa reebitaanka ay shareecada islaamku reebtay ‘Maan dooriyaha’.

Sidoo kale, Ujeeddoyinka Shareecadu waa tiro ka mid ah himilooyinka rabbaaniga ah, sida mabaadi’da caddaaladda, karaamada aadamaha, xornimada, maamuuska, kaalmada dadka, iyo iskaashiga bulshada.

Wuxuu qabaa Dr.Jaasir Cawda oo ah qoraha dhiganahani, in ay mabaadi’ida iyo ujeeddooyinka shareecada islaamku noqon karaan maanta dhextaalka isku xidha shareecada Islaamka iyo

aragtiyaha dunida ka jira casrigan, ee la xidhiidha xuquuqda aadamaha iyo horumarkooda iyo weliba sinnaanta bulshada. Sidaas ayaa casrigan loo dar-dar galin karaa doorka ama kaalinta shareecada islaamka.

Ujeedooyinka Shareecadu waa qayb muhiim ah oo ka tirsan culuumta Islaamka, oo ka jawaabaya waydiimo badan, sida:

- Maxay Sakadu u tahay mid ka mida Tiirarka Islaamka?
- Islaamku muxuu inoo faray u samo falka jaarka?
- Maxay salaanta Muslimiintu u noqotay “As-salaam”?
- Maxay Muslimiintu shan jeer u tukadaan maalintii ?
- Maxaa soonka bisha Ramadaan u noqday mid ka mid ah Arkaanta Islaamka?
- Muxuu cabbitaanka khamrigu u noqday dambi wayn, si kasta oo uu u yaraado?
- Maxay diinta Islaamku kufsigu iyo dilka kaska ah ciqaabtooda uga dhigtay dil?
- Waa sidee qaabka ugu wanaagsan ee loo akhriyi karo Qura’aanka iyo sunnada? ee

fasiraad cusubna looga bixin karaa maanta, iyadoo la eegayo xaqiiqooyinka cilmiyeed ee ay dunidu casrigan gaadhay?

- Maxay tahay argtida Islaamku u ka qabo “xornimada”, “sinnaanta” iyo “cadaaladda bulsho”?
- Waa maxay arrimha ay ka midaysan yihiin shreecada Islaamka iyo arigtiyada cusub ee dunida reer galbeedka gaadheen, sida xuquuqda aadanaha?
- Sidee ayey shareecada Islaamku uga qaby qaadan kartaa “horumarka”, “koritaanka akhlaaqda” iyo “sinnaanta bulshada”?

Dhiganahan kooban ee hortiinna yaalla waxa uu si xeel dheer u macnayn doonaa qodobadaas iyo qaar kale, isla markaana qoruhu wuxu eegi doonaa mawduuca ‘Ujeedooyinka Shareecada’ isaga oo adeegsan doona daraasad aragtiyeed oo aad u qoto dheer.

Waxaan u mahadcelinayaa qoraha buuggan, Dr. Jaasir Cawda, oo ii soo bandhigay in aan dhiganihiisan af soomaali u turjumo, isagoo weliba gacanna iga siiyay hirgalinta iyo daabacaadda buugga. Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa Professor Cabdisalaan Yaasiin oo dib u akhrin iyo

dib u sixid ba ku sameeyay tarjumaaddan. waxaan isagana u mahadcelinayaa saaxiibkay Cabdifataax Cumar oo isna dib u akhriyay daabacaaddan, sixitaanno iyo tilmaamo toolmoonna aan ka helay. Labadoodaba mahad aan duugoobin ayaan u hibaynayaa, wakhtiga ay ku bixiyeen akhrinta iyo dib u sixidda tarjamadda awgeed.

Ugu dambeyn; waxaan rajaynayaa in uu dhiganahani ibo-fur iyo bilaw u noqdo in aqoonta diinta af soomaali lagu qoro. Sidoo kale waxaan rajaynayaa in ay turjumaaddani bar-bilow iyo horseed cusub u noqoto in dhiganayaal kale oo badan oo ummaddeena faa'ido u yeelan kara laga soo guuriyo luuqadaha kale, oo luqadda af soomaliga aynu u soo turjumanno. Sidaas ayaan u arkaa in aynu af soomaaliga uugu hiilin karno!.

Allaa mahad leh.

Juun 2015

Suhayb Cabdiraxmaan

Hargeisa, Somaliland.

**Qaybta 1^{aad}: WAA MAXAY
UJEEDDOOYINKU?**

Qaybta 1^{aad}: Waa Maxay Ujeeddooyinku?

Heerar kala duwan ee “Waayo ?”

Waxa dhaca badanaa in ay carruurta yaryari inna weydiiyaan su’aalo innaga yaabiya oo astaamo falsafadeed leh. Carruurta markay su’aalaha inna weydiinayaan ma ujeeddo aqooneed ayay ka leeyihiin mise kama laha? Arrintaa haddii loo fiirsado waxa ka caddaanaysa in aanay ka sii horrayn su’aalahaasi xiqiiqooyin cilmi ah ama garaad uu ilmihu ka kordhsanayo. Su’aalaha qotada dheer ee carrurta waxa dhigeeda ka soo horjeeda odhaahda dadka waaweyn ee ah “Wax walbaa waa iska sidaa”.

Badanaa marka aan casharrada la xidhiidha Maqaasidda Shareecada bixinayo waxan tusaale u soo qaataa sheeko ku saabsan tu yar oo aabeheed su’aal waydiisay. Waxay ku tidhi, “Aabbo, Marka aad baabuurka waddo, maxaad isu taagtaa ishaarooyinka waddada?” Wuxu ugu jawaabay “Waxan istaagaa markuu baxo laydhka cas oo sheegaya in la istaago”. waxay ku tidhi haddana “Waayo?” “Waa si aan ciidanka waddooyinku ii ganaaxin,” ayuu ku yidhi. Waxay haddana weydiisay “Oo maxaa ninka askarigu dadka u ganaaxaa?” wuxuu ugu jawaabay “Khatar badan ayaa ku jirta dhaafitaanka ishaarada cas. “waayo?”

Wuxu doonay in uu ugu jawaabo, “Aabbo waa iska sidaasi”. Hasa y eeshee, wuxuu go’aansaday in uu u sabro inantiisa yar, oo wuxuu ugu jawaabay, “Ma bannaana in aynu dadka dhibno, adigu miyaad jeceshahay in lagu dhibo?” waxay tidhi “maya.” Wuxuu u raaciyay “sidaas oo kale ayey dadkuna doonayaan inaan dhibi soo gaadhin.” Nebiguna SCW wuxuu yidhi, “La jeclow dadka waxa aad naftaada la jeceshahay.”

Hasa yeeshee yartii baadhitaankii kumay joojin halkaasi. Waxay mar kale waydiisay aabbeheed, “Maxaad uula jeclaanaysa dadka waxaad naftaada la jeceshahay?” In yar intuu fakaray ayuu aabbihii ku jawaabay, “Waayo dadka oo idili way siman yihiin. Maxay u samina yihiin haddaad i waydiisana, jawaabtu waa: Ilaahay waa caadil, cadaaladdiisana waxa ka mid ah inuu dadka oo dhan simay; xuquuq isku midana siiyay. Markuu adduunyada abuurayna wuxuu dhidibbo ugu dhigay cadaaladda”.

Waydiinta “Waayo?” waxay sii keenaysaa “Waa maxay Ujeeddadu?” taasina waxay sii keenaysaa, “In la sii baadho heerarka kala duwan ee ka dhalan kara waydiinta sababta ku saabsanayd?”. Odhaahdan oo ka mid ah odhaahyadii falaasifada waxa kala oo ay la xidhiidhaa baadhitaanka “heerarka ujeedooyinka” oo ah sida ay u adeegsadaan culimada fiqiga ee muslimeentu.

Marka aynu baadhitaankeenna ka ambaqaadno heerarka kala duwan ee waydiinta “waayo?”, taas oo la xidhiidha ujeeddooyinka, waxaynu ka indho laabanaynaa arrimo badan oo faahfaahin u baahan. Tusaale ahaan joogsiga ishaarada cas oo ah ishaaro kaliya waxaynu uga sii gudbaynaa heerarka qawaaniinta iyo qawaacidda taas oo haddana innoo sii gudbinaysa danaha guud. Tusaala ahaan, inuu qofku ka fakaro nabadgalyada dadka kale iyaguna ay ka fakaraan nabadgalyadiisa. Danaha guudna looga sii gudbo heerarka mabaad’ida waawayn iyo caqiidooyinka aasaasiga ah, sida mabd’a cadaaladda, naxariista, iyo sifooyinka kale ee Ilaahay korreeyo sarreeye.

Sidaa darteed ujeeddooyinka Shareecadu waa qayb muhiim ah oo ka tirsan culuumta Islaamka ee ka jawaabaya su’aalaha ad-adag ee ka dhalan kara waydiinta soo noqnoqota ee “maxaa ama waayo?”.

Halkan waxaynu ku soo taxayaa qayb kamida waydiimahaas, sida:

- Maxaa ay Sakadu u tahay mid ka mida Tiirarka Islaamka?
- Islaamku muxuu inoo faray u samo falka jaarka?
- Maxay salaanta Muslimiintu u noqotay “Nabadgelyo”

- Maxaa Muslimiitu shan jeer u tukadaan maalintii?
- Maxuu soonka bisha Ramadaan u noqday mid ka mid ah Tiirarka Islaamka?
- Maxay muslimiintu mar kasta Ilaahay u xusaan?
- Maxaa keenay in cabitaanka khamrigu u noqday dambi wayn, si kasta ha u yaraado'e?
- Maxay diinta Islaamku kufsiga iyo dilka kaska ah cigaabtooda uga dhigtay dil?

Haddaba ujeeddooyinka shareecadu waxay caddeeyaan xikmadaha ka dambeeya axkaamta. Tusaale ahaan; xikmadaha la xidhiidha Sakada waxa ka mid ah “isku duubnaanta bulshada”. Jaarka oo laga war hayaa waa samafal. Dadka oo la salaamaana waa kalgacal.

Xikamadda labaad ee looga gol leeyahay axkaamta diintu waa “Alle ka cabsiga”. Waana mid ka mid ah sababaha loo faral yeelay Salaada, Sakada, iyo Soonka.

Sidoo kale, ujeeddooyinku waa himilooyin wanaagsan oo ay shareecadu u taagantahay hirgalintooda; waana sababta arrimo loo faro samayntooda, qaar kalena loo xarrimol.

Tusaale ahaan, waxaa kamida ujeeddooyinka Shareecada “Ilaalinta maanka iyo nafaha dadka”. Waana arrinta fasiraysa reebitaanka adag ee la reebay maandooriyaysaasha. Ujeeddada kale ee ah “Ilaalinta xoolaha iyo milgaha dadka” iyaduna waxay muujinaysaa meesha adag ee uu Quraanku iska taagay kufsiga, sida ay tilmaamyaan Aayadda (178) ee Suuradda Al-Baqara, iyo Aayadda (33) ee Suuradda Al-Maa’ida,

Ujeeddooyinku waa tiro ka mid ah himilooyinka rabbaaniga ah iyo dhaqanka ay shareecda Islaamku ku dhiisantahay, sida mabaadi’da cadaaladda, karaamada aadmaha, xornimada, maamuuska, xishoodka, kaalmada dadka, iyo iskaashiga bulshada. Tusaale ahaan, mabaadi’dani waxay noqon karaan maanta dhextaalka isku xidha shareecada Islaamka iyo aragtiyaha maanta dunida ka jira ee la xidhiidha xuquuda aadamah, hormarka iyo sinnaanta bulshada. Waxayna jawaab u noqon karaan waydiimaha soo socda:

- Waa sidee qaabka ugu wanaagsan ee loo akhriyi karo Qura’aanka iyo sunnada, fasiraad cusubna looga bixin karo, iyadoo la eegayo xaqiiqooyinka cilmiyeed ee ay dunidu maanta gaadhay?

- Maxay tahay argtida Islaamku u ka qabo “xornimada” iyo “sinnaanta”?
- Waa maxay arrimha ay ka midaysan yihiin shreecada Islaamka iyo arigtiyada cusub ee la xidhiidha xuquuqda aadamahu?
- Sidee ayey shareecada Islaamku uga qaby qaadan kartaa “horumarka”, “koritaanka akhlaaqda” iyo “sinnaanta bulshada”?

Haddaba qaybteena soo socota waxaynu ku macnayn doonnaa erayada qaarkood; isla markaana waxaynu ujeeddooyinka ku eegi doonnaa daraasad aragtiyeed oo qoto dheer.

Waxa u dhexeeya fahanka “Ujeeddooyin” iyo “Danaha” ama “Maqaasidda iyo Masaalixda”

Erayga “Ujeeddooyin”, oo ah wadarta “ujeeddo”, wuxu tilmaamayaa yoolka, gunta iyo barta la abbaarayo, ama himilada, waxaanu macno ahaan u dhigmaa eraga “End” ee af Ingiriisiga.¹ Ama erayga “telose” ee af Giriigga ah. ama erayga “Finalité” ee

1- Maxamad al-Dahir ibn caashur, Ibn caashur, maqaasidda shareecada. Waxa turjumay: Muhammad el-Dahir el-Mesawi (London, Washington: International Institute of Islamic Thought (IIIT), 2006), bogga 2aad.

af Faransiiska ah, ama erayga “Sweck” ee af Jermelka ah.²

Laakiin marka Shareecada Islaamka la joogo ujeeddooyinku waa yoolka, ama gunta, ama barta la abbaarayo, ama himilada axkaamta Islaamka. Fuqahada qaarkood waxay la tahay in ay Ujeeddooyinku macno ahaan u dhigmaan Danaha (masaalixda).³

Waxay u aqonsanyihiin culimada fiqiga badhkood in ay “Maqaasiddu” la macno tahay “Masaalixda”. Waxa kamid ah culimada arigtaadaa qaba tusaalo ahaan, *Cabdi Maalik Al Juwayni* (oo geeriyooday 478 H / 1185 M), oo lugu tiriyo inuu ka mid ahaa culimadii arigtada Ujeeddooyinka aad u horumariyay kuwii ugu horreeyay (arrintaas oo aanu faahfaahin doonno in yar ka dib), wuxaa uu sheekhu qabay in labada eray ee “Maqaasid” iyo “Masaalix” ay isku macne yihiin.⁴ Haddana, *Abuu Xaamid Al-Qasaali* (oo geeriyooday 505 H / 1111 M) ayaa arigtiidi *Al- Juwayni* sii ballaadhiyay oo hoos

2- Rudolf von Jhering, *Law as a Means to an End*(Der Sweck im Recht), waxa turjumay: Isaac Husik, 2nd reprint ed. (New Jersey: The Lawbook Exchange [Originally published 1913by Boston Book Co.], 2001), boga35aad.

3- Ibn caashur, maqaasida shareecada Islaamka, el-Dahir el-Mesawi (Kuala Lumpur: al-Fajr, 1999), boga183aad.

4- Cabbdul-Malik al-Juwaynī, Gyath al-Umam fi lltiyath al-sulam, ed. AbdulAsim al-Deeb (Qatar: Wasaarada arimaha diinta 1400 ah) boga253.

geeyay “danaha Furan/المصالح المرسله”⁵. Isaga dabadii waxa ka hadlay *Fakhr Al-Diin Al Raasi* (oo geeriyooday 606 H/ 1209 M) iyo *Al-Aamadi* (631 H / 1234 M) waxayna labadooduba ku taageereen *Al-Qasaali* erey bixintiisi.⁶

Najmd Al-Diin Al Duufi (oo geeriyooday 716 H / 1316 M) ayaa isna waxa u ku tilmaamay maslaxadu inay tahay ujeeddada sharci dajiyaha (oo Ilaahay iyo Rasuulkiisa ah).⁷ *Qarraafi* (oo geeriyooday 1285 H / 11868 M) ayaa isaguna wuxuu dhigay qaacidada ah “*Sharicgu ma yeelan karo Ujeeddooyin haddaanu la xidhiidhin yool cad oo dheefkeenaya ama dhib joojinaya*..⁸

Taasi macnaheedu waxa weey ujeeddo kasta oo ka mid ah ujeeddooyinka, oo sidii aynu hore usoo nidhi ah yool, ama gun, ama abbaar, ama himilo, waxay Shareecada Islaamku jidaysay in ay tahay “*danta*

-
- 5- Abu xamid al-Qasaali, al-Mustafa fi cllm al-Usul, ed. Mohammed AbdulSalam Abdul Shafi, 1st ed. (Beirut: Dar al-Kutub al-Ĉilmiyyah, 1413ah), majaladka. 1aad, boga172aad.
 - 6- Abu Bakr al-Maliki ibn al-Carabī, al-Maxsul fi usul al-Fiqh, ed. Hussain Ali Alyadri iyoSaeed Foda, 1st ed. (Amman: Dar al-Bayariq, 1999), mujalladka. 5, bogga 222. Al-amidī, Cal Abu al-xasan, al-lixkam fi Usul al-Axkam. (Beirut: Dar al-Kitab al-carabi, 1404 ah),majaladka 4. boga286.
 - 7- Najmadiin al-dufī, al-Tacyiin fi Sharc al-Arbaciīn(Beirut: al-Rayyan, 1419ah), bogga 239.
 - 8- Shihab al-Din al-Qarafi, al-Dhakhīrah(Beirut: Dar al-carab, 1994), majaldka. 5, bogga 478

dadka". Taasina waxay muujinaysaa asalka aragtida ujeeddooyinka oo maan gal ah ama suurtagal ah.

Dhinacyada kala duwan ee Ujeeddooyinka

Dhincyo badan ayaa Ujeeddooyinka Shareecada Islaamka laga fasiray, taas oo kolba ku xidhan dhanka uu ka eegayo caalimka fiqiga ku xeel dheeri. Dhinacyadaa laga eegay waxa ka mid ah:

- 1- Waxyaabaha lagama maarmaanka ah: waana fasiraadda duugga ah ee soo jireenka ah.
- 2- Axkaamta kala duwan oo yoolkoodu yahay hirgalinta Ujeeddooyinka.
- 3- Nooca dadka kolba ay taabanayaan Ujeeddooyinku.
- 4- Guda ballaadhnaanta Ujeeddooyinka.

Qaybta soo jireenka ahi waxa ay ka koobantahay saddex heer oo la xidhiidha waxyaabaha lagama maarmaanka ah, kuwaas oo ah; *wax lagama maarmaan ah, waxyaabo baahi loo qabo, iyo waxyaabo dhammaystir ah*. Ka dibna waxay culimadu u qaybiyeen waxyaabaha lagama maarmaanka ah shan qodob oo kala ah: *"Ilaalinta diinta, ilaalinta*

nafta, ilaalinta maalka, ilaalinta caqliga, iyo ilaalinta taranka".⁹

Culimada qaarkoodna waxa ay shantaasi ku dareen : *"ilaalinta sharafta "*.

waxa loo arkaa shantaa arrimood in ay yihiin kuwa aan looga maarmayn nolosha dadka iyo dhimashadoodaba.¹⁰ Tusaale ahaan nolosha dadku halis ayey galaysaa haddii caqligoodu halis galo. Halkaasi waxaynu ka garan karnaa meesha adag ee islaamku iska taagay xaaraannimada khamriga iyo wixii maandooriye ah.

Sidoo kale, nolosha aadamahu khatar ayey galaysaa haddii aan la ilaalin nafaha, oo aan laga hor tagin xanuunada; deegaankana aan laga ilaalin wasakhda. Waxa kale oo aynu arrintan ka fahmi karnaa amarka Rasuulka (NNKA) ee inna faraya in aan wax dhib ah loo gaysan dadka, xaywaanka, iyo dhirta midna.

9- Al-Qasaali, al-Mustasfa , majaldka. 1, bogga 172, Ibn al-Carabi, al-Maxsul fi usul al fiqi, majaldka. 5, bogga 222, al-amidī, al-Ikkamm, majadka. 4, boga .287

10- Al-Qasaali, al-Mustasfa, majaldka. 1, bogga 172, Ibrahim al-Ghirnadi al-Shadibī, alMuwafaqat fu Usul al Shariʿah, ed. Abdullah Diras (Beirut: Dar al-Macrifah, no date), majaldka. 3, bogga 47

Sidoo kale, nolosho bini aadmku khattar ayey galaysaa marka ay dhacdo mushkilad dhaqaale oo guud. Isagoo ka hortagaya arrinkaa waaka sharciga islaamku reebay Ribada, iyo in ay cid gooni ahi gacant ku dhigto ilaha dhaqaale ee bulsho. Waxaana la reebay musuqmaasuqa noocyadiisa kala duwan, si uu habsami uugu socodo nidaamka dhaqaale ee bin aadamku.

Sidoo kale waxa la mida meesha ee u dhigay Islaamku taranka. Innagoo arkayna axkaamta faraha badan ee uu islaamku u dejiyay sida ugu wanaagsan ee loo daryeelo carruurta iyo qoyskaba.

Ugu danbayn, ilaalinta diintu waa baahi aad aasaasi ugu ah nolosha aadamha; siiba tiisa aakhiro. Islaamku wuxuu nolosha u arkaa in ay tahay safar dheer oo in yar oo ka mida dunida la joogayo, inteeda kalena aakhiro lagu waarayo.

Waxa kale oo la isku raacsanayahy ilaalinta arrimahan lagamaarmaanka ahi ay yihiin Ujeeddada diimaha samaawiga ah loo soo dajiyay¹¹, oo ma aha mid Islaamka oo kaliya ku kooban.

Waxyaabahaa lagama maarmaanka ah ee aynu so sheegnay waxa ku xiga “waxyaabo baahi loo qabo” oo marka la eego jiritaanka nolosha aadamaha u soo

11- Al-Shadibī, al-Muwafaqat, majaldka. 3, bogga 5.

hoos galaya heerka uka hooseeyo ee ah waxyaabaha lagama maarmaanka ah. Waxaana tusaale ahaan ka mida baahiyaha guurka, ganacsiga, gaadiidka . Islaamku wuu dhiirigeliyaa oo habeeyaa helintaanka baahiyahaa kala duwan. Hase yeeshee, waayitaanka baahiyahaasi ma gaadhsiisna marna geeri iyo nolol, siiba marka arrinku joogo qof qudha, maxaa yeelay, nolosha aadamuhu halis gelimayso haddii qof qudhi aanu guursan ama ganacsan.

Haddiise aanay dad badani helin baahidooda, heerkii baahidu wuxu u gudbayaa heerkii lagama maarmaanka ahaa. Sidaa darteed, culimada fiqigu waxay dajiyeen qaacida odhanaysa *“baahidu hadday faafto waxay gaadhaysaa heerarka waxyaabaha lagama maarmaanka ah”*.

“Dhammaystirayaashu” waa wixii qurxiya nolosha sida dharka, guryaha qorxoon, iyo udugga. Waxyaabahaasi wuu jeclaysataa islaamku, wuxuuna ku tilamaama nimcooyinka Ilaalahay ku galladay aadamaha. Laakiin, mudnaanta waxa leh labada arrimood ee hore oo kan waa loo danbeysiinayaa.


Saddexda heer ee Ujeeddooyinka (waxyaabaha lagama maarmaanka ah, waxyaabaha baahida loo qabo, iyo dhammaystirayaasha) waxa ka dhexeeya

xidhiidh. Waana arrantii uu tilmaamay *Imam Al-Shaadibi*¹² (Imaamkasi oo aanu fiiro gaar ah siin doono in yar ka dib). Tusaala ahaan, guurka iyo ganacsigu labaduba waa heerka waxyaabaha loo baahanyah, laakiin waxay keenayaan ilaalinta taranka iyo xoolaha oo iyaguna ah “lagama maarmaan ah”. Waxana jira tusaaleyaal badan oo kale.

Haddii arrin la doonayaa uu aad u yaraado, arrinkaasi heerkiisu kor ayuu kacayaa, tusaale ahaan, haddii uu dhaqaalaha ku yimaaddo hoos u dhac guud, waxay keenaysaa in uu ganacsigu ka guuro heerka baahiyaha oo ugaadho heerka waxyaabaha lagama maarmaanka ah. Sidaa darteed, fuqahadu waxay door bideen in ay u eegaan waxyaabaha lagama maarmaanka ah sida “goobooyin is dhexgelaya oo kale”, waa marka la adeegsado weedhaha casriga ah. Tusaale ahaan, bal waxaad eegtaa shaxdan hoos ku taalla.¹³

12- Tixraacii hore., majaldka. 1, bogga 151

13- Gamal al diin Attia, *Nahawa Tafciil Maqasid al-Sharicah* (Amman: al-Machad al-calami li al-Fikr al-Islami, 2001) bogga 45.14.



Qaabka dhismeedka kala sarreeya ee Ujeeddooyinka Shareecada Islaamka (Jaranjarooyinka waxyaabaha lagama maarmaanka ah)

waxay ina xasuusinayaan heeraka “lagama maarmaanka ” ee Shareecada Islaamku qaab dhismeedkii kala sarreeyay ee *Abraham Maslow* ee uu sameeyay badhtamihii qarnigii labaatanaad. Qaabdhismeedkaa wuxuu ku soo bandhigay danaha iyo rabitaannada dadka (aan ahayn rabitaanka Alle), kuwaas uu u bixiyay “*jaranjarooyinka waxyaabaha loo baahi qabo*”.¹⁴

14- A. H. Maslow, “A Theory of Human Motivation,”
Psychological Review, no. 50(1943): 50, bogga 370–96

Baahiyaha aadmahu sida ay dhigayso aragtida *Maslow* waxay u kala baxaan baahiyo jidheed oo aasaasi ah, oo au ka mid tahay ammarkiisa oo loo sugo. Waxaana ku xiga baahiyaha dareen ee qofka sida jacaylka iyo qadrinta iyo jeclaanta “is muujinta qofnimo”. *Maslow* wxuu soo jeediyay sannaddi 1947kii shan heer oo baahiyuhu ka koobanyihiin. Haddana sannadku markuu ahaa 1970kii ayuu aragtidiis wax ka baddalay, oo uu soo bandhigay dhawr baahiyood oo 7 heer ka kooban.¹⁵ Halkaasi waxa ka muuqanaya isu ekaanshaha qaabdhismeedka *Al-Shaadibi* iyo aragtida *Maslow* marka laga eego dhinaca heerarka dhinaca yoolasha la dhigto oo mudan runtii in loo fiiro yeesho.

Qaab dhismeedka aragtida *Maslow* waxay u egtahay aragtida ujeeddooyinka Islaamka marka laga eego inay labaduba yihiin mid wakhtiba wikhtiga ka danbaysa la sii hormarinayay, qarnigii 20^{aad} ayaa aad loo diiday aragtiyihii “soo jireenka ahaa” ee “waxyaabaha lagama maarmaanka ah”. Waxyaabihii lagu diidayna waxa ka mid ahaa:¹⁶

1. Aragtida duugga ah ee ujeeddooyinku waxay si guud u tilmaamaysay dhammaan

15- A. H. Maslow, *Motivation iyo Personality*, 2nd ed. (New York: Harper iyo Row, 1970), Maslow, “A Theory of Human Motivation.”

16- Sida uu sheegay Sheekh Xasan al-Turabi (waraysi, Khartoum, Sudan, August 2006).

waxa ay ka koobantahay shareecadu. Badanaaba kama warramayso waxyaalaha gaarka ah ee Shareecada Islaamka. Kama jawaabayso aragtida soo jireenka ah ee Ujeeddooyinku ee aynu faahfaahinteeda kor ku soo xusnay su'aalihii badnaa ee iyana aynu kor ku sheegnay ee ku bilaabmayay "maxaa iyo waayo?"

2. Aragtida Ujeeddooyinka ee soo jireenk ahi waxay ka warramaysaa qofka; kamana waramayso qoyska iyo bulshada iyo guud ahaan aadamaha midna. Taas oo ka dhigan in ay Shareecada Islaamku mudnaan siinayso nolosha qofka keliya oo qodha oo aanay tixgelinayn nafaha bulshada, sharafta bulshada iyo milgiheegaa, dhaqaalaha bulshada iyo xoolaheeda. In kastoo arrimahaas oo dhanna Islaamku mudnaan siinayo.
3. Qaybaha aragtida Ujeeddooyinka soo jireenka ahi in kasta oo ay sii kala qaadqaadday waxyaabaha lagama maarmaanka ah, haddana ka ma ay hadal kuwa uugu muhiimsan, sida cadaaladda iyo xornimada qofka.
4. Aragtida Ujeeddooyinka soo jireenka ah waxaa laga soo dheegtay kutubtii fiqiga

ahayd ee ay dhigiin culumidu, ee lagama soo dheegen nusuusta asalka ah ee kitaabka Quraanka iyo Sunnada. Inta badanna waxa la daliishadaa hadallo ay culimadu fiqigu leeyihiin oo ku arki maysid aayado Qur'aana oo si toosa loo daliishanayo.

Culimadii casrigani waxa ay isku dayeen in ay buuxiyaan wixii ka dhiman aragtiyihii aynu hore u soo sheegnay ; waxaanay soo bandhigeen tiro aragtiyo iyo tusmooyin ah oo dhinacyo cusub u yeelaya Ujeeddooyinka. Marka la eego intii ay axkaamtu koobtay, culimada casrigani waxay Ujeeddooyinka u qaybiyaan saddex heer.¹⁷

- 1- *Ujeeddooyin guud*: waa Ujeeddooyinka ku jira qaybaha shareecada oo dhan. Waana kuwa aynu ka soo warannay, sida “waxyaabaha lagama maarnaanka ah”, “waxyaaba loo baahi qabo”, iyo “dhammaystirayaasha”, iyo Ujeeddooyin cusub oo dhawaan la soo bandhigay, sida “cadaaladda bulshada” iyo “caalamiyada Islaamka” iyo “fududeynta axkaamta”.
- 2- *Ujeeddooyin gaara ah*: waana Ujeeddooyinka laga dheehan karo qayb gaar ah oo ka mid ah qaybaha Shareecada ku jira sida ilaalinta

17- Numan Jughaim, *turuq al-Kashf can Maqasid al-Sharci* (International Islamic University, Malaysia. Published by Dar al-Nafs'is, 2002), BOGGA 26–35.

maslaxadda ubadka ee la xidhiidha sharciyada u gaarka ah qoyska. Iyo sharciyada u gaarka cuquubaatka ee lagaga hortaggo inay in dambiilayaashu ku kacaan fal dambiyeedyo; iyo joojinta ku tagrifalidda sharciyada la xidhiisha heshiisyada maaliyadeed.

- 3- *Ujeeddooyin hoose*: waana Ujeeddooyin ka warama “sababta” iyo “yoolka” naska ama xukun gaar ah, sida marka la rabo in la ogaado xaqiiqada uu nasku sheegayo in la helo tiro markhaatiyaala oo ka marag fura arrimaha qaarkood; iyo yaraynta dhibaataada, sida marka nasku u oggolaado qofka xanuunsanayaa in uu soonta afuro. Ama sida in dadka saboolka la quudiyo oo la siiyo hilbaha Ciidul Adxaha; taas oo la diidayo in hilbaasi la kaydsado.

Iyagoo dhamaystiraya culimada casrigan mowduuca Ujeeddooyinka, oo ku koobnaa qofka oo qudha , ayaa waxay balaadhiyeen macnaha Ujeeddooyinka, si ay u koobsan karto qoyska, bulshada, iyo dadka oo dhanba. Waxaynu arki karnaa tusaale ahaan, *Ibnu Caashuur* (fahfaahin ku saabsan way inoo soo socotaa) oo soo kordhiyay Ujeeddada “Umaddaa”. wuxuuna mudnaan siinayaa Ujeeddada qofka. Sidoo kale waxaynu arki karnaa *Rashiid Rida* oo aragtidiisa uu “Ujeeddooyinka” ku soo kordhiyay “hagaajinta/islaaxinta” iyo “xuquuqda haweenka”;

Yuusuf Al Qaradaawi isna aragtida “Ujeeddooyinka” waxa uu ku soo kordhiyay “karaamada iyo xuquuda Aadamaha”.

Ballaadhinta la balaaadhiyay heerarkii “Ujeeddooyinku” waxa ay irridaha u fartay in ay Ujeeddooyinku ka hadlaan arrimaha iyo danaha casrigan taagan. Waana in fiqi yaqaanku arrimahaa ka duulaa “xikmadda looga gol leeyahay axkaamta” si uu ula yimaaddo qorshayaal la fulin karo oo la xidhiidha sii loo sii wanaajin lahaa loona cusboonaysiin lahaa.

Waxa kala oo ay culimadu la xidhiidhiyeen Ujeeddooyinka Shareecada iyo qiyamkeeda aasaaska lagu dhiso dal-yeelashada iyo xuquuda dadka tirada yare e Musliiminta ah ee ku nool dal ay u badanyihiin dad aan Muslin ahayni.

Ugu danbayn culimadu waxay soo bandhigeen “Ujeeddooyin” caalami ah, oo si toosa ah u uga soo dheegteen nusuusta (aayado ama axaadiis) cadcad. Waxaanay iska dhaafeen in ay madaahib waqtigoodi tagay oo dad hore dhigeen ku koobnaadaan. Halkanna waxaynu ku soo bandhigaynaa eray bixinno cusub oo matalaysa qiimayaasha iyo mabaadii’da Islaamka tiyoo si tooso looga soo dheegtay nusuuta Islaamka..

1. *Rashiid Rida* (oo geeriyooday 1935kii una dhigmaysay¹⁴⁵ Hijriga), wuxuu bandhitaan ku sameeyay Qur'aanka wuxuuna soo uruuriyay maqaasidda ku jirta; kuwaas oo uu sheegay in ay koobayso: "Hagaajinta tiirarka diinta, caddaynta waxy dadku jaahil ka yihiin ee diinta khuseeya, caddaynta inu Islaamku yahay diinta fidrada ee lagu dhasho, iyo in islaamku yahay dinta caqliga, cilmiga, xikmadda, caddaynta, xorriyada, islaaxinta dhinaca siyaasadda ee bulshada, iyo waxa qofka la faray ee la xidhiidha cibaadada iyo waxa laga xarimayba, Islaamku sida uu u arko xidhiidhka dowliga ah, sii hagaajinta xoolaha iyo dhaqaalaha, joojinta dhibta dagaalka, sugitaanka xaquuqda haweenka, iyo xoraynta dadka la addoonsado".¹⁸
2. *Daahir ibnu Caashur* (oo geeriyooday 1907 una dhigmaysay 1325 Hijriya). waxa u soo bandhigay fikrad ah inay Ujeeddooyinka caalmiga ah ee sharciyaynta Islaamku tahay: "xoojinta iyo ilaalinta nidaamka ummadnimo, sinnaanta, xornimada, dulqaadka, iyo ilaalinta fidrada".¹⁹

18- Mohammad Rashid Rida, *al-Waxy al-Moxammadī: thubuut al-Nubuwwah bi al-Qur'an*(Cairo: Mu'asasah Ḥiss al-Dīn, no date) bogga 100.

19- Ibn Ashur, *Maqsid al-Sharicah al-Islmiyyah*, bogga 183

Halkan waxa ka muuqda ujeeddada “xornimada” ee u sheegay *Ibnu Caashuur* iyo tiro kale oo culimada casriga ahi in ay ka duwantahay “xornimada” laga wado xoraynta dadka la adoonsado, sida ay erayga u isticmaali jireen fuqahadii hore.²⁰ Laakiin isna waxa jira erayga “mashii’a/ doonis” oo ay isticmaali jireen fuqahadii hore wuxuna u dhigmaa fikradda “xornimada” ama “doonista xorta ah” marka laga eego dhinacyo fara badan, sida “xorriyada rumaynta” oo ay ku soo aroortay aayadda qura’aanka ah ee (فَمَنْ شَاءَ فَلْيُؤْمِنْ وَمَنْ شَاءَ فَلْيُكْفُرْ).²¹ Dhanka kale erayga “xornimo” dhowaan ayaa adeegsigiisu soo galay Islaamka. Waxana xiiso mudan in *Ibnu Caashur* qirayo fadliga adeegisga erayga “xorriyad” in ay leeyihiin qoraaladii kacdoonkii faransiiska (qoraaladaas oo af Carabi loo tarjumay qarnigii 19aad). Si uu ugu daro “xornimada” mid ka mida ah Ujeeddooyinka Shareecada, waa sidu hadalka u dhigaye *Ibnu Caashuur e*, waxa u faafaahid dheeraada ku sii sameeyay sharraxaada aragtida Islaamka ee la xidhiidha xorriyadda fikirkaa, ta rumaynta, ta cabiraadda waxa uu qofku rabo, ta shaqada; isaga oo ka dhigay qayb aasaasi ah oo shareecada ka mid ah.²²

20- Tusaale ahaan, sida ku qoran buugga al-Din al-Siwasi, Sharx Fatx al-Qadir, 2nd ed. (Beirut: Dar al-Fikr, no date), majaldka.4, bogga 513.

21- Tusaale ahaan eeg, Surahal-Kahf, 18:29.

22- . Tixraacii hore, bogga 270–281.

3. *Sh. Maxamed Al-Qasaali* (oo geeriyooday 1996kii una dhigmaysay 1416 Hijri) Waxa uu ku baaqay in casharro laga qaato 14kii qarni ee la soo dhaafay ee taariikhda Islaamka. Wuxuuna ku daray in “cadaaladda iyo xornimadu” ay ka mid yihiin Ujeeddooyinka Shareecada heerka kowaad ee “lagam maarmaanka ah”.²³ Marka aad looggu fiirsado qoraalada *Sheekh Maxamad Al-Qasaali*, waxa muuqanaysa inay fikradihiiisu ka duulayeen aasaaska Ujeeddooyinka. Sida marka uu ka hadlayo “sinnaanta iyo cadaalada bulshada”.²⁴ Waana labada mabda’ ee uu ku sarreeyay fikiradihiisa caanka ah ee “fiqiga haweenka” iyo qaybo kaleba.
4. *Sheekh Yuusuf al-Qardaawi* (wuxu dhashay 1926kii una dhigmaysa 1345 Hijri), Isaga oo aragtidiisa ka dheehanaya Quraanka wuxu soo bandhigay Ujeeddooyinkan guud ee hoos ku xusan:

23- Gamal Attia, *Naxwa Tafcil Maqasid al-Sharīḥah*, (Amman: al-Machad al-calamī li al-Fikr al-Islamī, 2001), bogga 49.

24- Mawil Issi Dien, *Islamic Law: From Historical Foundations to Contemporary Practice*, ed., Carole Hillenbriyo (Edinburgh: Edinburgh University Press Ltd, 2004), bogga 131 –132.6

“sixitaanka caqiidooyinka la xidhiidha Ilaahay, Rasuulka, iyo xisaabta maalinta aakhiro , sugidda karaamada iyo xuquuqda Aadamaha , ku baaqitaanka cibaadada Alle, layliga nafta, toosinta akhlaaqda, dhismaha qoyska Muslinka ah, xaqsiinta haweenka, dhisidda ummadda aadamaha maragga ku ah, iyo doonista caalam aadami ah oo iswada kaashada.²⁵ Laakiin *Qardaaawi* wuxuu xoojinayaa in aan la gaadhin soo bandhigga argtida Ujeeddooyinka Shareecada iyada oo aanu qofkii soo bandhigayaa yeelan cilmi qoto dheer oo la xidhiidha Kitaabka iyo Sunnada.²⁶

5. *Daaha Al-Calwaani* (oo dhasahy 1935kii una dhigmaysay 1354 Hijriya), isna waxa uu kala soo dhex baxay Qur’aanka kariimak ah wax uu ku magacaabay “Ujeeddooyinka Sare ee sargooyisa Shareecada”. Wuxuuna ku soo uruuryay “Tawxiidka, Layliga Nafta, iyo Camiritaanka Dunida. Mid kasta oo maqaasiddaa ka mid ahina si xeel dheer ayuu baadhitaan ugu sameeyay.²⁷

Ujeeddooyinka Shareecada ee aynu kor ku soo xusnay waa wixii ka soo maaxay maananka

25- Yusuf al-Qaradawi, *Kayf Natacamal Maca al-Qur’an al-karīm?*, 1st ed. (Cairo: Dar al-Shoruq, 1999)



26- Wada sheekaysi aan la qaatays, London, UK, March, 2005, iyo Sarajevo, Bosnia, May, 2007

27- Wada sheekaysi aan la qaatay, Cairo, Egypt, April, 2007

fuqahada casrigan oo la xidhiidha toosinta iyo cusboonaysiita. Mana aha inay cidi sheegato in argtiyahan cusubi ama kuwii horeba yihiin wixii dhabta ahaa ee illaahay ka rabay Ujeeddooyinka Shareecada. Haddii aynu dib u eegno dabeecadda Ilaahay wax u uumay, ka heli mayno wax muujinaya mareegahan, qaab dhismeedyadan, iyo goobooyinkan ay dajiyeen culimadii Ujeeddooyinku ee muujinayay ujeeddooyinka shareecada. Waxa alla wixii aragtiyo ah ama qaybo kale ah ee ku yimi climigan waa wax dad dhigay, oo u dhigay in uu arrimaha ku fahansiyo naftiisa iyo dadka kale.

Sidaa darteed, meesha ugu fog ee aynu ka eegi karno qaybaha Ujeeddooyinka iyo wejiyada kala duwan ee heerarka lagama maarmaanka ah iyo kalinta axkaamta faralka ah; intaas oo dhan waxaynu odhan karnaa waa wejiyo sax ah oo uu cuskan karo caalmika fiqiga ku xeel dheeri.

Waxa inmooga cad fikradihii soo baxay qarnigii 20aad, ee aynu badhkood soo tilmaannay, in ay Ujeeddooyinka Shareecadu tilmaamayso aragtiyaha xeel dheeraha fiqiga isku dayay cusbonanaysiinta fiqiga Islaamka. Iyadoo aynu maanka ku haynayno in markasta sees adag looga dhigayo Ujeeddooyinka Shareecada Kitaabka iyo Sunnada.



Ijtihaadkii Saxaabada ee “Ujeeddooyinka” Shareecada

Fkiradda ah in la baadho Ujeeddooyinka ama yoolka Kitaabka iyo Sunnadu waxay bilaabantay xilligii saxaabada, waxa sidaa laga arki karaa daba gal lugu sameeyay dhowr dhacdo oo xilligii saxbaada dhacay, sida xadiiskii sheegay: “*ku tukada salaadda casar reer Banuu Qureyda*”. Xadiiskaa oo dhowr qaab loo soo wariyay waxaa ugu caansan riwaayadda warinaysa: “inuu nebigu amray saxaabadiisa badhkood inay tagaan reer Banuu Qureyda,²⁸ sallaadda casarna inayna halkaas meel aan ahayn ku tukan karin,²⁹ wakhtigii salaadda casar ayaa ku dhawaaday inuu baxo iyagoon saxaabaddi aanay wali *gaadhin Banuu Qurayda*; waanay is khilaafeen oo laba ra’yi oo kala duwan ayaa ka soo baxay. Qolo waxay ku adkaysatay in aanayn salaadda casar tukanayn iyagoo *Banu Qurayda* gaadha mooyiye; qoladii kalena salaaddi ayay tukatay si aanu wakhtigeedu uga bixin.

28- Waxay ahayd ku dhawaad sanadii 7aad ee hijirayada, goobtuna dhowr mayl ayey ka durugsanayd magaalada madiina al munawara.

29- Moxammad al-Bukharī, al-saxiix, ed. Mustafa al-Bagha, 3rd ed. (Beirut: Dar ibn Kathīr, 1986) majaldka. 1, bogga 321, Abu al-xussain Muslim, saxix Muslim, ed. Mohammad Fouad Abdul-Baqi (Beirut: Dar Ixya al-Turath al-carabī, no date) majaldka. 3, bogga 1391.

Qoloda hore waxay xujaysteen in uu amarka nebigu caddaa uuna ahaa in ay salaada casar *Banuu Qurayda* ku tukadaan, halkay xujada qoloda labaadna ka ahayd in ujeeddada nebig ahayd inay degdegaan oo ay dhakhso u gaadhaan reer *Banuu Qurayda*, aanu se ka wadin in salaadda casar dib loo dhigo intu ka baxayo wakhtigeedu. Raawiga xadiisku waxa u sii raacinyaa in u nebigu labadii qolaba ka aamusay falkoodi.³⁰ Fuqahadu waxay isku raaceen in waxa nebigu ka aamusay ka dhigantahy wax bannaan. Laakiin halkan waxa khilaaf keenay xeel dheerihii fiqiga ee weynaa ee *ilbnu Xasam Al-Daahiri* oo ku khilaafay saxaabadii dhexda ku sii tukatay; waxaanuu yidhi “waxay ahayd inay sugaan inta ay gaadhayaan reer *Banuu Qurayda* oo aanay salaadda casar tukan, sidaas ayaana nebigu faray, haba noqoto inay salaadda casar habeen badhka tukadaane”.³¹

Waxa jirta dhacdo kale oo raad dheer ku leh fahanka amarrada Nebiga “Fahan Ujeeddo” waana arintii dhul qaybsiga ee dhacday wakhtigii *Cumar Binu Al Khataab* oo isagu la tashan jiray saxaabo tiro badan. Dhacdadan saxaabadu waxay ka dalbeen *Cumar*

30- Waxa soo waryay Cabdullah ibnu cumar, sida uu Bukhaari soo saaray, majaldka. 1, bogga 321, iyo Muslim, majaldka. 3, bogga 1391.

31- Alí ibn xasm, al-Muxalla, ed. Lajnah ixya al-Turath al-carabi, 1st ed. (Beirut: Dar al-faruq, no date), majaldka. 3, bogga 291.

inuu dhulalkii ay dowladda Muslimiintu ay qabsatay ee Masar iyo Ciraaq kala ahaa loo qaybiyo mujaahidiinta. Xujana waxay ka dhigteen aayado sheegaya in “qaniimooyinka” loo qaybiyo mujaahidiinta.³² *Cumar Binu Al Khadaab* se arintaas waa ka diiday isagoo xujaysanaya aayad ka caansan kuwa ay iyagu xujetsteen. Aayadaha u cuskaday *Cumar* waxay ahayd “*كي لا يكون دولة بين الأغنياء منكم*”³³ Ujeedadeeduna tahay “*yaynan maalqabeenadu kaligood gacanta ku dhigin lacagta iyo hantida*”.

Sidaa awgeed, *Cumar* iyo saxaabdii kale ee argtidaa la qaadatayba waxay ku macneeyeen aayadaha sheegaya in qaniimooyinka loo qaybiyo mujaahidiinta, in laga lahaa Ujeeddo gaara ah oo ahayd in la isku soo dhaweeyo heerarka dhaqaale ee bulshada qaybeheeda kala duwan.

Waxa kale oo jira dhacdo macno ballaadhan leh, waana joojintii *Cumar* u joojiyay fulinta xadka tuugada gu’ii ay gaajadu ku dhacday reer *Madiina*.³⁴ Wuxuuna fahmay *Cumar* in dadka lugu fuliyo iyaga oo gaajo u bakhtiyaya in aanay

32- Yacqub Abu Yusuf, al-Kharaj(Cairo: al-Madbaacah al-Amiriyyah, 1303 ah) bogga 14, 81, Yaxya ibn adam, al-Kharaj(Lahore, Pakistan: al-Maktabah al-cilmiyyah, 1974) bogga 110

33- Qur’ananka, Surah al-xashar.

34- Mohammad Biltaji, Manhaj cUmar Ibn al-Khattab Fi al-Tashric, 1st ed. (Cairo: Dar al-Salam, 2002) bogga 190.

waafaqsanayn ujeedada uu Islaamku u dhigay cigaabtaa oo ah in cadaaladda la oogo.

Dhacdo saddexaad oo wakhigii *Cumar* dhacdayna waa joojintii uu joojiyay ku camal falka xadiis macnahiisu cadaynayay in askarigu leeyahay qaniimada ninka cadowga ah ee u dilo.³⁵ *Cumar* wuxu go'aamiyay in shan meelood marka loo qaybiyo meel ahaan uu askarigu leeyahy . Ujeeddada *Cumar* waxa ay ahayd ilaalinta sinaanta ciidanka, si ayna qaarna maalqabeeno aad ah u noqonin qaarna sabool; iyo baahi ummadu u qabtay in qaniimooyinka ay ciidanku qaadanayaan waxyaalo kale loogu qabto.

Dahcdo afraad oo fahankii *Cumar* ka mida ahina waa go'aankii *Cumar* ee fardaha (الجداد) lagu daro xoolaha sakada laga bixinayo. Iyadoo ay jirtay in uu Nebiga ku reebay xadiis cad arrintaa, *Cumar* waxuu falkiisaa ku sababeeyay in qiimaha farduhu kor u kocay wakhtigiisa lana qiimo noqday geela, oo Nebigu faralyeelay inuu ku jiro xoolaha sakada laga bixinayo.³⁶ Si kale haddaynu u dhigno, *Cumar* waxa

35- Al-Walīd ibn Rushd (Averrões), Bidayah al-Mujtahid wa Nihayah al-Muqtasid (Beirut: Dar al-Fikr, no date), majaldka. 1, bogga 291

36- Al-Siwasi, Kamal al-Din, Sharx Fatx al-Qadir, majaldka. 2, bogga 192, Abu cumar ibn cabd al-Barr, al-Tamhīd, ed. Mohammad al-Alawi iyo Mohammad al-Bakri (Morocco:

u fahmay Ujeeddada loo faral yeelay sakadu inay tahay abuurid iskaashi bulsho oo ay maalqabeenku bixinayaan sakada saboolkana la siinayo iyadoon loo eegayn nooca hantida uu sheegay Nebigu wakhtigaas oo isbadali karta wakhti-yadii ka danbeeyay.³⁷

Waxa khilaafay balaadhinta hantida laga bixanayo sakada madaahibta fiqiga oo idil madhabta Xanafiga mooyee, taasina waxay ina tusinaysaa sida balaadhan ee uu u faafay fahanka fiqiga ah ee (Daahiriga ahi), *Ibnu Xasam* oo ah fuqahada kuwa qaba (madhabka daahiriga) ayaa waxa uu xoojinayaa in ayna sakadu ku waajibin hantida sideed nooc mooyaane, wuxuuna yidhi:

“Waxa sako lugu leeyahay oo kaliya sideed nooc oo kala ah: dahabka, fidada, hadhuudhka, shaciirta, timirta, geela, lo’da, adhiga (riyaha iyo idaha). Intaas ayeyna sunnadu tilmaantay, sakana luguma le midhaha iyo dalagga beeraha midna. Sidoo kale sako luguma laha

Wasarah cUmum al-Awqaf, 1387ah), majaldka. 4, bogga 216.

37- Yusuf al-Qaradawi, “Fiqh al-Sakah” (Ph.D. diss, al-Ashar University, Egypt, Published by al-Risalah, 15th ed, 1985), majaldka. 1, bogga 229.40

fardaha iyo adoomaha iyo malabka iyo waxyaalaha laga ganacsadoo oo dhan".³⁸

Waxaana muuqata sida ay uuga horimanayso inay sakadu ku lahaato kaalin laxaad leh cadaaladda iyo iskaashiga bulsho oo ah ujeedada loo faral yeelay.

Isagoo ka duulaya manhajiyada qaadashada "mabaadii'da ka danabsa xukunnada" waxa uu ka hor yimi *Sheekh Yuusuf Al Qaradaawi* ra'iyaga culimda sida ay u badanyihiin (jamhuurka) ee weelka sakada, wuxuuna si waafiya ugu muujiyay kitaabkiisa qiimaha badan "Fiqh Al-Sakat" wuxuuna yidhi:

"Sakadda waxa loo sharciyeeyay inay daboosho baahida fuqarada iyo masaakiinta iyo kuwa daymaysan iyo socotada, iyo fulinta danaha guud ee Muslimiinta sida jihaadka dar Alle iyo soo jeclaysiinta Islaamnimada quluubta dadka aan Muslinka ahayn. Waxaan la filan karayn in sharceeda ujeedadeedu ahayd in dusha laga saaro culayska intaas oo dhan qof shan geela ama 40 adhi ah haysta, ama shan kiiloo oo heed ah haysta, lagana dhaafo maalqabeennada waawayn ee warshadaha waawayn iyo dhismayaasha dhaadheer leh. Ama dhakhtarrada iyo qareennada iyo shaqaalaha waawayn ama dadka xirfad layaasha kale ah, ee maalin qudha hela

38- Opinion strongly expressed in: cali ibn xasm, al-Muxalla, ed. Lajnah ixyaal-Turath al-carabi, 1st ed. (Beirut: Dar al-afaq, no date) al-Muxalla, bogga 209.

*waxa uu helo ninka shanta geela ah le ama qofka shanta kiiloo ee heedda ah u go'aan intuu heli lahaa sannado ”.*³⁹

Haddaba waxaynu soo tabinay tusaaleyaal inagaga filan caddaynta ujeeddada aan ka leenahay arrinkaas, oo ah inaynu soo bandhigno samaysanka aragtiyaha Ujeeddooyina, iyo inay gaadhi karaan kaalinta asallada joogtada ah ee shareecada. Hasa yeeshee, waxa xusid mudan in mabda'a ah qaadashada Ujeeddooyinka iyo u adeegsigooda ee axkaamta sharciga oo dhan aanay suurto gal ahayn, siiba markay joogto axkaamta “Cibaadooyinka”.

Imaam al-Bukhaari waxa uu *Cumar Binu Khaddaab* ka soo wariyay xilligii Khilaafadiisa inuu yidhi “Ma jirto sabab aynu dhoollo tusid iyo awood muujin u samaynno iyadoo ilaahay cisi siiyay Muslinkii gaaladiina dulleeyay”. Halkan waxa uu *Cumar* tilmaamayaa xikmaddii looga jeeday amarkii Nebiga ee ahaa inay gucleeyaan muslimiintu markii ay *Makka* galayeen, oo ahayd in gaalada la tuso xoogga Muslimiinta. Arrinkaana waxa keenay markii ay Gaaladu dhexdooda ku faafiyeen inay Muslimiinta itaal darreeyeen kadib markii ay ku dheceen xanuunadii *Madiina*. *Cumar* wuxuu hadalkiisii raaciyay “ku ma daynayno hal shayna sidii aanu u samayn jirnay wakhtigii Nebiga”.⁴⁰

39- Al-Qaradawi, “Fiqh al-Sakah,” majaldka. 1, bogga 146–148.

40- Al-Bukhari, al-saxix, Kitab al-xajj, Bab al-Raml.

Sidaas ayuuna u kala saaray *Cumar* “cibaadooyinka” iyo “mucaaamalaatka” kale.

Imama al-Shaatibina sidoo kale waxa uu kala saaray labadaa arrin. Wuxuuna yidhi “Asal waxa u ah cibaadooyinka inay yihiin Alle Caabud la gudanayo, iyada oo aan loo fiirfiirsanayn macnayaashooda hoose. Waxa kale oo asal ah inaan la samayn amar la’aan; oo caqliyadu inay cibaadooyin soo kordhiyaan meesha kuma jirto. Wixii ah dhaqan waxa asal u aha in loo fiirfiirsado macnahooda; waxa kale oo asal u ah in la bedeli karo haddii aanay jirin sabab adag oo lagu joojiyo isbedelkaa..”⁴¹

Sidaa darteed, qaacidada guud waxay tahay inay cibaadooyinku ahaadaan shay sugan oo qofka muslimku uu u samaynayo sidii Nebigii iyo asxaabtiisi u sameeyeen, iyagaana ina amraya inaynaan wax kastoo mucaamalaadka la xidhiidha lagaga dayan ee aynu eegno Ujeeddooyinka laga lahaa iyo baahida markaa taagnayd.

Aragtiyihii u horreeyay ee “Ujeeddooyinka”

Waxay bilaabantay aragtiyaha Ujeeddooyinka iyo qaybqaybintoodu wakhtigii saxaabada kadib. Hasa yeeshee, cilmiga ujeeddooyinka qaabkeedan hadda aynu u naqaan waxa dhigay fuqahadii danbe ee

41- Al-Shatibi, al-Muwafaqat, majaldka. 2, bogga 6.

qarniyadii 5aad ilaa 8aad. Waana arrinka aynu kaga hadli doonno qaybaha innoo soo socda. Laakiin waxay tahay inaynu ogaano waa in ay fikradda Ujeeddooyinku jirtay saddexdii qarni ee horreeyay iyadoo la odhan jiray magcyo kala ahaa (xikmadaha, cilladaha, ujeeddooyinka, ama macnayaasha oo ay isticmaali jireen usuuliyiinta afarta madhab). Taa waxa tusaale ka ah ka soo dheegashada axkaamta iyadii oo loo marayo qiyaaska noocyidiisa kala duwan, ama “mid jeclaysiga” ama hirgalinta dano gaar ah. Hasa yeeshee, Ujeeddooyinka Shareecada oo mawduuc gaarkiisa u taagan ah oo baadhitaano iyo qoraallo u gaar ahna leh muu soo bixin illaa laga soo gadhayay dhammaadkii qarnigii 3aad ee Hijiriga. Kadibna waxa soo baxday argtida “Heerarka lagama maarmaanka ah ”oo uu soo kordhiyay *Imam Al-juwani* (oo geeriyooday 478 Hijirayda) xilli danbe oo ahaa qarnigii 5aad ee Hijiriyada.

Waxaynu si kooban u soo bandhigi doonnaa isku daygii u horreeyay ee hormarinta aragtida Ujeeddooyinka intii u dhaxaysay qarnigii 3aad ilaa kii 5aad ee Hijiriyada.

1. *Tirmadi Al-Xakiim* (oo geeriyooday 908 una dhigmaysay 296 Hijri): waxa lugu tiriyaa kitaabka *Tirmadi Al Xakiim* ee “*Salaadda iyo*

Ujeeddooyinkeeda"⁴² kitaabkii u horreeyay ee laga qoro mawduuca Ujeeddooyinka, sida aynu ciwaanka kitaabkaba ka arkayno waxa ku soo aroortay erayga ujeeddo, Kitaabku waxa uu ka waramayaa salaadda iyo xikmadaha iyo sirta ruuxiga ah ee ku jira falalka salaada oo idil. Hadalkiisana waxa saamayn weyn ku leh Suufiyada. Waxaana weeedhihiisa ka mid ah: "*ficillada salaadda ee qofku waxay u kala duwanayihiin xaaladaha kala duwan ee qofka. Istaagga wuxu kaga baxaa dhoohnaanta, qiblo u jeedsadkana waxa uu kaga baxaa jeesjeesiga iyo bixidda kale, takbiirtaa waxa uu kaga baxaa kibirka, ammaanta Eebena waxa uu kaga baxaa mooganaanta, rukuucdana waxa uu kaga baxaa qalafsanaatan, sujuudana waxa uu kaga baxaa danbiga ..*" Tirmadi Al Xakiim waxa kale oo uu leeyahay kitaab kan ka ag dhow oo uu ugu magac daray "*Siraha Xajka*".⁴³

2. *Abu Sayd Al Balakhi* (oo geeriyooday 933kii una dhigmaysay 322 Hijriyada), waxa loo aqoonsanyahy kitaabkiisa "*الإبانة عن علل الديانة*"

42- According to Ahmad al-Raysuni, *Na-ariyyat al-Maqasid* cind al-Imam al Shtibi, 1st ed. (Herndon, VA: IIIT, 1992).

43- Also according to Ahmad al-Raysuni, in: Mohamed Saleem el-Awa, ed., *Maqsid al-Sharicah al-Islamiyyah: Dirasatt fi Qaday al-Manhaj wa majalat al-Tadbiq*(Cairo: al-Furqan Islamic Heritage Foundation, al-Maqasid Research Centre, 2006), bogga 181.

dhiganihii u horreeyay ee Ujeeddooyinka Shareecada ka warramay dhanka Mucaamalaatka, waxa uuna ku soo bandhigay ujeeddooyin ku qarsoon xukunada shareecada gunteeda. Sidoo kale waxa uu ka qoray kitaab kale oo la yidhaa “مصلح الأبدان والنفوس” oo uu ku caddeeyay sida hab dhaqanka Islaamka iyo xukunnada shareecadu ay uuga qabqaadanayaan daryeelidda caafmaadka mid jidheed iyo mid nafsadeedba.⁴⁴

3. *Al Qafaal Al-Kibiir Ash-Shaashi* (oo geeriyooday 975 una dhigmaysay 365 Hijri), Qoraalkii ugu horreeyay ee aan ke helay *Daar Al-Kitaab Al-Masri* ee ka hadlaya Ujeeddooyinka wuxu ahaa kitaabka *Qaffaal* ee “*Maxaasin Ash-shariic’a*”.⁴⁵ Qafaal waxa uu ku bilaabay hordhac qaadanaya 20

44- Mohammad Kamal Imam, *al-Dal'il al-Irshadi' Ila Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah* (London: al-Maqasid Research Centre, 2007), Introduction, bogga 3.

45- I learnt about the book from Professor Ahmad al-Raysuni of the Organisation of Islamic Conference (OIC), Fiqh Council, in Jeddah (Oral Conversation, Jeddah, Saudi Arabia, April 2006). I obtained a microfilm of the manuscript with the help of Professor Ayman Fouad, who edits manuscripts for Al-Furqan Islamic Heritage Foundation, London, UK (Cairo, July 2006). Al-Qaffal al-Shashi, “Maxasin al-Shara'ic,” in Fiqh Shafici, Manuscript No. 263(Cairo, Dar al-Kutub: 358ah/ 969ce).

safxadood, kadibna waxa uu u qaybinayaa habka soo jireenka ah ee ujeeddooyinka loogu qaybiyo kutubta fiqiga. Waxanuu ka bilaabay dahaarada, waysada, salaadda.. iwm. Marka hore si duuduuba ayuu xukunka u sheegayaa, ka dibna, waxa uu si ballaadhan u sharxayaa Ujeeddada xukunka iyo xikamada ka danbaysa. Qoraalku waxa uu ku qoran yahay xaashiyo waawayn oo ka kooban 400 bog. xaashida uugu dambeysa waxa ku qoran taariikhdii la dhameeyay qoritaankiisa oo ah 11kii Rabiicul Awal ee gugii 358 Hijiriga, kuna beegnayd 7dii bishii 1aad ee sanaddi 969 M. Arrimo badan oo fiqi ah ayuu kitaabku gorfaynayaa, hasa yeeshee, waxa uu axkaamta u kala qaadqaadayaa midmid isagoo ku xidhiidhinya aragtida guud ee Ujeeddooyinka. Iyadoo ay haddaba sidaa tahay haddaba kitaabkan waxa loo aqoonsanyahay in uu yahay kordhsiimo weyn oo la xidhiidha hormarinta aragtida Ujeeddooyinka Shareecada.

Cabdinaasir al-Laqaani ayaa tafatiray qayb ka mida kitaabka Qafaal ee “*Maxaasin Ash-sharica*”. Waxayna ahayd risaaladiisi PHD-ga ee u ka diyaaryay Jaamacadda *Wales* ee dalka *Ingiriiska*, sannadkii

2004.⁴⁶ Waxaanu kaga waramay *Mua'wil Cisuddin*, oo ahaa saxihii risaalladdaa, diyaarinta buuggan muhimada uu leeyahay qoraalkani iyo sida uu uga qaybqaatay *Ash-Shaashi* aragtiyaha fiqiga Islaamka. Waxaanu yidhi:

*“Muhimmada ay leedahay amarrada sharicga ahi waxay salka ku haysaa macnayaashooda, ha u badnaato soo bandhigo sharci dajiyuhu. Waxa tusaale ka ah mamnuuciddii khamriga oo sharcigu u arko cabbitaankiisa in lagu sarkhraamayo inay tahay qaab shaydaanku uu u soo mari karo isku diritaanka dadka. arrintaas oo ka horjoogsanaysa xusitaanka Ilaahay iyo salaadda, waxaana ka muuqanaysa isku dayga Al Shaashi ee dhawr isku day oo uu ugu gargaaray madhabkiisa Shaaficiga ah, isagoo sheegaya tiro badan oo aragtiyo fiqiga shaaficagu qabo, iyo sababaha amarradaasi uu sharcigu u dejiyay.”*⁴⁷

Sidaas u uuga dhigay *Qafaal al-Shaashi* “macnayaasha” iyo “sababaha” seeska fugu horreeya ee ahanka waxa loo arkaa soo bandhigayadii ugu horreeyay ee aragtida Ujeeddooyinka, haba ahaado soo bixitaankeedu farac ka mida furuucda madhabka shaaficiga e. waxa

46- Al-Lughani, Abd al-Nasir, “dabcad cusub ee Kitabka Mahasin al-Sharicah ee u qoray al-Qaffal al-Shashi.” (Ph.D. diss, University of Manchester, 2004)

47- Issi Dien, Islamic Law, bogga 106.

kle oo aynu arki karnaa inay soo bandhigyada *al-Shaashi* ee aragtiyaha lagama maarmaanka ah iyo Ujeeddooyinka siyaasadda iyo martabadda “mukarramaatka/waxyaabaha la karaameeyay” inay gogol xaadh u sii noqdeen *Imam Al Juwayni* iyo *Imam Al Qasaali* ee madhabka Shaaficaga iyo dhanka kale Ujeeddooyinka shareecada si isleeg uga warramay, iyagoo raacay hormarinta eray bixinta aynu sheegnay. faas oo aynu ku sii fahfaahin doonona bogagga soo socda.

4. *Ibnu Baabawayhi Al Qummi* (oo geeriyooday 991 kii una dhigmaysay 381 Hijri), dadka qaar ayaa u arka in baadhitaanka Ujeeddooyinka shareecadu ku koobnaayeen uun madaahibta fiqiga Sunaha ilaa qarnigii 20aad. Hasa yeeshee, diraasaddii ugu horeysay ee dhamystiran ee loo gaar yeelo Ujeeddooyinka shareecada waxa qoray *Ibnu Baabawayh Al Saduq Al Qummi*, oo ah faqiih wayn oo shiici ah oo noolaa qarnigii 4aad ee Hijirayada. Waxa uu qoray kitaab ka kooban 335 qaybood oo ku saabsan mawduucaasi,⁴⁸ kitaabkaas oo la yidhaa “*Cilal Al-Shariica*” waxa uu ku soo bandhigayaa tafsiiir caqliyaysan sidii loo rumayn lahaa Ilaahay

48- Prof. Mohammad Kamal Imam of Alexandria University’s Faculty of Law (waraysi aan la yeeshay, Cairo, Egypt, August, 2006).

iyoo Anbiyada iyo caqiidada inteeda kale, sidoo kale waxa uu sharax ka bixinayaa siraha ku qarsoon salaadda, soonka, xajka, sadaqada, u sama falka waalidak iwm ee camalada waajibka ah ee kale.⁴⁹

5. *Al Caamiri Al Faylasuuf* (oo geeriyooday 991 kii una dhigmaysay 381 Hijriga), Qoraalkii u hureeyay ee aragti ahaan ugu hadlay Ujeeddooyinka shareecada sidaynu u naqaan maanta waxa weeye kitaabkii *Al Caamiri Al Faylasuuf* ee “*Al Iclaam Bi Mnaaqib Al Islaam*.”⁵⁰ Hasa yeeshee, qoraalka Caamiri waxa uu ku koobanyhay ciqaabta danbiyada siiba “xuduudaha”.

Sidaasay dejinta Ujeeddooyinka ee heerka lagama maarmaanka ahi ay uga soo hormartay qarnigii 5aad ee hijiryada. Intaa dabadeed waxay soo gaadhay aragtida Ujeeddooyinku meesheeda uugu saraysa Qarnigii 8aad ee Hijiryada (haddii aynu ka reebno hormayntii lugu daray qarnigii 20 aad ee Miilaadiga).

49- Ibn Babawayh al-saduq al-Qummi, cllal al-Shara'ic, ed.

50- Prof. Ahmad al-Raysuni, waraysi aan la yeeshay, Jeddah, November 2006. Waxa uu iisiiyay tixraac: Abu-xasan al-Faylasuf al-camiri, al-iclam biMnaaqib al-Islam, ed. Ahmad Ghurab (Cairo: Dar al-Kitab al-carabi, 1967).

**Qaybta 2^{aad}: IMAAMYADII
UJEEDDOOYINKA:**

Qaybta 2^{aad}: IMAAMYADII UJEEDDOOYINKA:

Qarnigii 5^{aad} ee Hijirga ilaa kii 8^{aad}.

Qarnigii 5^{aad} ee Hijiryada waxa soo baxay waxa u ku magacaabay *Cabdalla Binu Beeh* “Falsafadda sharci dajinta Islaamka”.⁵¹ Isla wakhtigaa waxa soo daahiray in ay sifooyinka xirfadeed iyo dul istaagga fatwooyinkii wakhtiyadaa jiray aanay ka jawaabayn arirmo badan oo mucaamalaatkii xadaaraddii ay umaddu gaadhay ka mid ahaa. Iyadoo la daboolayo baahiyaha soo cusbaanada ayaa waxaa soo baxday aragtida “المصلحة المرسلة” ama “Danta Furan”; waana danaha iyo faa’idooyinka baahidoodu ay soo baxday ee fuqahadu waayeen inay ku arooryaan kitaabka iyo sunnada. Aragtidaasi waxa ay buuxisay kaaalintii bannaanayd ee laga dhaxlay aragtidi xaraf raaca iyo ku dayashada ahayd. Kadibna waxay keentey aragtida Ujeeddooyinka Shareecada Islaamka.

Waxaana ka mid ag fuqahada sida wayn uga qaybqaatay hormarinta arigtida Ujeeddooyinka intii u dhaxaysay Qarnigii 5 aad ilaa Qarnigii 8aad ee hijirayada” *Abu Macaali Al Juwayni, Abu Xaamid Al Qasaali, Cis binu Cabdisalaam, Shihaab Al Diin Al Qaraafi , Shamsul Diin Ibnu Al Qayim*, iyo uugu

51- Wada sheekaysi aan la yeeshay Sheekh Bin Bayyah ,
Makkah, Saudi Arabia, April 2006.

danbayn *Abu Isxaaq Ash-Shaadibi* oo ugu door roonaa.

Imaam al Juwayni iyo “Baahiyaha guud”

Waxa uu qoray *Imam Al Juwayni* (oo geeriyooday 1085 kii una dhigmaysay 478 Hijriga) kitaabkiisa “*Al Burhaan Fii Usul Al Fiqhi*” waxuuna ahaa baadhitaankii ugu horreeyay ee ka hadla aragtida heerarka “lagama maarmaanka ah” qaab u dhow sidan aynu maanta u hayno aragtidaas. Juwayni waxa u soo jeediyay heerar uu u qaybiyay shan oo sida tan soo socota ah:

“Lagama maarmaanka” iyo wixii la xidhiidha sida Qisaasta. Qaybta labaad wixii la xidhiidha “Baahiyaha guud” sida wax kala kiraysiga dadka dhexdooda. Qaybta sadexaad oo la xidhiidha dhowrista milgaha iyo ka dheeraanshaha wixii ka soo hor jeeda. Qaybta afraadna waxay ku soo ururaysaa Sunnooyinka. Qaybta shanaadna waa wax aan cillayn cad lahayn, iyo ujeeddo sugan . Kuwaas oo aad u yar.⁵²

Waxyaalaha u soo jeedyaya *Juwayni* waxa ka mida ahaa in Ujeeddooyinka shareecada Islaamku tahay:

52- Al-Juwayni, Abdul-Malik, al-Burhan fi Usul al-Fiqh, ed. Abdul-Asim alDeeb, 4th ed. (Mansurah: al-Wafa’, 1418 ah/1998 ce), majaldka. 2, bogga 621, 622, 747.

“ilaalinta dadka caqiidadooda, nafahooda, caqliyadooda, ehelkooda, iyo maalkooda”.⁵³

Waxaanan arkaa inuu kitaabka kale ee *Juwayni* ee “*Qayaaath Al Umam / غياث الأمم*” ama “Badbaadada Umadaha” in uu yahay korodhsiimo muhiima oo kale oo ku soo korodhay aragtida Ujeeddooyinka Shareecada. Inkastoo kitaabka intiisa badani ku saabsantahay siyaasada sharciga. Waxa uu cabsi ka muujiyay *Juwani* inay dabar go’aan dadka shreecada xanbaarsani ama soo gudbiya madaahibtaa kala duwan. Waxa uu ka soo qaadayaa inuu maalin un dhaco arinkaasi, isagoo ka duulaya ka soo qaaditaankaas waxuu salaysnayaa *Juwayni* xukunada Shareecada ee baababka fiqiga ee kala duwan “Asalada qadciga ah” , iyo “Muxkamaatka aanay iska hor imanayn qaababka loo fasiro” waa sida uu u dhigay e.

Waxaanu tibaaxay *Juwayni* inay "muxkamaatakani" yihiin Ujeeddooyinka, ee qaybaha kala duwan ee fiqiga, sida ujeedada raali ahaansha ee wax kala iibsiga. Iyo ujeedada baahi tirka dadka baahan marka loo eego baabka sakada. Iyo ujeedada fududaynta ee baabka nijaasada iwm⁵⁴.

53- Tixraacii hore.

54- Al-Juwayni, Ghath al-Umam fi lltiyath al-culam, ed. Abdul-Asim al-Deeb (Qatar: Wasaaradda Arrimaha Diinta, 1400 ah), bogga 434.

Waxaan u arkaa kitaabkaa *Juwayni* inuu yahay soo bandhig dhamaystiran oo dib luugu cosboonaysiin karo fiqiga Islaamka iyadoo la cuskanayo Ujeeddooyinka shareecada.

Imam al Qasaali iyo “Kala horumarinta waxyaabaha lagama maarmaanka ah ”

Abuu Xaamid Al Qasaali (oo geeriyooday 1111kii oo waafaqsanayd 505 Hijriga), waxa uu ahaa ardaygii *Juwayni*, wuxa uu hore u mariyay aragtidi macalinkii, waana sida ku cad kitaabkiisa “*Al Mustasfa*”. Wuxuuna agaasimay waxyaabihii lagama maarnaanka ahaa ee uu soo bandhigay *Juwayni* oo sidan ayuu u dhigay: Diinta, nafta, caqliga, taranka, maalka.⁵⁵ *Qasaali* waxa uu halabuuray erayga (xifdinta/ilaalinta) marka uu ku guda jiro kuwaa lagama maarmaanka ah . Inkasta oo uu kala saaray falanqaynta waxyaabahaasi, *Qasaali* umuu keenin xujjo (macno usuuli ah). Bal se waxu u gaadhay heer uu ku magacaabo “Masaalix al mawhuuma” ama “Ujeeddooyinka Ismoodsiinta”⁵⁶. Sababta u sidaa u yidhina waxay ahayd in Ujeeddooyinka laga soo dheegtay kitaabka Eebbe, ee aanay ahayn mid si

55- Al-Ghasali, al-Mustasfa bogga 258.

56- Tixraacii hore., bogga 172.

toosa luugu sheegay, sida daliilada shareecada ee kale la xujaysataa ay yihiin.

Iyadoo ay sidaa tahay, haddana *Qasaali* si toosa ayuu Ujeeddooyinka ugu adeegsaday in ay noqoto sees lagu dul dhiso karo tiro xukunno ah. tusaala ahaan isagoo arinkaa caddayna waxa u yidhi:

“danaha kolka loo eego shareecada waa saddex qaybood: qayb ay shareecadu sugtay , qayb ay burisay, iyo qayb ayna suginna isla markaana ayna burin. Wixii shareecadu ay u markhaati kacdaa waa suganyihiin, waxii ka soo baxaana waxa uu u soo noqonayaa qiyaaska, waana ka soo dheegashada xukunka macqulka ah ee naska iyo ijmaaca, tusaale ahaan sida xukunka xaaraantimeeya wax kastoo oo maanka doorya cabitaan iyo cunnaba, iyadoo laga qiyaas qaadanayo khamriga, oo loo xaarantimeeyay si loo ilaaliyo caqliga, oo ah “shardiga faralka ah”, Ujeeddada sharciga ee abuuritaanku waa ilaalintan shantan: diintooda, nafhooga, caqliyadooda, tarankooda, iyo maalkooda. Wax kastoo keensanaya ilaalinta shantan saldhigna u ah waa maslaxad , waxkastoo shantan ka soo horjeedaana waa mafsado, ka hor tageeduna waa maslaxad”.⁵⁷

Sidoo kale *Qasaali* waxa uu hal abuuray “qaacido” ku dhisan kala hor marinta waxyaabahaa lagama maarmaanka ah sida uu u soo bandhigay. Taasina waxay keensanaysaa in la si kala mudnaan siiyo

57- Tixraacii hore., bogga 174.

sida ay u kula sarreeyaan, marka ay waxyaabahaasi macnayaal iska hor imanaya yeeshaan..⁵⁸

Cisudiin Binu Cabdisalaan iyo “Xikmada ka Danbaysa Axkaamta”

Waxa uu qoray *Cisudiin Binu Cabdisalaan* (oo geeriyooday gu’gii 1209kii ee u dhigmaysay 660 Hijriga) laba kitaab oo kookooban oo xidhiidh la leh Ujeeddooyinka. Waxaanu xoogga saaray “xikmadda ku guda jirta axkaamta Islaamka”. Labadan kitaab waxay kala yihiin: ‘*Ujeedada salaadda*’ iyo ‘*Ujeedada soonka*’.⁵⁹ Hasa yeeshee, ka qayb qaadashada la taaban karo ee u soo kordhiyay *Cisudiin* ee hormarinta aragtida Ujeeddooyinka waxa uu ku soo bandhigay kitaabkiisa “*Qawaacid al axkaam fii masaali al anaam* / قواعد الأحكام في مصالح الأنام”.

Waxaaabaha kala ee *Cisudiin Binu Cabdisalaan* uu qabtay ee aan ka ahayn baadhitaankiisa balaadhan ee garashada masaalaxdda iyo mafaasadada, waa inuu isku xidhay xukunada Ujeeddooyinka iyo xikmadaha ku dheehan, waxa uu ka qorayna wax ka mida:

58- Tixraacii hore., bogga 265.

59- Al-clss ibn cabd al-Salam, *Maqasid al-Sawm*, ed. Iyad al-Tabba, 2nd ed. (Beirut: Dar al-Fikr, 1995).

60- Tixraacii hore., majaldka. 2, bogga 160.

“Ciddii u kuur gasha Ujeeddooyinka shareecada sida ay masaalixda u keenaan mafaasadadana uga hortagaan waxaa uu ogaanayaa in aan la ogolayn in masalaxad la baylihiyo , mafaasidaasna loo dhawaado, xitaa hadduunna jirin nas cad ama ijmaac ama qiyaas u gaar ahi , maxaa yeelay, fahanka sharciga laftiisa ayaa sidaa sheegaya .⁶⁰

Imaam Al-Qarraafi iyo “Noocyada kala Duwan ee Falalka Nebiga (SCW)”

Waxay soo if baxaday ka qaybqaadashadii *Shihaab Al Diin Al Qaraafi* (oo geeriyooday gu’gii 1285kii ee waafaqsanaa 684 Hijriga,) ee aragtida Ujeeddooyinka shareecadu qaabkan ay maanta tahay, kolkii uu kala saaray falalkii kala duwaana ee Nebiga SCWS, isagoo asal uga dhigaya “ujeedadii’ nebigu SCWS ka lahaa. Waxa uu ku yidhi *Qaraafi* kitaabkiisa “*Al Furuuq*”:

“Farqi baa u dhexeeya falalkii Nebiga SCWS ee markuu gar soorayo iyo markuu fatwoonayo, waxayna kala yihiin “hogaamin” iyo “gaadhsiin diimeed”, raadadka falalkiisuna way ku kala duwanyihiin shareecada dhexdeeda, oo wax kasta oo uu falay isagoo gaadhsiin iyo gudbin diimeed ka wada, wuxu noqonayaa

61- Shihab al Din al-Qaraafi, al -Furuq(Maca Hawamishih), ed. Khalil Mansour (Beirut: Dar al-Kutub al-cilmiyyah, 1998), majaldka. 1, bogga 357.

xukun caam ah. Hasa yeeshee, diristiisti ciidamada ama qeybqebintii xoolaha ama u xilsaariddii garsoorka iyo qaybinya qaniimooyinka iyo heshiis galistiisi waxay ahaayeen falal hoggaan ah ee may ahayn mid gudbin ah".⁶¹

Sidaas ayuu u balaadhiyay *Qaraafi* macnaha Ujeeddooyinka oo uugu xidhay ujeedada Nebigu uga jeeday falalkiisa, *Ibnu Caashuur* (oo geeriyooday 1976kii) wuu ka yeelay furuuqdan *Qaraafi* ee aynu soo sheegnay qayb ka mida markuu qeexayay Ujeeddooyinka sida soo socota.⁶²

Qaraafi sidoo kale waxa uu wax ka qoray “*furitaanka marmarsiiyo lugu xaqiijinayo dano*”, taasina waa ballaadhin kale oo muhiim u ah aragtida Ujeeddooyinka shareecada dhexdeeda, oo waxa uu yidhi “*dawgii dhib inoo keenaya waa in la awdaa, kii dan inna gaadhsiinayana waa in la furaa*.”⁶³ Sidaas ayuuna *Qaraafi* ugu koobin awditaanka wixi dhib keenaya uun, siday fahfaahinteedu inoo soo socoto.

62- Ibn Ashur, *Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah*, bogga 100.

63- Al-Qaraafi, *al-Dhakhirah*, majaldka. 1, bogga 153. Al-Qaraafi, *al-Furuq* (Maca Hawamishih), majaldka. 2, bogga 60.

Imaam Ibnu al-qayim iyo “Xaqiiqada Shareecada”

Wuxu ahaa *Shamsdiin Ibnu Qayim* (oo geeriyooday gu’gii 748 H, 1347 M) ardaygii *Shaykhul Islaam Axmad Ibnu Taymiya* (oo geeriyooday 728 H, 1328 M), ka qayb qaadashadiisa aragtida Ujeeddooyinka ee u horeysaysay waxay ahayd baadhistiisi uu ku magacaabay “الحيل الفقهية/xeeladaha fiqiga”, taas oo ku taagan xaqiiqada ah in xeeladuhu ay ka hor imanayaan Ujeeddooyinka, xeeladaha oo ah heshiis xaaraan ah, sida ribada, laaluushka, haba u ee kaato qaab sharci ah e’, oo tusaale ahaan ribada waxay gashaa iibka, laaluushkuna wuxuu gala wax isa siinta, iwm. *Ibnu Qayim waxa uu yidhi:*

“Waxa ku tusinaya baadil tinnimda iyo xaaraan tinimada xeeladaha inuu Ilaahay sarree oo korreeye uu waajib yeelay arrimo, kuwa kalena uu innaga reebay, waxay keensanayaan arrimaasi ee masaalix iyo dano u ah addoomihiisa, haduu adoonku u xeeladaysto xalaalaysiga wixii uu Ilaahay ka xarimay, oo uu baddalo sharciga Ilaahay, wuxu noqonayaa mid isku dayay inuu diinta Ilaahay fasahaadiyo, dhowr dhinacba, oo midkood tahay baadilnimada arinka la xeeladaystay xukunkiisa sharciga ah, iyo burinta xikmadiisaba, talbaadn waa in arinka la xeeladaystay uugalama jeeddo arinka muuqda ee sharcigu ogalyahay, ee waxaan uga jeeda arininka sharcigu xaarantimeeyay, oo tusaale ahaan ninka ribooleha ahi wuxu beegsanayaa ribada xaaraanta ah, sawirka iibsi ee

banaann ee uu ku xeeladaysanayaana maaha mid loola jeeddo isaga laf ahaantiisa, iyo sida ninka xoolihiisa nin kale u hibaynaya isagoo ka baxsanaya faral sako oo ku waajibaya, hibayntaa dusha ka muuqata loolama jeeddo. Shareecadu waxay ruuxda u taagantahy halkay cuntooyinka iyo dawooyinku u taaganyihiin jidhka, taasina waa in xaqiiqooyinka arimaha la eego, ee aan la eegin magacayada iyo sawirrada guud".

Wuxuu Ibnu Al Qayim ku soo ururiyay dariiqadiisa fiqiga inay ku dhisantahy "xikmad iyo danaha dadka" waa kan isagoo erayo cadcad u adeegsanaya bayaaminta arinkaa:

"Shareecada dhismaheeda iyo seeskeedu waa xikmad u adeegaysa danaha adoomaha. Dhamaanteedna waa cadaalad, dhamaanteedna waa naxriis, dhamaanteedna waa xikmad, dhamaanteedna waa maslaxad. Arrin kasta oo ka baxa cadliga oo u baxa dulmiga, ama ka baxa naxriista oo u baxa naxriis darrada, ama ka baxa xikmadda oo u baxa dheeldheelka, ama ka baxa maslaxadda oo baxa fasaadka shareecada, waxyaabahaasi dhammaantood ka mid maaha, haba lugu soo geliyo ta'wiil ama tafsiiir gaar ah e".⁶⁴

Cutubkan aynu soo dheeganay wuxu u taagan yahay qaacidada ka mid ah qawaacidka fududaysa

64- ShamsuddIn ibn al-Qayyim, Iclam al-Muwaqqicin, ed. Taha Abdul Rauf Saad (Beirut: Dar al-Jil, 1973), majaldka. 1, bogga 333.

garashada Shareecada Islaamka Waaxnu halkan ka arki karnaa Ujeeddooyinkii Shareecada oo la dhigay kalintii ku haboonayd. Taas oo ah seeskii ama dhismihii ama laguba sifayn karo inay tahay falsafaddii Shareecada, markaynu ku sheegno odhaah casri ah, Waana siduu u dhigay *Imam Ash-Shaadibi*. Isaga oo adeegsanaya weedho cadcad oo xooggan.

Imaam ash-Shaadibi iyo dib u eegista inay Ujeeddooyinku yihiin “Asal ka mida asallada shareecada”

Eray bixinnada Ujeeddooyinka ee u adeegsaday *Abu Isxaaq Ash-shaadibi* (oo geeriyooday gu’gii 790 H, 1388 M) waa isla kuwii ay adeegsadeen *Juwayni* iyo ardaygiisi *Qasaali*. Hasa yeeshee, waxaan isleeyahay kitaabkiisa “Al muwaafaqaat fi usuul al shariica / الموافقات في أصول الشريعة” waxa ku soo gudbayay seddex arimood oo muhim ah, aadana u hormarayay aragtida Ujeeddooyinka.

Arrinta 1aad- “Danaha furan ” oo looga gudbo “asallada shareecada”

Ujeeddooyinka shareecadu waxay ahady intuuna soo bixin kitaataabka “*muwaafaqaatku*” ee *Shaadibi* qayb ka ah “*masaalixda mursalka*” waxa loo yaqaan, marnaba loo ma eegin inay tahay iyada lafteedu “asalada shareecada”. Oo ayna ka farcamayn asal

kale, horena waynu u soo tilmaannay, Shaadibi kitaabkiisa “muwaafaqaat” waxa uu ku bilaabay aayado Quraanka kariimka ka mid ah, oo u ku caddaynayo inuu Ilaahay khalqigiisa ujeeddooyin ka leeyahy, iyo soo saarista nebiyada, iyo soo dajinta shareecada.⁶⁵ Dabadeed Ujeeddooyinka waxuu ka yeelay asallada diinta, iyo qawaacida shareecada ee guud.⁶⁶

Arrinta 2aad- “xikamada ka danbaysa xukunada shareecada” oo looga gudbo “qaacidooyinka xukunada shareecada”

Wuxuu cuskaday *Shaadibi* fikradda ah inay mudnaan leedahay soo hormarinta Ujeeddooyinka iyo fidintoodu, halkaas oo uu gadhaasiiyay in “kulliyaatka” siiba kuwa lagama maarmaanka aan lugu xukumi karin, xukunka “hoose/jus’iyaad” ka”.⁶⁷ Mabda’aasina wuxu keenay guuris laga guuro usuushii lagu dayanayay oo ay ka mid tahay madhabka Maalikiga ahi; madhabkaas oo ah madhabkii *Al-Shaadibi*. Sababtoo ah madhabtaasina waxay markasta mudnaanta siiynaysaa daliilka “gaar ahaaneed” kana hor marinaysaa ka guud.⁶⁸ *Shaadibi* waxa kale oo uu shardi ka dhigay

65- Al-Shatibi, al-Muwafaqat, majaldka. 2, bogga 6.

66- Tixraacii hore., majaldka. 2, bogga 25.

67- Tixraacii hore., majaldka. 2, bogga 61.

68- Al-Raysuni, Na-ariyyah al-Maqasid, bogga 169

aqoonta Ujeeddoyinka si ijtihaad heer kasta gaadhaya loo samayn karo.⁶⁹

Arrinta 3aad: “Danniga/Malaynta” oo looga guuro “Qadciga/sar goynta”

Shaadibi si u adkeeyo meesha cusub ee uu geeyay Ujeeddooyinka shareecada marka la eega usuusha fiqiga wuxu kitaabkiisa ku bilaabay xujooyin sheegaya “qadciniimada” hadba waxa la dabagalayo, waana manhajka sideedaba lugu gaadho Ujeeddooyinka. Wuxuuna ku saleeyay tiro badan oo daliillo ah oo uu soo arooriyay,⁷⁰ waxayna ahayd qaab manhajeed ka duwan manaahijtii hore, ee ku dhisnayd falsafadda Giriiga, ee badanaa cuskan jirtay danni/shaki ahaansha “istiqraa’ga/dabagalka”. Kitaabka *Shaadibi* wuxuu noqday marjac ay culimadu u laabtaan ilaa Qarinigii 20aad. Hasa yeeshee, soo jeedintiisi ahayd inay ka mid noqdaan Ujeeddooyinku seeska shareecada may helin aqabalaad ballaadhan.

69- Al-Shatibi, al-Muwafaqat, majaldka. 4, bogga 229.

70- Tixraacii hore., majaldka. 2, bogga 6.

**Qaybta 3^{aad}: Kaalinta ay “Ujeeddooyinku”
ku leeyihiin Cusboonaysiinta Islaamka
Casrigan**

Qaybta 3^{aad}: Kaalinta ay “Ujeeddooyinka” ku leeyihiin Cusboonaysiinta Islaamka ee Casrigan

Waxa lagu tiriyaa in Ujeeddooyinka shareecadu ka mid yihiin ilaha ugu muhimsan ee uu cuskado fikirka Islaamiga ah ee ku fooggan Islaaxa iyo cusboonaystiinta, waxa shaki la'aana ah in uu jiro isku day warbaahintu waddo, taas oo marta jid lagu dhaliilayo waxay ugu yeedhaan “Islaaxa/wanaajinta” Shareeda Islaamka ee si isku mid ugu saabsan bulshooyinka muskinka ah ama muslimiinta tirada yar ee ku dhex nool dadka aan muslinka ahayn

Isku daygaasi se waxaad mooddaa inta badan in looga dan leeyahay in la ogolaysiiyo musliminta nidaam caqli ama bulsho ama siyaasiba oo ka fog Islaamka iyo danaha muslimiinta.

Kaalinta ay Ujeeddooyinka Shareecadu arrinkaasi ka qaataana waa kaalin togan, waxayna noqtay falsafad sharci dhigid oo suura gal ah, sees adagna u noqotay in cusboonaysiin la sameeyo. Waxaanay ku barbaartay qaab dhimseedka culuumta islaamiga ah. Xuddun waxa u ah caqliga iyo mandiqa Islaamka ee fahanka kawnka iyo nolosha. Ujeedadunna waxaynu ku faafaahin doonnaa

meelo soo soocda, innaga oo dhinacyo kala duwan ka eegayna.

Marka hore waxaynu soo bandhigi doonnaa fikirka Islaamka casrigan ee dhinaca Ujeeddooyinka oo ah msharuuc "hormarineed" iyo "xuquuqda Aadamaha", oo ah eryabixinta cusub ee la adeegsado. Mar labaad waxaynu soo bandhigi doonaa Ujeeddooyinka oo qaata kaalin loo baahanyahay si loo cusuboonaysiiyo fiqiga Islaamka. Gaar ahaan wixii la xidhiidha fkirdda muhiimada badan ee ku saabsaan kala saaridda "yoolka" iyo "marinka loo marayo xaqiijinta yoolkaa". Mar seddexaad waxaynu soo badhigi doonnaa ahmiyadda Ujeeddooyinka ee la xidhiidha cusboonaysiinta fahanka kitaabka iyo sunnada. Dabadeed waxaynu baadhitaan ku samayn doonnaa manahajka ijtihaadka ee cuskada "فتح الذرائع/marmarsiiyo furid" ee ka soo horjeeda mowqifka soo jireenka ah ee ah ee ku kooban "سد الذرائع/marmarsiiyo xidhid". Mar afraad iyo ugu danbayn waxaynu soo bandhigi doonnaa ahaanshiyaha Ujeeddooyinka goob midayn karta kala duwanaashaha mad-habyada kala duwan ee fiqiga Islaamka. Iyo sidoo kale ahaanshiyaha Ujeeddooyinka goob ay ku doodaan diimuhu.

“Ujeeddooyinka” Shareecada oo ah mashruuc hormuarineed iyo xuquuqda Binii Aadamka

Waxyaalaha ay ka qayb qaateen culimada fiqiga iyo mufakiriinta casrigan waa adeegsiga eray bixino casri ah oo la adeegsado. Qaar kale oo culima ahina waxa ay diideen fikradda casriyaynta erayada Ujeeddooyinka shareecada.⁷¹ Bal aan qaybo kuwaa ka mid ah halkan ku soo gudbiyo.

Baadhitaanadii hore ee Ujeeddooyinka waxay ku tirin jereen “ilaalinta taranka” mid ka mida lamhuraanka ay xaqiijintooda sugayso shareecada islaamku. Taasi waxay soo if-baxday marku *Caamiri* ku sheegay isku dayadiisi horreeyay ee uu ugu gogol dhigay ka hadalka ciqaabaha islaamku jideeyay, markuu ka hadlay “weerarka xilaha”⁷² sidii hore inoo soo martay. Waxa ka daba yimi *Imam Al Juwayni* oo sii hore maryay hadaladii ay ka yidhaahdiin cidii ka horeesay “weerarka xilaha” waxa aynu ku tilmaami karno “*Aragtida Dhowrsanaanta*” oo ka dhigan dhawrsanaanta nafaha iyo maalka sidii aynu soo sheegnay; oo ciqaabaha lagu qaado qofka xishoodka jabiya

71- Tusaale ahaan, Sheekh Ali Jumah, Muftigii hore ee Masar (wada sheekaysi aan la yeeshay, Cairo, Egypt, December 2005)

72- Al-camiri, al-Iclam, bogga 125.

waxay hoos imanaysaa “dhowrsantaanta cawrada”⁷³ sida uu arkayo *Juwayni*. Hasa yeeshee, eraybixinta “ilaalinta taranka” isaga waxay dajiyay Imam *Al Qasaali* oo wuxu ka yeelayba mid ka mida Ujeredooyinka shareecada heeraka lagama maarmaanka ah.⁷⁴ *Shaadibina* sideeda ayuu u qaatay eray bixinta *Qasaali* sidii aynu hore u soo tilmaannay.

Waxa halkan ka muuqatay in bilowgii qarnigii 20aad culimadu siiba kuwa xilka iska saaray mowduuca Ujeedooyinka shareecadu ay bilaabeen inay hormrin ku sameeyaan eray bixinta “ilaalinta taranka” si ay qayb uga noqoto argatida “dhowrsanaanta qoyska” ama “ilaalinta qoyska”. Waa kan tusaale ahaan *Ibnu Caashuur* oo ka yeelaya “Ujeedada qoyska” baab iskii u madax bannaan oo ku jira kitaabkiisa “Ujeedooyinka shareecada Islaamka”. Qaar ka mid ah cilmi-baadhayaasha waxa laga yaaba in ay ku tiriyaan wax soo kordhinta *Ibnu Caashuur* ee mawduucan mid ah dib u habay ku sameeyay “ilaalinta taranka” isagoo eray bixno cusub u adeegsaday. Halka ay qaar kalena ku tirinayaan inay tahay aragti cusub oo tii hore beedeshay.

73- *Al-Juwayni*, *al-Burhan*, majaldka. 2, bogga 747.

74- *Al-Ghasali*, *al-Mustafa*, bogga 258.

Siday doontaba ha ahaatee, waxaanu muran ku jirin in soo kordhinta *Ibnu Caashur* inay gogol dhig iyo sees u noqotay aragtiidiisaasi culimo badan oo ka dambaysay , sida *Sheekh Yuusuf al Qaradaawi* oo si toosa uga dhigay “yagleelalka qoys wanaagsan” mid ka mid ah Ujeeddooyinka shareecada. Eray bixitaasina waxay muujisay aragti ay bulshada ugu muuqata in qoysku yahay udub dhexaadkiisa uu ku dhisanayahay. Taasina kama dhigna in laga tago eray bixinnaddi kale ee “weerarka xilaha” ama la tuuro “dhowrsaantan cawrada” ama la is ilowsiiyo “ilaalinta taranka”. Ee waxay tahay in la xaqiijiyo danaha qofka iyo kuwa guudba mid qayb ka ah dhisidda qoyska qaab dhismeedkiisa guud. Taas ayayna tahay in la siiyo mudnaanta oo waxay taageeraysaa xuquuqda haweenayda muslimka ah - taasi oo u baahan taageero haddii aynu eego xaaladda aynu ku suganahay- iyo sidoo kale xuquuqda ubadka oo ah mustaqbalka ummada. Dhamaantoodna waxa uu ka ilaalinayaa gabood falka iyo dulimiga. Dabacsanaan taasi ka muuqata eraybixinta Ujeeddooyinka waxay shareecada u suura galinaysaa inay u adeegto qadiyadaha ummada ee casrigan taagan.

Dhinaca uu iska taagay *Ibn Cashuur* aragtida Ujeeddooyinka wuu ka duwanyahay halkii uu *Caamiri* iska taagay, oo u arkayay xaqiijinta danaha inay gelayso meertooyinka ciqaabaha. sidoo kale wuu ka duwnyahy fahanka *Qasaali* ee xoogga

saaraya “ilaalinta” oo ka dhigan iska ilaailinta dhibaatooyinka iyo fasaadka . Aragtida cusubina waxay ku fool leedahay “qiyamka” iyo “nidaamyada” labaduna waa eraybixintii *Ibnu Caashuur*.⁷⁵ Laakiin waxa jira in culimada casrigan qaar ka soo horjeedaan in mafaahiim cusub lugu soo kordhiyo Ujeeddooyinka shareecada sida “cadaaladda” iyo “xorriyadda”. Waxaanay jeclaystaan inay ku hoos daraan macnayaashan aragtiyadii hore⁷⁶. Hasa yeeshee, anigu ma arko cabsiyadaa ay ka qabaan culimadaasi in hore loo mariyo Ujeeddooyinka shareecada sida aragtiyaha iyo eray bixinta dadku keeno ee culuunta kala duwan.

Sidoo kale mawduuca “ilaalinta Caqliga” wuxu illaa beri dhow ku koobnaa xaaraantanimada maandooriye yaasha, oo ah arrin muhiim ah. Hasa yeeshee, intaa ka sekow, eraygani adeegsigiisii waa la kordhiyay casrigeenan; oo waxa lagu daray “Fidinta Fikirka Cilmiga”, “U socdaalka Cilmi Doonashada”, “Ka Hortaga Go’doominta Ruuxa”,

75- Ibn Ashur, al-Tahir, *Usul al-Nidam al-Ijtimaci fi al-Islam*, ed. Mohammad elTahir el-Mesawi (Amman: Dar al-Nafa’is, 2001), bogga 206.

76- Waxa tusaale ka ah, Shaykh Ali Jumah, Muftigii hore ee Masar (wada sheekaysi aan la yeeshay, Cairo, Egypt, December 2005).

iyoo “Joojinta Maskaxaha ka Haajiraya Caalamka Islaamka”

Sidaa si le’eg, “Ilaalinta Sharafta” iyo “Ilaalinta Nafta” waxa lugu tirin jiray labadaa eraybixineed heerka lamahuraanka ee ku guda jira eray bixinta *Qasaali* iyo *Shaadibi*. Iyaga hortoodna wax ka warramay ciqaabta ka dhalanayasa “weerarka xilaha” ee eray bixinta *Caamiri* ah. Mafhuumka “Ilaalinta Sharafta ” waxaa uu ku lahaa kaalin aad u weyn Carabtii hore agteeda, intii aanu islaamkuba iman ka hor.

Waxa uu cadeeyay nebigu SCW “inuu dhiigga qofka Muslimka ahi Muslimka kale xaraan ka yahy, iyo cirdigiisa, iyo maalkiisuba”⁷⁷ Hasa ahaatee, eray bixinta “ilaalinta cirdiga” waxa meeshiisi galay marka aynu eegno eraybixinta casriga ah ee Ujeeddooyinka erayga “ilaalinta karaamada aadamaha” iyo “ilaalinta xququul insaanka” sida ay u dhigaan tiro badan oo culimo casrigan joogataa . Taasina waa Ujeeddo madax bannaan oo ka mida Ujeeddooyinka shareecada islaamka.⁷⁸

77- Saxiixu al bukhaari, majaldka. 1, bogga 37.

78- Yusuf al-Qaradawi, Madkhal li-Dirasah al-Sharicah al-Islamiyyah(Cairo: Wahba, 1997) bogga 101, Attia, Naxwa Tafciil Maqasid al-Sharicah, bogga 170, Ahmad al-Raysuni, Mohammad al-Suhaili, iyo Mohammad O. Shabeer, “xququ al-Insan Mixwar Maqasid al-Sharicah,” Kitab al-Ummah,

Waxa jira muran xoogan oo ka taagan iswaafajinta xuquuqul Insaanka iyo Islaamka, oo ka dhex socda cilmi baadhayaasha muslimiinta ah iyo kuwa aan muslimiinta ahayn⁷⁹. Sanadkii 1981kii waxa soo baxay baaqii Islaamiga ahaa ee caalamiga ahaa ee xuquuqda Aadamaha. Waxana soo saaray culimo badan oo muslin ah oo qaybo kala duwan oo madhabyo Islaami ah ka soo jeeda. Waxana baqaasi faafiyay UNESCO. Sida tafatirayaashiisu caddeeyeen waxa baaqa lagu saleeyay Kitaabaka iyo Sunna. Xuquuqda baaqaasi ku jiraana waa kuwa ku jira “Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aaadanaha”. Kuwaas oo ay ka mid yihiin xaqa nolosha, xuriyada, sinaanta, xaqqa magan galyo, xoriyadda caqiidada iyo cabiraadda ra’yiga, garsoor cadaalad ah, xoriyadda ururrada, ka hor tagga jidh dilka, xaq waxbarasho, xoriyad dhaqdhaqaaqa.⁸⁰

Hasa yeeshee, qaar ka mida xubnaha sare ee Haydda Caalamiga ah ee Xuquuqda Aaadanaha ee raacsan Qaramada Midoobe ayaa walaac ka

no. 87 (2002), Mohamed el-Awa, *al-Fiqh al-Islami fitariq al-Tajdid*(Cairo: alMaktab al-Islami, 1998) bogga 195.

79- Mohammed Osman Salih, “al-Islam Huwa Nim Shamil Liximayah wa Tacsis xuquq al-Insan” (paper presented at the International Conference on Islam iyo Human Rights, Khartoum, 2006).

80- University of Toronto Bora Laskin Law Library, International Protection of Human Rights (2004[cited Jan. 15th, 2005]); available from <http://www.lawlib.utoronto.ca/resguide/humrtsgu.htm>.

muujiyay baaqa islaamiga ah ee xuquuqul insaanka, taas oo ay ku sababeeyeen –siday hadalka u dhegeen oo ahayd- waxay halis wayn ku haysaa isku tagga dhaqannada kala duwan ee erayada lugu shaaciyay baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha.⁸¹ Halka ay qaar kale oo xubno ah ka sheegeen inuu baaqa islaamiga ah ee xuquuqda aadamhu “inuu ku soo darayo xuquuqul insaank dhinacyo cusub oo wax ku ool leh, oo ay kamid yihiin “Baac Ilaahiya” taas oo dardar gelinaysa dareen akhlaaqiya oo fuliya xuquuqda. Ujeeddooyinka Islaamka ee la xidhiidha Xuquuqda Dadka waxay taageerayaan dooddan dambe iyaga oo taxgelinaya dareenka kooxda kale; taas oo la xidhiidha eraybixinta casriga ah ee Ujeeddooyinka Islaamka iyada oo si weyn u taxgelinaysa fikradaha Qaanuunka Dawliga ah. waxa laga marmaana in la helo baadhitaanno si gun dheer u gorfaysa mawduuca calaaqada ka dhexaysa xuquuqda dadka iyo Ujeeddooyinka Shareecada, si looga gudbo khilaafka culimada qaarkood ee ka taagam fulinteeda .⁸²

81- Qaramada midoobey, guddida sare ee xquuqda aadanaha UNHCHR, Specific Human Rights Issues (July, 2003[cited Feb. 1st, 2005]); halkan baad ka eegi kartaa:

[http://www.unhchr.cah/Huridocda/Huridoca.nsf/\(Symbol\)/E.CN.4.Sub.2.2003.NGO.15.En](http://www.unhchr.cah/Huridocda/Huridoca.nsf/(Symbol)/E.CN.4.Sub.2.2003.NGO.15.En)

82- Salih, “al-Islam Huwa Nidam Shamil Liximayah wa Tacsis xuquq al-Insan.” Murad Hoffman, al-Islam cam Alfayn (Islam in the Year Two Thousand), 1st ed. (Cairo: Maktabah al-Shuruq, 1995) bogga 56.

Sidoo kale erayga “ilaalinta Diinta” ee ay adeegsadeen *Qasaali* iyo *Shaadibi* wuxuu ku leeyahy xididdo hadalkii *Caamiri* ee ciqaabta ay leedahay ka noqoshada qofkuka noqdo diinta xaq ah.⁸³ Hasa yeeshee, isla aragtidaas ayaa dib u fasiraad lugu sameeyay casrigan cusub oo si ka duwan sidii hore ah. waxaa imika la adeegsaday eray bixinta “xoriyada ictiqaadka” waana eray bixintii *Ibnu Caashuur*.⁸⁴ Ama “xoriyada caqiidadada” oo ah eray bixin ay adeegsadeen cilmi baadhayaal casrigan joogta⁸⁵. Waxay adeegsadeen xoriyada ictiqaadka ee mucaasariinta ah, cumuumka guud ee ay sheegayso aayadda “لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ” in ay tahay mabda’ ka xoog wayn fahanka “xadka ridada” ee ku faahfaahsan fiqiga iyadoo loo eegayo “ilaalinta diinta” kaas oo ciqaabaya qofka caqiidadadiisa badela isaga oo aan danbi kale galin. Waxanan arkaa -taariikh ahaan- in qaddiyada xadka ridada si xun loo fuliyay. Marar badannna waxa dhacda in qaab siyasadeed ay u adeegsadaan siyaasiin macangag ah. Maanta haddii aynu ka hadlaynno Ujeeddooyinka shareecada waxa haboon in aynu ku badalanno mafhuumka

83- Al-camiri, al-Iclam, bogga 125.

84- Ibn Ashur, Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah, bogga 292.

85- Attia, Naxwa Tafcil Maqasid al-Sharicah, bogga 171, al-Raysuni, al-Suhaili, iyo Shabeer, “xuquu al-Insan Mixwar Maqasid al-Sharicah.”

asalka ah ee “لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ”⁸⁶. Runtiina mawduucani baadhitaan gaar ah ayu u baahanyahy.

Ugu danbayn, eray bixita “Ilaalinta Maalka” sidii u adeegsaday Qasaali, wuxuuna dhiggiisu yahay eray bixinta Caamiri “majsarat akhd al maal” ama ciqaabta tuugnimda; ama ka *Juwayni* ee “dhowrsanaanta maalka”. Dhammaan toodna waxay hore u marinayaan la jaanqaadka eray bixinnada xoogga badan ee casrigan loo adeegsado kaalinta dhaqaalaha iyo bulshada, oo tusaale ahaan waxaynu arki karnaa eray bixinta qoraallada Ujeeddooyinka ee sebenkan, sida xaqiijinta taakulaynta iyo isu soo dhawaanshaha qaybaha bulshada. Waxa soo raaca ilaalinta la ilaalinayo in aan lagu xad gudbin xoolaha qof gaar u leeyahay , iyo xaaraantinimada ridaba, waana fahanka asalka ah.⁸⁷ Hormarin taasoo kale waxay suura galinaysaa in ay Ujeeddooyinka shareecadu ay dhiiri galiso korriinka dhaqaale ee bulsheed. Waana arinka ay aadka uga baahanyihiin dowladaha muslimiintu. Sidoo kale waxa uu soo gudbinayaa “badiil/badal islaami ah” oo la xidhiidha maal gashiga. Waana badalka imika aad loogu hadal haynta badanayhya. Xitaa gudaha dowladaha aan muslinka ahayn. Siiba mushkiladahan dhaqaale ee taagan wakhtigan.

86- Qur’ananka, Sura-al-Baqarah, 2:256.

87- Quttub Sano, *Qira’ah Macrifiyyah fi al-Fikr al-Usul*, 1st ed. (Kuala Lumpur: Dar al-Tajld, 2005) bogga 157.

“Hor u marinta aadamaha” waa fahan hormarineed oo ay Qaramada Midoobe ku soo saart war bixinta horumarka dunida, waana fahan ka macno ballaadhan fahanka hormarnita dhaqaale oo kaliya, war bixinnadii uugu danbeeyay ee barnaamijka hormarinta qaramada midoobe waxa uu tilmaamay inay dowladaha ugu muslinka badan in uu tartiib koodu uugu hooseeyo heerka “horumarsanaanta”. Sida u muujiyay tasmada hormarinta aadamhu. Waxa uu ku dhisanayahay tasmahani xisaab laga soo dheegtay laba boqol oo tusmo. Kuwaas oo ay ugu horeeyaan qiyaasta wadaagga iyo ka qayb qadashada siyaasadda, iyo yaraanta tirada dadka aan waxba qorin. Iya tirada dadka dugsigiyada iyo jaamacadaha dhigta, iyo cimri dhererka, iyo helidda biyo nadiifa, iyo yaraanta dadka bilaa shaqada ah, iyo heerka macaiishada, iyo qiyaasta cadaaladda bulsheed. Laakiin badh ka mida dawladda ay muslinku ku badanyihiin, gaar ahaan dowladda shidaalka qaniga ku ah, waxa ka muuqda kala tagsaanan ballaadhan, sida ka muuqanaysa war bixinadan aynu sheegnay ee Qaramada Midoobay. Ee u dhexeeya heerka dakhliga qowmiga ah iyo miqyaaska cadaaladda bulsho. Gaar ahaan ka qayb

galka haweenka ee hawlaha guud, iyo hawlaha dhaqaale.⁸⁸

Badh ka mida dowladaha dadka dega ay muslinka u badanyihiin ayaa lugu tiriyay inay ka mid yihiin “dowladaha hore marka r leh” waxaana ka mida *Burunaay, Qatar, Iksu Taga Imaaraatka Carabta*. Hasa yeeshee, isku gaynta dowladahan aynu sheegnay waxay noqonaysaa boqolkiiba hal wax ka yar isku gaynta muslimiinta. Sidoo kale waxa ugu hormarka hooseeya sidu muujiyay tusaha homarka aadamhu dowlado badan oo muslin ah sida *Yeman, Nayjeeriya, Murutaaniya, Jabuuti, Gaanbiya, Singaal, Gini, Ivory Coast, Maali, Nayjar* (marka la isku geeyo tirada dowladahan waxay ka yihiin boqlokiiba toban tirada muslimiinta ee guud).

Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo “tusaha hor u marinta aadamaha” qiyaas sheegaysa inta laga xaqiijiyay “Danaha Guud” ee casrigan; Taas oo ay tahay Shareecadu in ay u kuur gasho sidii heer wanaagsan looga gaadhi lahaa qiyaastaasi iyada oo adeegsanaysa axkaamata kala duwan ee Mucaamalaatka. Fahanka sidaas oo kale ah ee loo fahmo axkaamta Ujeeddooyinka Shareecada wuxu

88- Barnaamijka hourumarinta ee qaramada midoobe UNDP; halkan ka eeg: <http://www.undbogga.org/annualreports/2004/English>.

suuro gelinayaa sidii loo qiyaasi lahaa qiyaas cilmi ah axkaamta waaqiceega lagu fuliyay.

Waxana loo baahnahay baadhitaanno badan oo ku saabsan kaalinta horumarinta aadamaha inagoo ka amba qaadayna aragtida Ujeeddooyinka Shareecada ee la xidhiidha xuquuqda aadamaha sidii aynu hore u soo sheegnay. Halkan waxan ku tilmaamaynaa horumarinta fahanka “Ujeeddooyinka Shareecada Islaamka”, oo koobaya yoolka hormarinta dadka oo lagu eegayo aragti Islaami ah, wuxuu sees adag u dhigayaa hormarka dunida Islaamka; halkii ay ku sugnaan lahaayeen ummadaha horumaray dabadooda oo ay daba socon lahaayeen xitaa arrinku markuu joogo fahanka horumarka iyo hore u socdka.⁸⁹

“Ujeeddooyinka” oo ah Asaaska Ijtihaadka

Cilmiga “Usuul al fiqi” farqi baa u dhexeeya is-khilaafka adillada (oo ah aayadaha iyo axaadiista) iyo iska hor imaadkooda. Iska hor imaadka waxa keena natiijo caqli gal ah oo u kala qaybsantay run iyo been; ama qalad iyo sax aan jid saddexaad lahayn. Khilaafka adilladu se waxa weeyi mid ka

89- Mohammad Shakir al-Sharif, xaqiqah al-Dimuqaradiyyah (Riyadh: Dar alWadan, 1992), bogga 3, Mohammad Ali Mufti, Naqd al-Judhur al-Fikriyyah li al-Dimuqaradiyyah al-Gharbiyyah (Riyadh: al-Muntada al-Islami iyoMajallah al-Bayan, 2002), bogga 91.

yimaadda fahanka mujtahidka ee aan ka iman arrinka laftiisa.⁹⁰ Taasina waxay ka dhigantahy marku mujthadka laga soo weriyo laba daliil oo kitaabka iyo sunnada ah oo guudka uga eg in aanay xaqiiqa ahaan iska hor imanayn. taasi kama dhigna xaqiiqa ahaan inay is burinayaan oo aanay xal kale lahayn. Iska hor imaanshahaasi khilaafku wuxu noqon karaa mid ku jira fahanka mujtahidka oo laga yaabo in laba daliil ugu muuqdaan in ay kala duwan yihiin; isaga se faham kiisa wax ka dhiman yihiin; arrinku wejiyo badan ayuu yeelan karaa. Waxa kale oo suura gal ah in ay mujtahidka ka dhiman yihiin macluumat la xidhiidha riwaayadaha axaadista, wakhtiga iyo goobta iyo duruufta kale ee ay ku soo arooreen axaadiistu. Arrimahaasina waxay saamayn weyn ku leeyihiin fahanka iyo fulinta shareecada.⁹¹

Laakiin waxa la kala caddayn karaa markii la baadhay in labada xadiis ee iska hor imanaya mid kood aanu ku soo aroorin dariiqo sax ah. Khilaafkuna wuu baxayaa marka la sugo xadiis keliya oo saxasan. Taasina waa ta culimadu ugu yeedho “Tarjiix” oo ah mudnaan siin. Waxa se marar badan soo dhex gala mudnaan siinta dhinac u xaglin. Waxa tusaale taas ka ah inu *Abu Hurayra* wariyay siduu *Axmad Binu Xasaan* soo saaray, in ay

90- Al-Qasaali, Maqasiid al-Falasifah (Cairo: Dar al-Macarif, 1961), bogga 62.

91- Abdul-Asis al-Bukhari, Kashf al-Asrar (Beirut: Dar al-Kutub al-Ilmiyyah, 1997), majaldka. 3, bogga 77.

laba nin *Caa'isha* u soo galeen oo ay ku yidhaahdeen: “Abuu Hurayra waxa uu sheegay inuu nebigu yidhi; “baasaysigu waxa uu ku jiraa uun gabadha, daabadda iyo aqalka”.⁹² markaasay *Caa'isha* Ilaahay ha kaa raali noqdee tidhi “*waxaan ku dhaartay Ilaahii Abul Qaasim Quraanka ku soo dajin jiray e, in aanu sidaa odhan. Ee waxa uu nebigu yidhi: “dadkii jaahiliga ahaa waxay odhan jirayeen: baasaysigu waxa uu ku jiraa uun gabadha, daabadda iyo aqalka”* .

Labadaa xadiis ee saxiixa lugu soo saaray labadoodaba waxa ay u muuqdaan in ay iska hor imanayaan, laakiin waxa u fiirsasho mudan in badi culimada xadiiska sharaxdaa ay celiyeen xadiiska *Caa'isha*; iyada oo ay jiraan axaadiis kale oo saxiix ah oo taageeraya; sida ka uu *Mucaawiya Binu Xakiim* ka wariyay adeerkii *Mikhmaar Binu Mucaawiya* in uu yidhi waxaan maqlay nebiga oo leh “baasaysi ma jiro, barakaduna waxay noqon kartaa gabadha, faraska , iyo daabadda”.⁹³ Waxa uu leeyhay *Imaam ibnu Al Jawsi* isagoo soo daliishanaya aayadda Ilaahay sareeye leeyahy “ مَا أَصَابَ مِنْ مُصِيبَةٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي أَنْفُسِكُمْ إِلَّا فِي كِتَابٍ مِنْ قَبْلِ أَنْ نَبْرَأَهَا ”⁹⁴ waa jawaab cad, ragga soo wariyayna waa lugu kalsoon yahay, kay soo werisay laftiisuna waa xadiis cad ragga soo weriyayna waa lagu kalsoon yahay. Miyaanay sidaa ahayn?, Waxa lugu qabsaday *Abu Bakar Ibnul Carabi*

92- Saxix al bukhaari, bogga 69.

93- Tixraacii hore.

100- Quraanka, Suurata al xadiid.

weedhiisa ah “waa hadal waxba kama jiraana ah” oo waxay yidhaahdeen lagama filayn inuu imaam isagoo kale ahi weedhaas qallafsan ka yidhaa xadiiska hooyada mu’miniita *Caa’isha!*.⁹⁵ ujeeddada aanu u soo qaadannay tusaalahan waxa ay tahay in aynu muujinno raadka ay ku leeyihiin qaanaacadda shakhsiga ahi howsha” burinta iska hor imaanshaha axaadiista”.

Culimada fiqiga badankoogu waxa ay u arkeen xaaladaha iska hor imaanshaha badankoodu inuu labada aayadood ama labada xadiis mid kood yahay mid la nasakhay oo ka dhigan “in aan lugu dhaqmayn”. Nasakhaasi waxa lugu saleeyeen in la sugo labada nas/daliil kooga soo horreeyay taariikh ahaan. Marka la garto labadooda ka soo horreeyay waxay noqonaysaa in ka dambe uu nasakho/baddelo ka hore. ee imaanshuhu ku jiro. Haddii si kala loo dhigo aayadda soo degtay mar dambe ayaa “naasikh ah” tii marka hore soo degtayna waa “mansuukh”. Axaadiistuna waa sidaa si le’eg; oo labada xadiis ee loo arko inay iska hor imanayaan, waxa laga eegayaa dhanka taariikhda oo xadiiska dambe ayaa naasikh ah oo burinaya kii ka horreeyay.

101- Abu Bakr al-Maliki ibn al-carabi, caridah al-Axwadhi (Cairo: Dar al-Waxy al-Moxammadi, no date), majaldka. 10, bogga 264

Ma jirto meel ay kaga soo arootay sunnada nebiga aragtida naskhigu ay culimada fiqigu soo kordhiyeen. Sida ku cad kutubta axaadiista Nebigu lagu uruuiyo . si qoto dheer ayaan baadhis uugu sameeyay arinkaas, asalka weedha (نسخ) ayaan ka baadhay kutubta axaadiista ee manta la cuskado, sida *Bukhaari, Muslim, Tirmadi, Nisaa'i, Abii Daa'uud, Ibnu Maajah, Axmed, Maalik, Daraami, Mustadrik, Ibnu Xibbaan, Ibnu Khusaama, Bayhaqi, Daara Qudni, Ibnu Abii Shayba, Cabdi risaaq*. Xadiis qudha oo nebiga ka sugnaaday oo naskhiga sheegaya kamaan helin. Hasa yeeshee, waxaan ka helay 40 meelood oo “naskhi” lagu soo guurinayo “Ruwaadda/kuwa xadiiska soo weriya” ama kuwa sharxaya xadiiska; kamana mid aha naska xadiiska.

Mawduuca naskhiga waxa kale oo aynu ku arkaynaa falan qaynta saxaabada ee xadiiska iyagoo badanaa ku macnaynaya “khaas ka yeelid” iyagoo uuga jeeda inay ku macneeyeen labada xadiis ee iska hor yimaadda in uu midkood noqda “xaalad gaar ah” ee aanu noqon in laga tago gabi ahaanba. Sidaas oo kale waxaynu ku arki karnaa kutubta tafaasiirka ee hore oo aan sugayn aragtida naskhiga marka uu macnaheedu yahay in xukunka hore laga tago, oo mid kale lugu baddelo.

Waa kan tusaale muujinaya adeegsiga erayga “nasakh” ee daliil la’aanta fiday. Waa aayadda shanaad ee suuradda Al-Tawba, ee loo yaqaan

“aayadda seefta” : “ فَأِذَا انْسَلَخَ الْأَشْهُرُ الْحُرُمُ فَاقْتُلُوا الْمُشْرِكِينَ ” : “حَيْثُ وَجَدْتُمُوهُمْ”⁹⁶ Markaynu eegno munaasibadda ay ku soo degtay aayaddu waxaynu ogaanaynaa in ay soo degtay sanaddii 9aad ee hijiryada. Kadib markii uu dagaal dhex maray muslimiinta iyo gaalada. Aayadduna dagaal kaas ayey ka waramaysay, laakiin aayadda tafsiiirkeeda ayaa laga saaray habkii ay ku soo degtay iyo duruuftii dagaal ee ay ku gaarka ahayd. Waaxaana loo fasiray in ay qeexayso xidhiidhka ka dhaxeeya gaalada iyo Muslinka goor kasta iyo goob kasta. Halkaa iyaga oo ka amba qaadaya dadka qaarkood waxay yidhaahdaan aayaddani waxay nasakhday 200 oo aayadood oo kale, oo ku baaqaya wada hadalka gaalada iyo muslinka; yo isa saamaxaadda; iyo xoriyadda caqiidada iyo nabadda, iyo sabirka.

Mufasiriin badanna si ay u isku waafajiyaan aayadaha iska hor imanaya waxay ku gaabsadeen inay yidhaahdeen aayadihii soo dagay wakhtigii dambe ee nolosha nebiga waxay nasakheen kuwii ka horreeyay oo dhan, ee khilaafsanaa. Sababtaa darteed ayay aayadahan soo socdo ku sheegeen qaar la nashakhay:

“فَاعْفُ عَنْهُمْ ” “ادْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ ” , “لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ ” (“وَلَا تُجَادِلُوا أَهْلَ الْكِتَابِ إِلَّا بِالَّتِي ” . “فَاصْبِرْ إِنَّ وَعْدَ اللَّهِ حَقٌّ ” . “وَاصْفَحْ ” ,

"لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ", هِيَ أَحْسَنُ". Iyo qaar kale oo badan.⁹⁷ Sidoo kale waxay diliil la'aan nasekheen tiro badan oo xadiisyo nebiga ka sugnaaday oo bannaynaya in heshiisyo nabadeed la la gali karo dawaa'ifta iyo dhaqamada kala duwan. Xadiisayadaa waxa ka mid ah "saxiifadii madiina" taas oo rasuulku SCWS u ku la galay Yuhuudda heshiis xadaynaya calaaqadda ka dhexaysa muslimiinta iyo yuhuudda degan Yatrib/Madiina. Taas oo qeexday in ay "Muslimiinta iyo Yuhuuddu ummad mida yihiin. Muslimiitu ay diintooda leeyihiin, Yuhuudduna diintooda".⁹⁸ Laakiin badanka culimadii sharaxday waxay sheeganayaan in saxiifadda lugu naskhiyay aayadda seefta iyo aayadaha kale ee boorinaya dagaalka.⁹⁹

Waxa sii badiyay dhibtaatada naskhiga in ay tirada xaaladaha naskhiga ay taabiciyiintu sugeen ay ka badantahay tirada ay saxaabadu sugeen,¹⁰⁰ kuwii ka sii danbeeyay taabiciintuna ay tiro ka sii badan sugeen. Qarniyo kadibna waxa la arkay inay fuqahada madaahibta ku sii kordhiyeen xaalado

103-Aayadaha 2:256, 6:13, 23:96, 30:60, 41:46, 109:6, sida ay iskugu xigaaan.

104-Burhan Suraiq, al-saxifah: Mithaq al-Rasul, 1st ed. (Damascus: Dar alNumayr iyoDar Macad, 1996), bogga 353.

105-Tixraacii hore., bogga 216.

106-Waa diraasad aan u sameeyay sidaa aan kor ku xusan.

badan oo naskhi ah, oo xaalado naskhi ah oo aanay taabiciinta sheegin ayey ku soo korhdiyeen. Waxaad moodaaba in naskhigi noqday jid fiqi-yaqaanku u adeegsado in uu ugu jawaabo ciddii uu la doodayo ee aan madhabtiisa raacsanayn.

Tusaale ahaan *Abu Xasan Al-Kirkhi* (oo geeriyooday gu’gii 951 M) wuxu qoray:

*“Waxa qaaciido noo ah in aayad kasta oo khilaafta ra’yiga culimadayada inay tahay mid awilan ama la nasakhay”*¹⁰¹. Kol hadday sidaa tahay waxla la yaabo ma aha in aad kutubta fiqiga ku aragto xukun madhab naasikh u ah mid kalena mansuukh. Culimadii dambe marka aad eegtidna “nasakhi” wuxu noqday arrin aan xadhko xidha lahayn.

Waxa haddaba halkani soo gelaya kaalinta Ujeeddooyinka Shareecada. Maxaa yeelay, Ujeeddooyinku waxay soo bandhigayaan dariiq suurogal ah oo wax ku ool ah oo lagu maarayn karo culayska nusuusta iska hor imanaysa. Taana waxaynu ku muujinaynaa tusaalooyinka soo socda ee dhimaya iska hor imaadka muuqda iyada oo la adeegsanayo aragtida Ujeeddooyinka:

107-Daaha Jabir al-Clwani, “Maqasid al-Sharicah,” in Maqasiid al-Sharicah, ed. Abdul-Jabbar al-Rifaie (Damascus: Dar al-Fikr, 2001) bogga89.

- 1- Waxa jira dhawr daliil oo iska hor imanaya oo ka kala warrama qaabka loo gudanayo cibaadooyinka iyo shacaa'irta, idilkoodna waxay ka sugnaadeen Nebiga SCWS. Riwaayadaha iska horimanayaa waxay abuureen doodo dhaadheer iyo mushkilado ka dhaca mararka qaarkood isla hal masjid. Hasa yeeshee haddaynu ka eegno dhanka "Ujoodooyinka" waxaynu si fudud u arkaynaa in uu Nebigu SCWS raacayay Ujeedada "yasiraadda/taysiir", si hal cibaado dariiqooyin kala duwan loogu gudan karo, arrin kaas marka aynu eegno debecsanaan weyn ayuu u yeelaya cibaadooyinka.¹⁰² Waxaaana tusaale ka ah qaababkaa kala duwan ee nebigu falayay, dariiqada nebigu labada gacmood isu dul dhigayay marku salaadda gudanayo, iyo dhadhaqaaqa kala duwan ee salaadda,¹⁰³ iyo at-taxiyaatka ee

108- Sida ay soo jeedyeen fuqahada qaar ka mid ihi. Tusaale ahaan: Shafici, al-Risalah, bogga 272–75, Mohammad al-Surqani, Sharx al-Surqani cala Muwadda' al-Imam Malik. 1st ed. (Beirut: Dar al-Kutub al-cilmiyyah, no date), majaldka. 1, bogga 229.

109-Al-Siwasi, Sharx Fatx al-Qadir, majaldka. 1, bogga 311, al-Sarkhasi, Moxammad ibn Axmad, usul al-Sarkhasi (Beiut: Dar al- Macrifah, no date), majaldka. 1, bogga 12, alKassani, cala' al-Din, Bada'ic al-sana'ic fi Tartib al-Shara'ic, 2nd ed. (Beirut: Dar al-Kitab al-carabi, 1982), majaldka. 1, bogga 207.

kala duwan,¹⁰⁴ iyo qaababka sujuudu al-sahwiga ee kala duwan,¹⁰⁵ iyo qaabka takbiirka ee salaadaha ciidda, iyo khilaafka ku jira badh ka mida tafaasiisha gudashada xajka, iyo kuwa kelaba.¹⁰⁶

- 2- Waxa jira tiro xadiisyo kala duwan oo Nebiga laga soo wariyay oo ku saabsan curfaga/dhaqanka, oo loo arkay inay iska hor imanayaan. Hasa yeeshee, riwaayadahaasi kala jaadka ah marka aynu aragtida Ujeeddooyinka ku eegno waxa aynu ka fami karnaa “Caalamiyadda Shareecada”¹⁰⁷ Si kale hadii aynu dhigno, kala duwanaashaha xadiisaydaa ku jira waa in loo fahmaa, sida ay u kala duwanyihiin caadooyinka iyo dhaqannada ay sugaan axaadiista shariifka ahi; mana aha iska hor imaansho.

Tusaale ahaan kuwaa waxa ka mid ah laba xadiis oo loo tiiriyo in ay *Caa’ishi* IHRN werisay kuwaas oo xaaraantinimaynaya in ay gabadhu ku guursan karto idinka wali-geed la’aantii, sida

110-Al-Shafici, Moxammad ibn Idris, al-Risalah, ed. Ahmad Shakir, (Cairo: alMadani, 1939), bogga 272–75.

111-Moxammad ibn cisa al-Tirmidhi, al-Jamic al-saxix Sunan al-Tirmidhi, ed. Ahmad M. Shakir (Beirut: Dar Ixya’ al-Turath al-carabi, no date), majaldka. 2, bogga 275

112-Al-Nawawi, Yaxya Abu-Sakariyah, al-Majmuc(Beirut: Dar al-Fikr, 1997), majaldka. 4, bogga 145.

113-Ibn Ashur, Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah, bogga 236.

walaalkeed ama aabbeheed (waxa soo saaray Abuu Daa'uud, Tirmadi, Ibnu Maajah, Ibnu Xabbaan, Xaakim, Ibnu Cadi.) Waxa laga soo weriyay Caa'isha IRHN: *"Wuxu yidhi Nebigu SCWS gabadhii guursata idan la'aanta waligeed, guurkeegaasi waa baadil. Saddex jeer buu ku celicelyay"*. Halka xidiis kalena uu u oggolaanayo gabadha carmalka ahi inay dooran karto ninka ay guursanayo, (wuxuu ku soo saaray Maalik kitaabkiisa *Muwadda'*, Muslimna ka soo weriyay Maalik iyo Abuu Daa'uud, Tarimdi, Ibnu Maajah, iyo Daraami, inay Caa'ishi tidhi, *"Wuxu yidhi Nebigu SCWS, gabadha carmalka ahi iyadaa nafteeda uuga xaqle waligeeda, bikirkana(ugubka) waa laga idan dalbayaa nafteeda, idan bixinteeduna waa aamuskeeda"*.¹⁰⁸

Waxaana la wariyay inay Caa'isha lafteedu – waana isla iyada warisay labada xadiisba- goob jog ka ahayd dumar dhowr ah guurkooda, iyadoon raacin shardiga ah inuu waafiqo waligeedu, oo waxay bixisay inantii walaalkeed *Xafsa Bintu Cabdiraxamaan Binu Abuu Bakar* oo ay u guurisay *Mundir Binu Abii Subeer* iyada oo aanu *Cabdiraxmaan* joogin, waana arrinta ku tusaysa in ay raacsanayd madhabka banaannida guurka

114-Sayn al-Din ibn Nujaym, al-Baxr al-Ra'iq, 2nd ed. (Beirut: Dar al-Macrifah, no date), majaldka. 3, bogga 117, Ali al-Mirghiyani, al-Hidayah Sharx Bidayah alMuhtadi'(al-Maktabah al Islamiyyah, no date), majaldka. 1, bogga 197.

wali la'aan. Sida la xaqiijiyay,¹⁰⁹ waxayna ku fasireen badh ka mid ah asxaabta fiqiga Xanafiga ahi, inay reebitaanka idan la'aantu ay gaar u tahay dhaqanka iyo curfiga carbeed.¹¹⁰

Haddii se aynu labada xadiisba u fahanno qaabkii curfiga Carabta, innaga oo tix gelinayna Ujeeddada ah "Caalamyida Shareecada", mushkiladdii iska hor imaanshahu meesha way ka baxaysaa. Waxa kale oo iyana suuro gelaya in tabaabulshaha guurka lagu dhamayn karo dhaqanno kala duwan oo kala jooga goobo iyo xilliyo ka la duwan. Mawqifkan oo kale wuxu Muslimiinta u suurto gelinayaa in ay ku dhaqmaan dhaqannada laga oggol yahay bulshooyin kooda ee la xadhiidha tabaabulshaha guurka, haddii aan wax xaaraan ahi soo dhex gelin. Taasi waxay adkaynaysaa dhaqanka wada noolaanshaha iyo is-af-garadka ee u dhexeeya bulshooyinka kala dhaqannada duwan.

- 3- Axaadiista qaarkood baa lugu tiriyay kuwa la nasakhay, waxayse ku lug lahaayeen Shareecada oo qaab tallaabo-tallaaba ah loo fulinayay. Ujeeddada qaabka tallaabo-

115-Al-Siwasi, Sharx Fatx al-Qadir, majaldka. 3, bogga 258.

116-Ibn Abidin, Mohammad Amin, xashiyah Radd al-Muxtar(Beirut: Dar alFikr, 2000), majaldka. 3, bogga 55.

tallaabadanu waxay ahayd in shareecada loo fuliyo si sahlan; iyada oo si deggen loo bedelayo wixii tabnaa ama si weyn loo adkaynayo wixii tognaa.¹¹¹ Tusaale ahaan, axaadiista xaarantimaysana khamriga iyo ribada iyo kuwa faraya salaadda iyo soonka, waxay tahay in loo fahmo maqsadka nebigu raacayay ee ahaa inu si tallaabo-tallaaba ah looga hirgeliyo bulshada dhexdeeda, siiba waxii khuseeya dadka Islaamnida ku cusub. Maxaaa yeelay, kuwaasi waxay u baahahin yihiin waqti ku filan si ay uula qabsadaan amarada shareecada Islaamka.

- 4- Culimada qaarkood ayaa tiro axaadiis ah u arka in ay “iska hor imanayaan” Maxaa yeelay erayadooda ayaa laga fahmayaa in ay xaalad qudha ay axkaam kala duwan ka bixinayaan. Laakiin markaynu tix gelinno inay xadiisayadaa suubani la kala hadlayaan dadyow kala duwan, waxa si fudud uuga baxaya “is ka hormimaanshahaa”. Xaaladdan oo kale Ujeeddooyinku waxa weeye “in la qaato ka maslaxadda weyn ugu jirto dadka.” Furaha aynu ku fahmi karno nusuustan ay ka muuqato inuu farqi u dhexeeya saxaabadii ay la hadlaysay axaadiistaasi, tusaale ahaan waxa jira tiro axaadiis ah oo ay ku muuqato in uu

117-Mohammad al-Qsasali, Na'arat fi al-Qur'an(Cairo: Nahdah Misir, 2002), bogga194

qof dumar ah oo ninkeedi kala tageen uu nebigu SCW ku yidhi haddii aad guursato caruurta xannaanadooda waa lagaa qaadayaa. Waxa *Abu Daa'ud* baabka "cidda u xaq leh carruurta, ee kitaabka furitaanka" ku sheegay xadiis sugaya xukunka hooyadu inay sii haysanayso ubadka haxday guursato, *Cabdi Laahi Binu Cumar* waxa u wariyay "inay gabadhi Nebigu ku tidhi: Rasuul Allow ilmahaygan yari calooshaydaa weel u ahayd, naaskayguna cabitaan buu u ahaa, dhabtayduna gogol bay u ahayd, aabihiina wuu i furay, I nuu iga qaatana wuu damcay, markaasuu nebigu SCWS ku yidhi adaa u xaq leh, intaanad ninkale guurasan".¹¹²

Waxa jira tiro axaadiis ah oo kale oo "ka hor imanaya" kuwan, oo uu ka mid yahay qisada *Ummu Salama* oo markuu nebigu guursaday ka dib iska haysatay ilmaheedi. Iyo qisada kale ee inantii *Xamse* ee nebigu u xukumay habaryarteed iyadoo nin leh.¹¹³ Hasa yeeshee, badi madaahibta fiqigu waxay raaceen sida hore, ee sugaysa in xanaanada ilmaha si toos ah ay aabbaha ugu wereegayso haddii ay hooyadu nin kale guursato.

118- Abu daa'ud. Kitaab al dalaq. majalladka 2aad, bogga 283.

119- Ibn Rushd, al-Walid, (Averroes), Bidayah al-Mujtahid wa Nihayah alMuqtasid (Beirut: Dar al-Fikr, no date), majalladka 2aad, bogga 43

Waxayna sidaa u raaceen oo axaadiistii danbe uga tageen iyagoo yidhi axaadiista hore ayaa sugnaan badan. Oo waxa soo saaray *Bukhaari*.¹¹⁴ Hasa yeeshe *Ibnu Xasam* waxa uu raacay sida danbe, oo sida hore wuu ka leexday, isagoo ku sababeeyay inay mid ka kamida ruwaadda axaadiista soo weriyay uu xifdi xumaa. Halku *Sancaani* ka dib markii uu eegay labada kooxood ee axaadiista ah, wuxa uu xukunka u celiyay “Maslaxadda ilmaha”, oo haddii hooyadu uga xanaano iyo daryeel roontahay aabbaha, iyada loo daynayo ilmaha. Maxaa yeelay, waa in ilmuhu la joogaa qofka u daryeelka badan, ka dibna wuxu raaciyay, “*Shareecadu sidaa si aan ahay ma yeeli karto.*”

Hadalkiisan waxa aynu ka arkaynaa in uu waxa uu wax ku eegay ay tahay cadaaladda iyo dantu meesha ay ku jiraan,¹¹⁵ oo shareecadu marnaba labadaa kama hor iman karto, balse waaba u tiirar. Aragtidaa sharciga ah ee *Sancaani* waxaynu ka faa’idaysanaynaa in qofka muslinka ahi uu mowqif xaqsoor ah ka qaadan karo markuu

120-Moxammad ibn Ismacil al-sancani, *Subul al-Salam Sharx Bulugh al-Maram Min Adilah al-Axkam*, ed. Mohammad Abdul Aziz al-Khouli (Beirut: Dar Ihya’ al-Turath al-carabi, 1379 ah), majalladka 3aad, bogga227

121-Tix-raaca hore.

dadka sharci dajin u samaynayo, haddii ay ujeeddadu tahay in bulshada dhexdeeda cadaalad laga abuurro, Sidaana wuu yeeli karaa xitaa haddii uu ka ambaqaadayo aragti aan “Islaam ahayn”. Maxaa yeelay, cadaaladdu waa wax ay wadaagaan sharciyo kala duwani.

Waxa u dhexeeya “Dawga” iyo “Yoolka”

Wuxu kala saaray *sheekh Maxamad Al Qasaali* “Dawga ” iyo “Yoolka”. Wuxuuna caddeeyay in dawgu isbeddeli karo yoolku se aanu isbeddelin. Wuxuuna tusaale u soo qaatay nidaamka “qaniimooyinka” oo u ku sheegay inu “xukun koodi dhamaaday”, In kasta oo si toosa aayaadaha Qura’anka ay u sheegeen “Qaniimooyinka”, hadana waxay noqonayaan “dawga isbeddelay.”¹¹⁶ Dabadii waxaa si balbalaadhan u sii fahfaahiyay kala saaridda “dawga ” iyo “yoolka ” labdada sheekh ee kala ah *Yuusuf Al Qardaawi* iyo *Faysal Moolli*, oo ku soo bandhigay baadhitaanno cilmiyaysan kulama ka dhacay “Fadhiiga Yurub ee Fatwooyinka”, oo ku saabsanaa xadaynta bilashada bisha Ramadaanta.

Labadan sheekhba waxay isku raaceen fikradda ah in aragtida bisha Ramadaan ay tahay daw

122-Al-Qasaali, al-Sunnah al-Nabawiyyah Bayna Ahl al-Fiqh wa Ahl al-xadith, 11th ed. (Cairo: Dar al-Shuruq, 1996), bogga161.

muujinaya in ay bishii bilatay; mase aha aragtida lafteedu yool. Sidaa darteed, waxay gaadheen natiijo ah, in xisaab falakeedku yahay maanta “wasiiladda/dawga” uugu habboon ee ay u adeegsan karaan dadyowga muslinka ah ee reer Yurub, si ay u gartaan soo galitaanka iyo sii bixitaanka bisha Ramadaan.¹¹⁷ Sidaa si le’eg waxa uu *Sheekh Yuusuf Al-Qardaa’wi* fuliyay fikradda ah in jilbaabka qofka dumarka ah ee Muslimka ahi yahay daw lagu xaqiijinayo asturnaanta, ee aanu yool ahayn.¹¹⁸

Waxa iiga soo baxay halkaa, in furitaanka mowduuca kala saaridda “dawga/wasaai’sha” iyo “yoolka/qaayaatka” ay albaabka u furayaan majaallo kale oo ballaadhan oo aragtiyo cusub iyo qaar asal horeba leh isugu jira oo khuseeya sharci dajinta Islaamka. Tusaale ahaan waxa uu soo jeediyay *Dr.Daah Jaabir Al Calwaani* mashruuca islaaxinta afkaarta, kaaso u ku soo bandhigay kitaabkiisa “islaaxinta fikirka isllaamiga ah”. Waxa uu ku sheegay aragti la xidhiidha qadiyadda kala

123-Wada sheekaysi aan la qaatay, Sarajevo, Bosnia, May 2007, 18th regular session for the European Council for Fatwa iyoResearch.

124-Waxaad u noqotaa maqaalka: Mohamed Saleem El-Awa, ed., *Maqasid alSharicah al-Islamiyyah: Dirasat fi Qadaya al-Manhaj wa majalat al-Tadbiq* (Cairo: al-Furqan Islamic Heritage Foundation, al-Maqasid Research Centre, 2006) bogga 117–121.

saaridda “dawga/wasaa’isha” iyo
 “yoolka/qaayaatka” isaga oo soo qaatay arrin aad
 iyo aad u muhiim ah, kaas oo ah arrinka sinnaanta
 ragga iyo dumarku ay u simanyihiin qaanuunka.
 Wuxu yidhi isagoo iftiiminaya arrinkaa:

*“Quraanku kariimka ahi waxa uu dadka u soo gudbiyay
 casrigii risaaladda Islaamku soo degaysay rumaynta
 sinnaanta ragga iyo dumarka. Mabda’an oo ka mida
 mabaadii’da diintu la timi, waxa laga yaabaa in aanu jirin
 mabda’ la mid ah oo muujinaya kacdoonka Islaamku la
 yimi ee dhanka fikirka, kamana ahmiyad yarayn joojintii
 asnaamta la caabudayay. Waxa laga maarmaan ahayd
 marka la eego xaaladda bulsho ee ay muslinku ku jireen,
 iyo marka la eego caadooyinkii duugga ahaa ee Jasiiradda
 Carabta ka jirayba, iyo kaalmihii iyo acraaftii laga dhaxlay
 Jaahiliyaddii, waxa laga maarmaan noqotay in
 isbeddeladaasi loo fuliyo tallaabo-tallaabo si bulshadu ula
 jaan qaadi karto isbeddelkaa. Markii uu Islaamku
 go’aamiyay in ay qofka haweenka ahi markhaati furi karto,
 arrinkaas oo aan jirin xilligii Islaamku soo degay wax aad
 u yar mooyaane, waxa Quraanka si cad ugu timi in
 haweenaydu noqon karto markhaati la mid ah ka ninka;
 arrintaa ujeeddadeedu waxay ahayd in kaalintii
 dhaqankii duugga ahaa dhigay haweenka laga beddelo.
 Taasna waxa uu Quraanku sugay markii ay aayaddu
 sheegtay in ay noqon karaan markhaati laga raali yahay:
 (مِمَّنْ تَرْضَوْنَ مِنَ الشُّهَدَاءِ). In haweenka markhaatiga lugu
 daraa waxay ahayd “daw/wasiilo” loo marayo
 “yool/”qaayo”, waxaynay noqotay jid wax ku ool ah oo*

lagu asaasay fikradda sinnaanta labada jinsi (raga iyo dumarka). Hasa ahaatee, halkii ay iska taageen mufasiriintu ayaadda intteeda kale oo ah (أَنْ إِحْدَاهُمَا فَتَنَكَرَ إِحْدَاهُمَا الْآخَرَى), waxay ku fasireen in markhaatigii laba dumar ahi gelayaan. Taasna macnaheedu yahay in aan ragga iyo dumarku sinnayn. Sidaas ayayna u qaateen mufasiriintii hore, iyo muxaddisiintiiba, Muslimiintii ka dambaysayna fahankaasi ayay qaateen iyagoo ku dayanaya kuwii ka horreeyay. Waana fahan qaldan. Mawqifka fahan kaasi ka dhashayna waa uu ka gudbay kaalintii fiqiga...".¹¹⁹

Waxa isaguna sidaa si u dhow soo jeedayay Aayatulullah Mahdi Shamsul Diin, oo leh waa inay culimada fiqigu si firfircooni ku jirto u eegaan fahanka kitaabka iyo sunnada. Oo aanay u arag ayaad kasta in ay sideeda u tahay sharci dhamays tiran, Waana in ay caqligooda u furaan in ay suurto gal tahay in ay aayaddu ku lug leedahay xilli gaar ah iyo meel gaar ah. Axaadiista nebigana waa in aan loo malayn munaasibadihii ay ku yimaadeen in ay yihiin qaar xillikasta, goob kasta, xaal kasta, iyo cid kastaba ku bannaan.¹²⁰ Wuxu intaa ku daray Aayatulullah Shamsul Diin in kasta oo uu fahankaa

125-Daaha Jabir al-Calwani, Issues in Contemporary Islamic Thought (London/Washington: International Institute of Islamic Thought (IIIT), 2005), bogagga.164–166.

126-Waxan ka soo dheegtay buugga: Shamsuddin, Ayatollah Medhi, al-Ijtihad wa al-Tajdid fi al-Fiqh al-Islami (Beirut: al-Mu'assassah al-Dawliyyah, 1999), bogga.128.

haysto, haddana wuxu qirayaa in aanu waqtigan xaadirka ah wax xukun sharci ah sidaa ku binayneyn. Waxa se uu adkaynayaa in ay tahay lamahuraan in mabda'aasi la qaato marka la doonayo axkaamta la xidhiidha dumarka, maalka, iyo jihaadka.¹²¹

Tusaale kale waxa noqon kara, baadhitaanka uu sameeyay *Dr.Fatxi Cismaan* oo “dib u eegaya dhinacyo falgal ah oo ku saabsan markhaatiga dumarka oo ka hooseeya ka ragga, sida ka muuqata ayaadda 282 ee *Suuradda Al-Baqrah*. Arrintaa darteed, *Fatxi Cisman* wuxu dib u eegis ku sameeyay akhriska iyo fahamka aayadda ee la xidhiidha dhinacayada falgalka. Waana sidii uu yeelay *Sheekh Calwaani* oo aynu hore u soo sheegnay. *Xasan At-Turaabi* ayaa isna aragtidaa mid la mida soo bandhigay - aragtidaas oo la xidhiidha axkaamta fiqiga ah ee ku saabsan dumarka iyo hugooda.¹²²

Roger Garaudy (Alle haw Naxariistee) wuxuu tibaaxay fikrada ah, in Quraanka loo qaybiyo laba qaybood, qayb lugu tilmaami karo inay “xilli taariikheed” ahayd, waxaana tusaale ka ah wixii la xidhiidha axkaanta dumarka. Iyo qayb ah qiyamka

127-Tixraacii hore., bogga 129.

128-Hasan al-Turabi, *Emancipation of Women: An Islamic Perspective*, 2nd ed. (London: Muslim Information Centre, 2000), bogga 29. sidoo kale, wada sheekaysi aan ku la qaatay sheekha, Khartoum, Sudan, August 2006.

waaraya ee ku soo arooray kitaabka, loona soo dajiyay.¹²³ Sidoo kale waxa u soo jeediyay *Cabdikariim Soruush* in Quraanka loo qaybiyo laba qaybood: qayb waxyaalaha sugan ah". iyo "qayb waxyaalaha is bedbeddalaya ah". Wixii isbedelayaana waxa ay isla beddelayaan deegaanka, dhaqanka, bulshada, iyo taariikhda kolba lugu suganyahay.¹²⁴

Laakiin waxa u fiirsasho gaar ah mudan, qorayaasha badh ka mid ah oo ku raadoobay falsafaddaha reer galbeedka ee casrigan, inay ku xidhaan xukunka Quraanka duruuftii iyo xilli taariikheedkii la joogaya wakhtigii u qaraanku soo degay. Waana waxa loogu yeedho: "ما بعد الحداثيين". Fikradahoodaasi waxay doonayaan in ay ku fuliyaan shareecada Islaamka. Taas oo ay ka dhalanayso in la buriyo axkaamta Kitaabka iyo Sunnaha sida ay u dhanyihiin oo aan dib loogu laaban.¹²⁵

129-Roger Garaudy, *al-Islam wa al-Qarn al-Waxid wa al-cushrun: Shuruq Nahhah al-MuslimIn*, trans. Kamal Jadallah (Cairo: al-Dar al-calamiyyah li al-Kutub wa al-Nashr, 1999), bogga 70, 119.

130-Soroush, Abdul-Karim, "The Emajaldkaution iyoDemajaldkaution of Religiou Knowledge," in *Liberal Islam: A Sourcebook*, ed. Charles Kursman (Oxford: Oxford University Press, 1998) bogga 250.

131-Abu Said, "Divine Attributes in the Qur'an," in *Islam iyoModernity Muslim Intellectuals Respond*, ed. John Cooper, Ronald L. Nettler iyoMohamed Mahmoud

Mawqifka sidan ah ee ah “taariikhaynta” Kitaabka iyo Sunnaha wuxu leeyahay afkaarteenaa ku soo aroorta kutubta, dhaqanka, iyo dhacdooyinka waxa si weyn u xukuma goobtii kutubta, dhaqanka, iyo dhacdooyinku ku sugnaayeen iyo duruufaha taariikheed ee ay xilligaa ku sugnaayeen ama siday taariikhduba isu bedeshay. Aragtidaasi waxay Quraankii ka dhigtay sidii “Wax soosaar Dhaqan” oo ka abuurmay dhaqankii uu ka soo dhex baxday diintu, sida ay qorayaasha qaarkood ku andacoonayaan. Aragtidan oo kale macnaheedu waxa weeye in Quraanku noqdo “Saxiifad Taariikhiya” oo keliya la arkayo faa’iidadiisa marka la la xidhiidhiyo bulsho taariikhi ah oo gaar ah oo dhaqnayd xilligii nebiga SCW. Tusaale ahaan, sidaa waxa qabta *Haideh Moghissi* oo ku andacoonaysa “Shareecadu in aanay waafaqsanayn mabda’a sinaanshaha dadka”. Waxay leedahay:

“In kasta oo ka mid tahay nusuusta Quraanka iyo ta’wiishiisa, hadana kuma filna si lays waafajiyo awaamirta Quraanka iyo tilmaamihiisa la xidhiidha xuquuqda dumarka, waajibaadkooda, iyo sinnaanta labada jinsi”. Ibn Warraaq oo carrabkaas Moghissi oo kale ku hadlayaana wuxu ku andacooday isaga oo ka hadlaya Islaamka iyo xuquuqda dadka, “In aan

(London: I.B.Tauris, 1998), bogga 199, Arkoun, Mohamed, “Rethinking Islam Today,” in *Liberal Islam: A Sourcebook*, edited by Charles Kursman. (Oxford: Oxford University Press, 1998), bogga 211.

Islaamku keenin wax ku filan in uu mabda'a xoriyadda taageero." *Ibraahiim Muusena* wuxu ku daray in aan fiqiga Islaamku tusmo u noqon karayn akhlaaqda marka la eego macnaha ay leedahay casrigan.¹²⁶

Hasa yeeshee, anigu waxaan aaminsanhay in Quraanka kariimka ah oo lugu dhaleeceeyo "caddaalad la'aan" ama "akhlaaq darro", inay ka hor imansyso rumaynta kitaabka Ilaahay. Dhinaca kalena waxaan qabaa dhacdooyinka taariikhiga ahaa iyo axkaamta fiqiga ahba in lagu fahmo sidii uu yahay dhaqankii, juqraafigii, waayahii, iyo taariikhdu markii risaaladu islaamku soo degtay.

Aniga oo arrintaa dib ugu laabanayana waxan mar kale leeyahay furaha aynu ku fahmi karno nusuusta diintu waxa weeye in aynu kala saarno "dawga/wasaa'isha" isbebdeli kara iyo "yoolka/qaayaatka" sugan ee aan isbaddalin. Wasaa'isha waa laga gudbi karaa; sidii uu shegay *Al-Qasaali*, laakiin qaayaatka iyo mabaad'ida lagama gudbi karo. Fahankaa dhinacyada kala duwan leh ee kale wuxuu innoo suuro gelinayaa in aynu si quman nusuusta Quraanka u fulinno goor kasta iyo goob kastaba.

132-Moosa, "Introduction," in *Revival and Reform in Islam: A Study of Islamic Fundamentalism* by Faslor Rahman, ed. Ebrahim Moosa (Oxford: OneWorld, 2000, bogga 42.

Ujeeddooyinka iyo Tafsiirka Qodobaysan ee Quraanka kariimka ah

Waxay ay qaadeen qolyaha u dhaqdhaqaaqa “tafsiirka qodabaysani” tallaabooyin aynu odhan karno waa tafsiiir maqaasidi ah oo Quraanka lugu fasiray. Waana fahan ku dhisan in loo arko kitaabka Alle unug dhamaystiran ool loo noqon karo mar walba.¹²⁷ Kolka aragtidaa guud lugu eego “aayadaha axkaamta” oo ah aayado aan dhowr boqol ka badnayn, oo fuqahadu u bixiyeen magaca, way ballaadhanaysaa baaxadoodu oo sida aragtidu leedahay waxay gaadhaysaa Kitaabka oo dhan.

Markaasi, suuradaha iyo aayadaha ka hadlaya caqiidada ama sheekooyinka Anbiyada, ama aakhiro ama kownka, gabigooduba waxay noqonayaan qaybo ka mid ah muuqaalkaas ballaadhan; taas oo keenaysa in ay qayb ka noqdaan dejinta axkaanmta fiqiga. Waxa kale oo dariiqadani fududaynaysaa in ay bannayso kaalin ay mabaadi’da iyo akhlaaqda oo ee sheekooyinka Quraanka iyo ayaadaha Aakhiro ka hadlayaa laxaad wayn ka saaraan, kana mid noqdaan aasaaska axkaamta fiqiga. Sidaana waxa la dhinac dhigayaa

133-Hasan al-Turabi, al-Tafsir al-Tawxidi, 1st ed., majaldka. 1(London: Dar al-Saqi, 2004), bogga 20, Hasan Mohamed Jabir, al-Maqasid Alkuliyyah wa al-Ijtihad Almucasir-Ta’sis Manhaji wa Qur’anli li Iliyyah al-Istinbad, 1st ed. (Beirut: Dar al-xiwar, 2001), bogga 35.

dariiqadii hore ee duugga ahayd ee axkaamta fiqiga lagu dejinayay.

Isla manhajkaa aynu sheegnay ee ku saabsan tafsiirka maowduuciga ah (qodobaysan) ee Quraanka kariimka ayaa isna loo raacayaa axaadiista suuban. Iyadoo loo adeegsanayo xadiiska suuban aasaaska mawduuca, si guud oo shumuuli ahna loo eegayo naska iyo fahanka naloshii nebiga oo dhan oo xagga maqaasidda laga eegayo. Taasina waa ta keenaysa in ciilmibaadhuhu is waydiiyo in uu xadiisku sax yahay haddii uu ka hor imanayo mabaa'dida iyo qiyamka Islaamka ee cadcad. Sidoo kale hadday is waafajin kariwaayaan fuqahadu laba xadiis waxa la qaadanayaa inuu saxanyahy ka u dhow mabda'da Quraanka. Waana siday qabaan tiro ka mida ah culimada casrigan.¹²⁸

134- Tusaale ahaan al-Alwani, Taha Jabir, "Madkhal Ila Fiqh al-Aqalliyyat." Paper presented at the European Council for Fatwa iyoResearch, ECFR, Dublin, Jan. 2004, bogga 36, al-Ghasaly, al-Sunnah al-Nabawiyyah, bogga 19, 125, 61, al-Ghasaly, Na'arat fi al-Qur'an, bogga 36, Abdul-Moneim al-Nimr, al-Ijtihad (Cairo: Dar al-Shuruq, 1986), bogga 147, Hasan al-Turabi, Qadaya al-Tajdid: Naxwa Manhaj Usul(Beirut: Dar al-Hadi, 2000), bogga 157, Yassin Dutton, The Origins of Islamic Law: The Qur'an, the Muwadda' iyo Madinan camal (Surrey: Curson, 1999) bogga 1, John Makdisi, "A Reality Check on Istihsan as a Method of Islamic Legal Reasoning," UCLA Journal of Islamic iyoNear Eastern Law, no. 99(fall/winter) (2003), A. Omotosho, "The Problem of alAmr in Usul al-Fiqh" (Ph.D.

Ugu danbayn; waxaan leeyahay manhajka ku dhisan ujeedooyinku waxa u suura gelinayaa inuu innaga daboolo daldaloollada ka muuqda soo gudbinta axaadiista. Daloolladaasina waa qaar la xidhiidha axaadiista ayna la socon munaasabaddii iyo habkii iyo waayihii ay ku yimaadeen. Axaadiista shariifka ah ee ku taal kutubta axaadiista ee kala duwan waxay intooda badni ka koobanyihiin weedh ama laba weedhood; ama jawaabo laga bixiyay su'aal. Sida caadada ahna xadiiska kuma xusna kaalin taariikheed, ama siyaasi, ama bulsho, ama dhaqaale, ama deegaan oo uu xadiisku ka faalloonayo.

Waxa jira qayb kooban oo axaadiis ah oo Saxaabigu ama (Raawigu) uu dhammaadka xadiiska odhanayo, *“Ma garanayo in uu Rasuulku SCW sidan yidhi isaga oo sidaa iyo sidaa u jeeda”* Taasina waxay ku timaaddaa axaadiis aad u kooban. Nusuusta axaadiista oo aanay la socon munaasabaddii, qaabkay Saxaabada u gaadhay, iyo sidii ay fuliyeen, ujeedaddii waxay u muuqataa in ay faqiha iyo weriyaha xadiisku kaalin ku yeeshaan axaadiista sharaxooda Aragtidaasi *“ballaadhanina /shumuuliyah”* waxay buuxinaysaa wixii ka dhinnaa macluumaadka aynu u baahnahay is aynu

diss, University of Edinburgh, 1984), Luay Safi, icmal al-caql(Pittsburgh: Dar al-Fikr, 1998), bogga 130, Shamsuddin, al-Ijtihad wa al-Tajdid fi al-Fiqh al-Islami, bogga 21.

u garano in uu xadiisku yahay “Caam” iyo in uu yahay “Khaas”, marka aynu sidaa yeelaynana waxaynu ku dhaqmaynaa fahanka Ujeeddooyinka Shareecada.

Fahanka “Ujeeddooyinka” Nebiga (SCW)

Waxa aynu hore u soo caddaynay sida u *Qaraafi* ugu kala saaray falalkii nebiga SCWS ee xukunka iyo fatwooyinka iyo hoggaanka, iyo sida uu u caddeeyay in ay mid kasta leedahay dowl ta kale ay kaga duwantahay raadka shareecada. Isaga dabadiina *Ibnu Caashuur* waxa u soo kordhiyay dhinacyo muhim ah oo Ujeeddooyinka Shareecada ah, oo sii balballaadhinaya aragtidi *Qaraafi*. Waa kuwan tusaalooyinka Ujeeddooyinka nebiga ee u soo bandhigay *Ibnu Caashuur*:¹²⁹

1. *Ujeeddo sharci dejin*: waxa tusaale ka ah markii uu nebigu yidhi isagoo xajkiisi ugu danbeeyay ee Xajatul Wadaaca ka khudbadaynaya: “خذو عني مناسككم” oo macanaheedu tahay “iga eegta sidaan xajka u gudanayo, ka dibna sidaa u guta”. Falalka noocan oo kala ah wuxa uu Nebigu ka dhigay sharci. Waana waajib in sideeda loo raaco.

2. *Ujeeddo fatwo bixin:* waxaa tusaale ka ah fatwooyinku u nebigu bixiyay markii xajatul wadaaca u ku guda jiray, oo tusaala ahaan, nin ayaa u yimi Nebiga markaasu ku yidhi “waxaan qalay hadyigii intaanan dhagax tuurin ka hor”. Markaasu nebigu ugu jawaabay “qal, dushaada danbi muu ahaanine”, xadiiskanoo kale waxa laga faa’idaysanayaa in tartiibinta camallada xajka aanay waajib ahayn, wixii nas ku soo arooray mooyiye, sidaas ayaana loo qaadanayaa.

3. *Ujeeddo kala xukun:* Ibnu Caashuur waxa uu maqsadkan u keenayaa tusaalooyinka soo socda: 1- kala xukunkii nebiga SCWS ee ninkii reer *Xadramuut* iyo ninkii reer *Kinda* ee dhulka isku qabsaday. 2- kala xukunkii Nebiga ee ninkii reer miyiga ahaa ee ay ninkka kale is qabsadeen, ee dabadeed Nebiga intuu uu u yimi ku yidhi “na kala saar”. 3- kala xukunkii Nebiga ee *Xubayba* iyo *Saabit*. *Xubayba bintu Sahal* ayaa nebiga u sheetay in aanay ninkeeda jeclayn, oo ay doonayso in ay iska furto. Markaasuu nebigu waydiiyay: ma u celinaysaa beertiisa? Markaasay tidhi, Haa oo waan haystaa beer kale. Markaasu nebigu u xukamay inuu *Saabit* beerta qaato oo u furo. Axaadiistan iyo kuwa la midka ahi maaha sharci dhigid caam

ah, siduu *Qaraafiba* caddeeyay. Ee waa arrin uu eegayo qaadigu, oo u ku ijtahaadayo.

4. *Ujeeddo maamul*: waxa tusaala u ah siintii nebigu u siiyay dhulka iska bannaan ciddii dib u noolaysa ee beerata, iyo ka reebitaankii uu asxaabtiisa ka reebay cunitaanka hilibka dameeraha markii ay ku guda jireen duullaankii *Khaybar*, iyo weedhii Nebiga SCWS ee duullaanki *Xunayn* u yidhi “ciddii cadowga cid ka disha markhaatina u haysata waxa uu leeyahy salbigii/xoolihii cidda u dilay”. Qaacidada guud waxay tahay in loo fahmo axaadiistaa arrimha bulshada iyo siyaasadda ku saabsan iyadoo loo eegayo maqaasidda sare iyo maslaxadda guud iyo sida ay dantu ku jirto .

5. *Ujeeddo hanuunin*: waxa tusaale u ah xadiiska uu *Bukhaari* soo waryay ee u ku yidhi “*Abu Darr* ayaa addoon yar oo uu lahaa hooyadii ku caayay. Markaasuu addoonkii nebiga uga cawday, nebiguna *Mucaad* buu waydiiyay, “Abaa daroow ma hooyadii madowgeeda ayaad ku cayday” markaasuu “Haa” ku afcelayay *Abuu Darr*, nebigu wuxu ku yidhi waxaa tahay qof ay wali ku jirto jaahilyaddii wax ka mid ahi. Xadiiskan oo kale waxaynu ka arki karnaa hanuuninta Nebiga ee

saxaabadiisa, arrin u gaar ah siduu saxaabigaasi uula dhaqmay addoonkaa.

6. *Ujeeddo Heeshiisiin*: waxaa tusaale u ah xadiiskii uu nebigu faray *Burara* inay ninkeeda ku nqota ka dib markay iska furtay, markaasay *Burayri* nebigu ku tidhi “*nabi Allow ma amar baa*” markaasu nebigu ku yidhi “*mayee, waa ergo*” markaasay tidhi “*xaajo/baahi iima hasyo ku noqoshadiisa*”. Waxa kale oo tusaale ka ah xadiiska uu *Bakhaari* soo saaray ee sheegaya in uu markii *Jaabir* aabbihii dhintay in uu nebiga u yimi, kana dalbaday in uu u la hadlo dad aabbihii dayn ku lahaa, si ay uuga dhaafaan. nebiguna dadkii wuu kala hadlay, wayna ka diideen inay dayntii ka dhaafaan, waanu ka yeelay nabigu SCWS. Axaadiistan iyo kuwa la mid ka ahi waxay ka fahmeen saxaabadu in aanu nebigu waxba ku faral yeelayn ee hishiisiin iyo dhexdhexaadin uu waday.
7. *Ujeeddo talo bixin*: waxa tusaale u ah, in uu *Cumar Bin Khadaab* nin Alle dartii faras u siiyay, kadibna uu doonay in uu dib uuga iibsado markuu dareemay inuu ninka lacag jaban ku sii iibaniyo faraska. *Cumar* nebigaa SCWS ayuu ka la tashaday markaasu nebigu ku yidhi “*ha ka iibsanin hadduu xitaa dirham qudha kaa siinayo, qofka ku noqda sadaqadiisa waa*

sidii Ay mataggii ku noqday". Saxaabadu xadiiskaa iyo kuwa lamidka ah toona kamay fahmin in amar la raacayo ay tahay. Ee waxay u fahmeen talo bixin.

8. *Ujeeddo nasteexo: waxa uu wariyay Nimcaan Binu Bashiir inuu aabbihii u sheegay nebiga SCWS in uu caruurtiisa mid ka mida wax u u hadyeeyay. Nebigu wuxa uu waydiiyay "caruurtaadoo dhan ma u wada hadiyaysay" markaasuu yidhi "may". nebigu SCWS waxa uu ku yidhi "ha imarkhaati gashan dulmi". Halkaana Shaafici iyo Maalik iyo Abuu Xaniifa midkoodna umuu fahmin inay hadyaddaasi burayso ama xaaraan noqonayso. Waji nasteexo uunbuu Nebigu uga jeeday.*

9. *Ujeeddada wanaajinta nafaha asxaabta nebiga: waa wanaagyo badan oo uu fari jiray nebigu asxaabtiisa. Waxa tusalee ka ah, xadiiska Bukhaari uu soo saaray wuxuu Baraa binu Caasib wariyay sidan "Nebigu wuxuu na faray toddaba, toddobana wuu naga reebay, wuxu nafaray inaanu booqanno ka xanuusanaya, jinaasadana raacno, qofka hindhisana aanu (yaraxmak allah/Ilaahay ha kuu naxariisto" u nidhaahno, dhaartna aanu ka run sheegno, qofka noo yeedhana/casuumana aanu ajiibno. Wuxuuna*

naga reebay fargallada fiddada ah, iyo weelka lacagta ah, iyo dharka ka samysan qisyad (dhar ay masaaridu xidhan jireen oo hareeraha xariir ka leh) iyo dharka xariita ah". Arrimahan badhkood waajibnamadoodu way sugnaatay. Badhka kalena wuxu nebigu u qasdiyay wanaajinta nafaha asxaabtiisa isagoo ka waaninaya "tarafka" iyadoo ayna xaaraan ahayn.

10. *Ujeeddada u kor qaadidda hanka saxaabada Nebiga: waxa tusaale u ah markuu Nebigu waydiiyay Abu Darr "ma arkaysaa buurtaa Uxud?" Abu Dar baa ugu jawaabay "Haa" markaasu Nebigu yidhi "waxaan jeclaan lahaa inaan haysto buurtaas oo dahab ah, dabadeed aan wada bixiyo seddex diinaar mooyoyi". Taas oo kale uu muu jeedin nebugu sharci dejin uu ku dabbaqayo qof kasta oo muslin ah.*
11. *Ujeeddo edbin: waxaa tusaale u ah hadalka nebiga "walaahi imuu rumaynin; wallaahi imuu rumaynin" markaasay saxaabadu waydiiyeen "ayo nebi Allow?" markaasu yidhi "ka aanu ka nabad gelin jaarkiisu dhibtiisa". Iimaankan loo jeedaa waa ka dhamays ka tiran; ee ma ah asalka imaanka (looma jeeddo in uu qofku ka baxayo Islaamnimada).*
12. *Ujeeddo aan wax barid ahayn: waana waxa aan xidhiidhka la lahayn diinta iyo sharci dajinta*

nidaamka ummadda, waa dhaqanka rasuulka u gaarka ahaa, sida cuntadiisi ama dharkiisa ama hurdadiisi ama socodkiisi, waxaana tusaale ka ah in uu nebigu istaagay maalintii Xajatul Wadaaca meel sare oo dhagax yaryar leh, oo u dhow bali ay leeyihiin reer *Banii Kanaana*. *Caa'isha* waxay ku tilmaantay in aanu xajka ka mid ahayn falkaasi, ee nebigu SCWS uu goobtaa u doortay in uu dego si uu markuu acmaasha xajka dhammaysto si fudud ugu bixi karo dhanka *Madiina*.


Balbalaadhinta *Ibnu Caahsuur* ee xadiisyada aan soo sheegnay waxay faa'idaysay inay kor u qaaday fahanka ujeeddada nusuusta shareecada, waxaanay muujinaysaa fahan ballaadhan iyo debecsanaan marka la fulinayo Shareecada.

“Marmarsiiyo furidda” oo ka soo horjeeda
“Marmarsiiyo Joojinta’

"Sad al daraa'ic" oo macanaheedu yahaya awditaanka marmarsiiyaha waxa loo yaqaan fiqiga islaamka dhexdiisa inuu yahay in la diido arrin xalaal ah.¹³⁰ Waana arrin sharci ah. waayo arrinkaa

136-al-Shawkani, Moxammad ibn cali, *Irshad al-Fuxul Ila Taxqiq cilm al-Usul*, ed. Mohammed Said al-Badri, 1st ed. (Beirut: Dar al-Fikr, 1992), bogga 246, Abu Sahrah, Mohammad, *Usul al-Fiqh*(Cairo: Dar al-Fikr al-carabi, 1958), bogga 268.

la diiday waa mid inna gaadhsiinaya arin xaaraan ah. culimada fiqigu waxay isku raaceen markaa la macnaynayo arrin laga baqayo inuu xaaraan ina gaadhsiyo, waa in la hubiyaa suural galnimada arrinkaa. Waxayn u qaybiyeen suuragalnimada afar heer oo sidan ah:¹³¹



Afarta nooc ee “dhici kara” sidii ay u arkeen fuqahadii baadhay “joojinta marmarsiyyaha” waxa weeye: wax hubaal ah, wax badanaa dhacaa, wax dhici kara, iyo wax marar dhif ah dhaca.

Intan soo soctana waxaynu ku soo gudbinaynaa tusaaleyaal ay fuqahadu sheegeen si ay u caddeeyaan afartaasi nooc.:

- 1- Hadii tusaale ahaan dariiq laga qodo ceel, waa fal keeni kara dhib la hubo. Waxay isku waafaqsaniyihiin fuqahadu in la joojiyo arrinkaa. Hasa yeeshee, waxay isku

137- Abu Sahrah, Usul al-Fiqh, bogga 271.

khilaafeen dhibta ka timaadda masuuliyadeed ma qaadayaa ciddii falkaa samaysay. Waana khilaaf ku soo uruuraya in arrin la joojiyo kama dhalanayso in uu qofkii falay ka mutaysanayo ciqaab wixii dhiba ah ee ka dhasha.

- 2- Tusaale uu sheegay *Shaadibi* oo la xidhiidha falka keeni kara dhib dhif ah dhici kara, waxa tusaale u ah iibinta cinabka. Haddii la eego dadka cinabka u adeegsanaya in ay khamri ka sameeyaan aad bay u yaryihiin. Markaa, halkan “joojinta marmarsiiyaha” laguma fulinayo, sida ay sheegeen fuqahadu maxaa yeelay, falkan waxtar kiisa ayaa ka badan suura galnimada wax yeelladiisa.¹³²
- 3- Fuqahada qaarkood waxay qabaan in waxyeehlada “badanaaba” dhacdaa leedahay marka uu jiro iibka hubku xilliga fitnada (oo ah xilliga ay jiraan colaado hubaysani); ama in cinab laga iibiyo sameeyaha khamriga. *Maalikiyadda* iyo *Xanaabiladu* waxay qabaan in la joojiyo marmarsiiyaha. Halka ay *Shaaficyadu* ku khilaafeen. Waxaanay yidhaaheen waa in dhibtu tahay “hubaal” si loo joojiyo “dariicada/marmarsiiyaha”.

138- Al-Shadibi, al-Muwafaqat, majaldka. 2, bogga 249.

- 4- Fuqahada qaarkood waxay arkaan in ay “dhici karta” in dhibaato ku timaaddo gabadha marka ay keligeed socdaasho; ama marka ay dadku adeegsadaan xeeladaha fiqiga (kuwaas oo ah hehiishyo guud ahaan hagaagsan, hasa yeeshee, ay ku hoos jiraan xeelado qarsoon oo ku lug leh ribo.) Halkanna *Maalikiyada* iyo *Xanaabiladu* waxay isku raaceen in la joojiyo marmarsiiyaha; halka ay fuqahada kale taa khilaafeen iyaga oo leh dhibtu ma aha “hubaal” ama “joogto”.¹³³

Tusaalayaashan waxaa ka cad in “wasaai’sha/jidka” iyo “qaayaatka/yoolka” ay ku xidhanyihiin daruufaha xilli iyo kuwa dhaqaale iyo kuwa waayaha bulsho. oo qawaacid sugana ma aha. oo iibinta cinabka iyo safarka gabadha iyo iibinta hubka intaba waa laga yaabaa in uu dhib ka dhasho. Waxa kale oo xaalado kale suura gali kara in aanu dhibi ka dhalan balse ay faa’ido iyo dheef yeelato.

Waxa loo yaqaan “sad al daraai’c/awididda marmarsiyyaha” waxa weeye, marka aynu eegno falsafadda akhlaaqda, nooc xukun lagu saleeyay waxa ka iman kara fal.¹³⁴ Waxa suura gal ah in ay marar faa’ido yeeolato. Halka marar kalena dhib ka

139- Abu Sahrah, ‘Usul al-Fiqh, bogga 273.

140-Wolfe, Robert Paul, About Philosophy, 8th ed. (New Jersey: Prentice-Hall, 2000), bogga 90.

iman karto, haddii ay si gurrucan u adeegsadaan dadka mintidka ama xagjirka ahi; ama kuwa siyaasadda inay ku xukumaan. dadka qaar waxaynu aragnaa maanta in “joojinta marmarsiinyahu” ay u noqotay wasiilad ay aad ugu adeegsadaan “Daahiriyada Cusub”, sida uu u dhigay *Sheekh Yuusuf Al Qardaawi*, siiba marka arrinku la xidhiidho xukunka shareecada ee u gaarka ah dumarka Muslinka ah.

Tusaale ahaan iyagoo cuskanaya “sad al-daraa’ic/awidda marmarsiinyaha” ayey xaaraantimeeyeen haweenayda muslinka ahi in ay ah gaadhi kaxayso, ama inay kaligeed safarto, am in ay ka shaqayso telefishan ama goobaha siyaasadda, ama inay dariiqyada qoorkood martaba!¹³⁵ Waxan halkan ku soo guurinayaa tusaale caddaynaya waxa aan u jeedno, ee qaabka gurrucan ay loo adeegsaday “Sad Al Daraa’ic”, anigoon wax falanqayn ah aan raacinayn. Waxa aan uga tagayaa akhristaha; wax ka qosliya wuu ku arkiye.¹³⁶

“{waydiin}: Waxaad ii iftiimisaan xukunka inay gabadhu gaadhi ka xayso, sidee ayaad u aragtaa weedha

141-Wajanat Abdurahim Maymani, *Qacidah al-Dhara’ic*, 1st ed. (Jeddah: Dar alMujtamac, 2000), bogga 608, 22, 32, 50.

142-Al fatawa al sharicya fi al masail al casriya, min fatawa culama al balad al xaram. Sheekh ibnu cutaymiin.

ah inay haweenaydu kaxaysato gaadhi ayaa uga dhib yar in uu nin ajinabi ili ku ku kexeeyo gaadhiga?

{Jawaab}: Warcelinta waydiintani waxa gun dhig u ah, in wixii xaraan ku gaadhsiinaya uu xaaraan yahay, ka xaysashada gabadhu ay gaadhi ka xaysataa mafaasid badan baa ka dhalanaysa, oo ay ka mid tahay: xijaab xoorid, waayo gabadhu gaadhi ma kaxayn karto jeerooy wajiga banayso oo ah meesha fitnada, ee raggu eegaan. Waxa laga yaabaa in qof yidhaa: taa waxa lagu baddeli karaa inay gabadhu xidhato muraayado madmadow oo astura. Hasa yeeshee, weedhaasi way khilaafsantahy waaqica dumarka jecel inay kaxaystaan baabuurta!. Waxa ka mid ah mafaasidda in ay dumarka xishoodkaba ka tagaan markay baabuur kaxeeyaan. Waxa kale oo mafaasideeda kamida inay sabab u tahay in gabadhu ka baxbaxdo guriga; iyo inay gabadhu noqonayso qof xor ah oo goorta iyo goobta ay doonto u bixi karta xilli kasta habeen iyo maalin. Mafaasideeda waxa kale oo ka mid ah inay gabadhu ku madax adeygto reerkooda ama ninkeeda; oo haddii wax ay ka xanaaqdo intay gaadhigeeda ku baxdo meeshay ku nafisayso tagto! Waxa kale oo mafaasidda ka mid ah inay gabadhu gaadhi kaxaysto in ay meelo badan keento fitnada sida marka ishaarada baabuurtu joojiso ama marka ay kaalmaha shidaalka joogsato, ama markuu gaadhigu kaga xumaado meel waddo ah, oo laga yaabo in uu la kulmo nin “saafil ahi/nin xun oo hooseeya” oo cirdigeeda kula gorgortama si uu uga saaro dhibta. Mafaasiddeeda waxaa kale oo ka mida ah in ay baabuurtu waddada saxmad ku noqdaan! Ama ay dhallinyaradu ay fursad gaadhi kaxaysi ku waayaan iyaagaana kaga

habboon kana mudan! Waxa kale oo mafaasiddaa ka mida ah inay bataan shilalka baabuurtu! Maxaa yeelay haweenku sidoodaba way ka aragti iyo karti iyo karaan hooseeyaan ragga!".

Dhanka kale waxay soo bandhigeen qaar *Maalikiyada* ka mid ahi "fatx al daraai'c/furitaanka marmasiiyaha" in uu noqdo dhinaca maan-galka ah ee barbar yaalla "sad al daraai'c/awidicda marmarsiyaha".¹³⁷ isaga oo arrintaa la xidhiidhana *Qaraafi* wuxuu u qayb-qabiyay xukannada "wasaa'il" iyo "qaayaat", Waxaanay ula muuqatay in uu xaaraantimeeyo "wasaa'isha" ku gaadhsiinayaa "qaayaat" xaraan ah; lana furo kuwa ku gaadhsiinaya Ujeeddooyinka mubaaxa ah. Halkan waxa innooga muuqda in *Qaraafi* isku xidhay in la xaddido oo lagu beego wasaa'isha yoolka iyo Ujeeddooyinka ay xaqiijinayaan wasaaa'ishaasi. Waxaanuu soo jeedaiyay in sal looga dhigo saddexdan derajo ee Ujeeddooyinka ah, oo kala ah: "xun/qabiix", "san/xasan, iyo "dhexdhexaad". Faqiih Maalikiya oo kale oo la yidhaa *Ibnu Farjuun* (oo geeriyooday 769M) wuxuu ku fuliyay qaacidadii *Al-Qarrafi* ee "Fatxu Al-

143-Al-Qaraafi, al-Dhakhirah, majaldka. 1, bogga 153. Al-Qaraafi, al-Furuq (Maca Hawamishih), majaldka. 2, bogga 60, Burhan al-Din ibn Farxun, Tabsirah al-Hukkam fi Usul al-Aqdiyah wa Manahij al-Axkam, ed. Jamal Marashli (Beirut: Dar alKutub al-cIlmiyyah, 1995), majaldka. 2, bogga 270.

Daraa'ic/Furitaanka Marmarsiinyo" tiro axkaam ah.¹³⁸

Ujeeddo dawo xun leh = Waa xaraan	Ujeeddo daw caadi ah leh = Waa mubaax	Ujeeddo daw sax ah leh = Way bannaan tahay
---	---	--

Wasaa'isha lugu gaadhayo ujeeddooyinka xukunadooda, sidii Qaraafi u dhigay.

Halkan waxa innooga muuqda in aanu dedaalka *Maalikayadu* ku koobnayn joojinta wixii keenaya xumaanta; wayse ballaadhiyeen fikirkaasi oo ay gaadhsiiyeen bannaanida wixii keenaya wanaagga. Arrintaas oo keenaysa in la dhiiri geliyo in la falo wixii dadka wax u taraya xitaa haddii aanu samaynta falkaasi nusuusta ku caddayn. Waana arrinka keensanaya in la isku boorriyo falalka xaqiijinaya danaha dadka, falalkaa yayna sheegine nusuus cadcadba.

Xaqiijinta "Ujeeddada" Caalamnimada Risaalada Islaamka

Dhaqanka iyo curfiga uu islaamku ilaaliyo waa dhaqan kasta oo wanaagsan oo ay leedahay bulsho. Laakiin xidhiidhka u dhexeeya sharciga iyo dhaqanku waa mid adag oo "mucaqad" ah, dhaqammada Carbeed aad bay raad ugu leeyihiin

144- Al-Qarafi, al-Dhakhirah, majaldka. 1, bogga 153.

axkaamta fiqiga ee Islaamka, ha ahaato e xilliyadii horreeyay ee taariikhada Islaamka ama xilliyadii danbeeyayba e. Sidaa darteed waxa u soo bandhigay *Ibnu Caashuur* aragti ku saabsan dhaqanka oo ku dhisan Ujeeddooyinka shareecada Islaamka. Cutub ayuu u gaar yeelay curfiga/dhaqanka kitaabkiisa “maqaasidda shareecada” kaas oo u ku magacaabay “*caam ahaanshaha shareecada Islaamka*”.¹³⁹ Muu soo bandhigin *Ibnu Caashuur* dhaqanka Carbeed raadku ku leeyahay xadiiska ee wuxu ku kaaftoomay dhaqanka Carbeed raadku uu ku leeyahay fahankeena axaadiista nebiga SCWS.

Wuxu *Ibnu Caashur* ku billaabayaa in laga duulo mabad’a ah caaliminimada Islaamka, waayo waa kuwa culimada Islaamku sheega inuu Islaamku u cuntamo aadamaha oo idil. Saban kasta iyo goob kastaba ha la jooge e, Waana sid ay aayadaha Quraanka iyo axaadiista suubani ay sheegayaan, *Ibnu Caashuurna* tiro daliillo ah ayuu ku soo arooriyay kitaabkiisaasi.¹⁴⁰ Wuxuuna ku dheeraaday xikamdda ku jirtay in nebiga laga

145-Ibn Ashur, *Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah*, bogga 236.

146- Ibn Ashur mentioned, for example: ‘Now [as for you, O Mohammad,] We have not sent you otherwise than to mankind at large’ (34:28), ‘Say [O Mohammad]: “O mankind! Verily, I am an Apostle to all of you”’ (7:158), iyothe hadith: ‘An apostle used to be sent specifically to his own people, while I have been sent to all of mankind’ (Muslim).

doortay *Carab* dhexdeeda, waxaana ka mid ah xikmadahaa u sheegay, in aanay *Carabtu* xadaarad lahayn, taas oo si fudud u sahalaysa in ay shucuub kale isdhexgalaan oo ay isku milmaan, cadaawadna may jirin ka dhexysa *Carab* iyo cid kale. Waana arrinkay kaga duwaanayeen *Ree Faaris, Roomaankii, Biisantiiniyiintii iyo Aqbaaddii Masar*, wuxuunu yidhi:¹⁴¹

“waxyaalaha ay keentay shareecada Islaamku waxa uugu wayn, inay xukunkeeda u siman yihiin umadaha raacasan oo idil, xikmaddaas oo Ilaahay uu ka yeelay mid ku qotonta shareecada waxyaalo maanku ogglaanayo, oo ay ummadaha iyo dhaqannada kala duwani wada qaadan karaan, waxaanu yaqiinsan yahay in aan dhaqan umadeed tukale dusha laga saarin. Waxayna ka dhacdaa culimada fiqiga badhkood inay xaaraantimeeyeen arrimo aan la hayn mafsado la arki karo, sida in timaha dumarka timo kale lugu xidhiidhiyo, ama ilka la qorayo, ama jidhka wax lagu sawiro. Aragtida aan qaatay waxa weeye in arrimaha caynkaas oo kale ahi ay muujimayeen awood la’aanta haweenka Carbeed ee xilligaas. Markaasi sidaa waxayaalahaasi loo diiday waa waxyaalo dhib ku ah haweenka oo sharaf tooda wax yeelaya. Quraankana waxa ku jirta (يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ قُلْ لِّأَزْوَاجِكَ وَبَنَاتِكَ)

147-Ibn Ashur, Maqasid al-Sharicah al-Islamiyyah, bogga 236.

(وَنِسَاءِ الْمُؤْمِنِينَ عَلَيْهِنَ مِنْ جَلَائِبُهُنَّ).¹⁴² Sharcigu halkan waxa u dhowray dhaqankii Carabta, oo ciddii aanu jilbaabka dhaqoonkooga ku jirin ma koobin sharci dajinta aayaddani. Haddaba si macnaha Shareecadu noqdo mid suuragal ah goor kasta iyo goob kastaba waa in ay noqotaa axkaam guud iyo macaani daboolaysa, xukunno iyo maslaxad qaadi kara in ay ka farcamaan axkaam kale oo ka dawan haddana isku Ujeeddo ah.

Isaga oo ku binaynaya Ujeeddada “caalamiyaynta” ee sharci dajinta Islaamka ayuu *Ibnu Caashuur* soo jeediyay dariiqo loo fahim karo axaadiista nebiga isaga oo ku xidhaya xilli taariikheedkii iyo waayihii jiray markii ay *yimaaddeen*, oo aan ahayn qawaacid furan, iyo weedho sidooda loo qaadanayo ee ay tahay in lugu xidho maqaasidda akhlaaqeed ee macnaha baalaadhan, waana ta ka dhigaysa shareecada Islaamka mid dabacasan oo lugu dabbiqu karo bulshooyin kala gaddisan. Siiba bulsahooyinka aan carabta ahayn.

Ujeeddooyinku waa gogol midaysa Madaahibta Islaamka

Astaamaha qarnigan 21^{aad} waxa ka mid ah, kala qaybsanaanta weyn ee ka dhaxaysa madaahibta Islaamka. Waxana ugu ba’an uuguna dhib badan

148-Quraanka, suuratul axsaab.

khilaafka u dhexyaalla Sunnada iyo Shiicada, kaas oo ay dad badani u arkaan inuu ka dhashay khilaaf siyaasi ah, kadibna isu beddalay “khilaaf madhabadeed”. Kolka loo kuur galo khilaafka ka dhex aloosan Shiicada iyo Sunnada, mar hore iyo mar danbeba, wuxu ku soo ururayaa kalmadda “siyaasad”, mana ah khilaaf “caqiido”. Laakin is haysigu wuxu saameeyay meel kasta, ka billow masaajidka, maxkamadaha, iyo xidhiidhada bulshe ee kale. Arrinkaasi dalalka qaarkood waxa uu gaadhay colaad dhiig badani ku daato, taas oo ay siyaasadda dowliga ahina ka qayb qaadatay sii hurintiisa. Khilaafka aadka u kulul ee ka dhexeeya labadaa madhab wuxu dhalay dhaqan aad u faafay oo cidhiidhi ah, kaas oo ah diidmada ra’iyaga kaa duwan iyo qofka haysta mad’hab kaaga ka duwan la noolaanshihiisa, iyada oo la ilaashanaya un nabadadda guud.

Waxaan diraaso ku sameeyay qormooyinka iyo dhiganayaasha mowduuca Ujeeddooyinka Islaamka ka warramaya, ee ay qoreen aqoonayannada Sunniga iyo kuwa Shiicaduba, waxa iiga soo baxay natiijo ah iswaafaqsanaan dhammaystiran oo labada dhinacba ah, iyo inay isku si u baadheen mawuucyada, sida (Ijtihadka, Qiyaaska, Xuquuqda, Qiyamka, Akhlaaqda) labada dhinacba waxa ay adeegsadaan maraajic isku mid ah oo ka mid yihiin (kitaabka *Juwani* ee “Al Burhaan”, kitaabka *Ibnu Baawabayhi* “Cilal Al-

shariica", kitaabka *Qasaali* "Al Mustasfa", kitaabka *Shaadibi* "Muwaafaqaat", kitaabka *Al Sadr* "Al Usuul", kitaabka *Ibnu Caashuur* ee "Maqaasidu Al-shariica", waxa kale oo ay labada dhinacba adeegsadeen isla hal eray bixinno, sida (al masaalix, ad-daruuriyaat, al xaajiyaat, at-taxsiiniyaat, al maqaasid al caama. Al maqaadi al khaasa).

Khilaafka ka dhexeeya Shiicada iyo Sunniyiinta badanaa maaha mid usuusha iyo Ujeeddooyinka shareecada ah, ee waxay isku hayaan sugnaashaha xidiisyada qaarkood, taasoo keentay inay ku kala tagaan dhowr arrimood oo axkaamta faahfaasan ee dhaqangalinta ah.

Balse, dawga Ujeeddooyinku ula dhaqmaan fiqigu waa daw ballaadhan oo aan isku koobin hal xadiis iyo hal ra'iytoona, ee wuxu u adeegayaa mabaadi'da guud ee ay wada cuskanayaan dadka muslinka ahi. Maqaasiddu sidoo kale waxay u adeegaysaan yoolka qaayaha badan ee "midowga muslinka iyo inay mid u noqdaan taxadiyaatka haysta", iyadaana ka mudan tafaasiisha fiqiga, waana ta u sheegay "*Aayatu Allah Mahdi Shamsa Diin*" oo ku tagay xaaraatinimada in uu ku xad gudbo mid ka mida labada mad'hab ka kale, isagoo ku binaynaya maqaasidda sare ee aasaasiga ah ee ku soo uruuraya heshiiska, midnimada, iyo

cadaaladda.¹⁴³ Dawga Ujeeddooyinku waxa uu kor u qaadayaa heerka aynu ka eegayno qaddiyadaha. Sidaa darteedna waxay tiraysaa khilaafaatka siyaasadeed ee taariikhda innaga soo raacay; Waxayna dhiiri gelinaysaa heeshiiska iyo ku wada noolaanshaha nabadda ee aynu aadka ugu baahnnahay maanta dunida muslinka dhexdeeda.

Ujeeddooyinka Shareecadu oo sees u ah wada Hadal Diimeed

Aragtida habaysan ama “al ru’yaal-manduumiyah” ee lugu diraaseeyo diimaha (systemtic theology) waa manhaj guud oo lugu diraaseeyo diimaha, ama diin si gaar ahaana luugu darso, iyadoo sawir guud la ga samaynayo diintaa, iyo dhinacyada diinta xidhiidhka la leh, ee taariikhdeeda, falsafadda , akhlaaqda iyo culuuntaba, si looga bixiyo sawir guud tiirarka iyo seeska diintaa. Dariiqadan waxa loo darsaa sida casriga ah qayb-qayb, sida cilmi Laahuutka Kiristanka, oo isku dayaya in lugu fahmo madaahibta Kiristanka idilkood.

Manhajiyaddan Kiristanku dajisteen waxa ay dhigaysaa waydiimooyin lugu darsayo diintooda, oo ay ugu muhiimsantahay: maxaynu ka baraynaynaa kitaabka muqaddaska ah haydaynu u eegno si duuduub ah oo dhammaystiran, marka

149-ShamsuddIn, “Maqasid al-Sharicah,” bogga 26.

aynu baadhayno arrin gaar ah?. Sidan oo kale waxay sameeyaan in ay soo ururiyaan nusuusta ku soo arootay mawduucaas,¹⁴⁴ oo si dhammaystiran isugu daba qabtaan. Mawduucayada ay sidaa u baadhaanna way tiro badantahay waxa ka mid ah, salaadda, cadaaladda, toosnaanta, kalgacaylka, naxariista, midowga, kala duwnaashaha, akhlaaqda, ikhlaaska, iyo mowduucayo badan oo kale oo kala duwan, oo ku soo arooray baadhitaannadaa.¹⁴⁵ Manhajiyadani waxay adeegsataa qaabka “istiqaara/dabagalka” taas oo u hoggaaminaysa cilmi baadhaha inuu soo uririyo oo isku dhammaystiro waxay ku magacaabeen xaqiiqooyinka kala baahsan.

Waxa uu sheegay *Charles Hodge* (1797-1876) ahmiyadda dariiqada manhajiga cilmiga Laahuutiga isagoo ku bineeyay sidatan:¹⁴⁶

- 1- Samaysanka maanka aadanahu waxuu kasoo qaadayaa in aanay suura gal ahayn inuu ka fogaado isku dayga meesha ka saaraya aragtida guud ee iswaafajineed ee xaqiiqooyinka uu sugayo garaadku.

150- Tixraacii hore. bogga 22.

151-Tusaale ahaan, Tixraacii hore. bogga 67, 65, 110, 119, 123, 135, 143, 164, 172, 189, 208.

152-Charles Hodge, *Systematic Theology*, edited by Edward Gross (New Jersey:

153- R Publishers, 1997), bogga 26

- 2- Xaqiiqooyinka ayey soo ururinaysaa dariiqadani iyadoo ka dhigaysa qaab ka sarreeya aqoonta.
- 3- Dariiqadani waxa ay lagama maarmaan u tahay in la helo oo la xaqiijiyo ilaalinta xaqiiqooyinka.
- 4- Dabeecadda way wadaagaan caalamka maadiga ah iyo caalamka waxyigu, siduu Ilaahay sarree oo korreeye caddeeyayna, isaga ayaa doonay in dadku ay dadaalaan si ay u fahmaan sancadiisa.

Waxa laga yaabaa aragtidan “manduumiga ahi” ee aan soo bandhigay in ay dhinacayo kala mid tahay manhajka culuumta Musliimiinta ee lagu darso Ujeeddooyinka Shareecada. Waana sida dhiganahan kooban aan hortiina yaalla, oo ku qotama manhaj ka soo dheeganaya nusuusta kuweeda guud iyo kuweeda asaasiga ah, sida cadaaladda, akhlaaqda, iyo danaha kala duwan.

Waxayna xadaynaysaa aragtida Ujeeddooyinku dhowr kalmadood oo ay shareecadu sugtay. Sida “Ilaalinta diinta, Ilaalinta nafta, Ilaalinta maalka, Ilaalinta caqliga, Ilaalinta taranka” sidii hore inoo soo martay.¹⁴⁷ Sidoo kale cilmi baadhayaasha soo

154- Al-Qasaali, al-Mustasfa, majaldka. 1, bogga 172, Ibn al-carabi, Abu Bakr al-Maliki, alMaxsul fi Usull al-Fiqh, ed.

saaray aragtida “maduuminga ah” ee diimaha lugu darso waxa ay ka hadleen arrimo kuwan la mid ah, sida “Ilaalinta nolosha, iyo caafimaadka” oo waxay diideen tusaale ahaan cabbitaanka khamriga gaadhsiisan sarkhaanka. In kasta oo mowqfika Islaamku sidaa ka duwan yahay oo uu xaaraantimaynayso wax kasta oo maanka dooriya, sidii uu doono haw yaraado ama noocuu doono ha ahaado e. Taasina waxay la xidhiidhaa baabka “Ka Hortagga Marmarsiiyaha sakhradda”. Sidoo kale waxa ay ka hadleen “ahmdiyadda in la ilaaliyo oo la daryeelo qoyska”, taasina waxay u dhowdahay “Ilaalinta Taranta” iyo maslaxadda qoyska.¹⁴⁸

Waxay u fududaynaysaa aragtida maqaasiddu culimda diinta, in ay tilmaamaha iyo amarrada diinta ku xidhaan mabaadi’da iyo ahdaafta ka danbaysa, halkey u eegi lahaayeen qaab “xaraf raaca ah”, oo aan aqoosanayn ahmaiyadda iyo udub dhaxaadnimda qiyamka akhlaaqeed ee amarrada shareecada ku duugan, iyo in uu amarradaa isbadbadalkoodu ku xidhanyahay is beddalka baahida iyo bulshada kolba la joogo.

Hussain Ali Alyadri iyo Saeed Foda, 1st ed. (Amman: Dar al-Bayariq, 1999), majaldka. 5, bogga 222. Al-Amidi, al-Ixkam, majaldka. 4, bogga 287

155-Wayne Grudem, Systematic Theology, bogga 124, 208, 241, 781, 1009.

Sidaa darteed waxaan isleeyahay inuu manjhaka diraasaynta diinta iyadoo sees looga yeelayo “ujeeddooyinka shareecada” ama waxay ku magacaabaan aragtida guud ee “manduumiga” ahi, in ay dowl wayn ku yeelan karto wada hadallada diimaha, iyo in ay si heer sare ah isu fahmaan diimuhu. Aragtida ujeeddooyinku waxa ay ina siinaysaa arrimo guud oo wada hadalkaa iyo is fahanka sahlaya.

Fulinta Ujeeddooyinka Shareecada

Waydiimo iyo War-celinno ku Saabsan Akhlaaqda:

Waydiimo badan oo dowlado kala duwan la iga soo waydiiyay ayaa igu soo gaadhay mareegta Internetka ee *Islaamonline.net*, qaybtiisa *readingislam.net*. Waydiimahan waxa la iigo soo hagaajiyay nadwada iliktarooniga ah ee (Islaamka wax ka waydii) oo mareegtaa qayb ka ah. Qaarkoodna waxay iga soo gaadheen iimayl kayga shakhsiga ah, su'aalaha wax ka mid ah ayaan halkan ku soo taxayaa, anoo ka saaray su'aalaha iyo jawaabahaba, wixii aanu u baahnayn akhristaha kitaabkani. Hadaafka aan ka leeyhay soo guurinta waydiimahan iyo jawaabahoodu waxa uu yahay, in aan caddeeyo sida ay Ujedooyinka shareecadu ugu helayso xal mushkilooyinka taagan ee la xidhiidha shareecada Islaamka. Waana waydiimo ay marar badan is waydiiyaan dadka muslinka ah iyo kuwa kaleba.

Waydiin: Marka aynu ka warramayno Ujeeddooyinka shareecada si guud, waxaynu ka waramaynaa akhlaaqda, miyayna sidaa ahayn? qof ahaan haddaan ahay muslin ku nool dhulka reer galbeedka waxa ii muuqda kala tagsanaan ballaadhan oo u dhaxaysa mabad'a akhlaaqda Islaamka iyo mabda'a akhlaaqda reer galbeedka.

Waxaan ka wadaa wixii Islaamku u arkay xumaan 14 qarni ka hor wali sidiisi buu u arkaa Islaamku. Hasa yeeshee, mabda'a akhlaaqiga ah ee reer galbeedka sidaa wuu ka duwan yahay; oo waxa ku jira isbadbaedelo iyo horumar lugu sameeyo aragtida akhlaaqda kolba isbeddalka wakhtiga. Waxan rajaynayaa inaad aragtidaada naga siisid arrinkaa?.

Warcelin: waa waydiin muhimmada badan wax aan kaga jawabaayaa laba arrimood:

- 1- Waxa habboon inaynu kala saarno aasaaska akhlaaqda (oo ah arrimaha sare ee Ujeeddooyinka), iyo doorashada akhlaaqda (oo ah fulinta asaaska akhlaaqda). Ujeeddooyinka iyo qiyamka sare (sida caddaalada, sinnaanta, amaanada, xorriyada, dhowrsanaanta, isa saamixida, iwm) kuwani iskuma beddalaan sabanka iyo goobta oo isabadela awgeed, oo waa ay suganyihiin markasta iyo meelkastaba. Hasa yeeshee, dhaqanka akhlaaqeed, waa marka nolasha lugu dabaqayo tusaalayaashan aynu sheegnay. Waxaana suura gal ah in ay sabanka iyo goobta awgeed isu beddelaan oo kolba loo fuliyo sida ugu habboon. Tusaala ahaan, cadaalddu waa sees asal ah goor kasta iyo goob kasta oo la joogo. Laakiin cadaaladda ku xukunkeeda meelaha

maxkamadaha ah tusaale ahaan waxa ay ku xidhantahy waxa ay kolba bulshadu u taqaan “caddaalad” ee ku xidhan dhanaqka bulsho iyo duruufta waayahooga. Maxaa yeelay cadladda waxa raacsan shuruud iyo xuquuq xadaysan; oo ku dhacaya qof kasta oo ka mid ah bulshada; oo soo guda galaysa nidaamka bulsheed iyo dhaqaale ama siyaasadeed ee awoodda badan. Xuquuqdaa iyo masuilliyadaha waxa suura gal ah in ay is beddal ku dhaco haddii aynu u eegno nidaam bulsheed oo ka duwan ka qoyska ama qofka. Ama nidaam siyaasadeed ama dhaqaale oo ku dhisan dhaqanno iyo xuquuqo u gaar ah dad ama jamaacooyin. Waxyaabaha u dhexeeya dhaqamada – mar haddii ay ku guda jiraan sharciga iyo curfiga – waa in la tix geliyaa haddii la doonayo in ay cadaaladda lafteedu suganto.

- 2- waxa kale oo haboon inaynu sugno in ay cibaadooyinka iyaga sidooda loo qaadanayo, oo aanay saamaynany isbeddelka goorta iyo goobtu; waana seeska shareecada Islaamka ee ay tahay inuu Muslin kastaa ku dhegsanaado saban kasta iyo goob kasta. Waxa tusaale ah cibaadooyinka in aan isbedbedel ku jirin, salaadaha shanta ah ee maalin kasta uu tukado qofka muslinka ahi. (iyo sidoo kale qaabka loo oogo salaadda iyo qaabka loo wayso qaato. Iyo tiirarkeeda, iyo

wakhtiyadeeda, iyo dhaqdhaqaaqeeda), sidoo kale sakada ayaa la mid ah, oo waxaan is bedbeddel ku imanayn cida mutaysta sakada iyo intay ku waajibaysa iwm, cibaadooyinka iyo qayrkoodba muslinku waxa uu kaga dayanayaa nebi Muxammad SCWS isaga oo aan cusboonysiin ku sumaynayn cidina aanay xikmad ay isbaddel uugu samayso leh aanay jirin.. Hasa yeeshee, camallada loo yaqaan “mucaamalaatka” iyada waxay loo dabaqayaa kolba sida uugu habboon ee loo arko in Ujeeddooyinka iyo xikamaddii looga jeeday lugu gaadhi karo. Waxa kale oo xusid mudan in xaarantinimada camalada qaarkood (sida khamri cabidda ha yaraado am ha badnaado eh , iyo khamaarka, iyo ribada, iyo sinada) waxa ay la mid yihiin cibaadooyinka aynu soo sheegnay, oo iyaga waxa ku soo arooray daliillo cadcad oo aan muran iyo ijtihad toona gali karayn.

Waydiin: Sidee ayey shareecada Islaamku uga qayb qaadan kartaa korriinka akhlaaqeed ee bolshooyinka muslinka ah, siiba casrigan cusub ee ay isbedellada badani jiraan?.

Warcelin: Shareecada Islaamka waxa u gaar ah in ay xukun kasta oo ay waajibisay ama reebtay ay uga gol leedahay inay xaqiijiso ujeeddo akhlaaqeed. Oo

cibaadaadka iyo mucaamalaatka Islaamku waxay si siman u beegsanayaan ujeeddooyin akhlaaqeed.

Rusuulkana SCWS waxa loo soo dirayba inuu “*dhamaystiro akhlaaqda teeda togan*”. Sidii isagu u tibaaxay. Haddii aynu tusaalo u soo qaadanno Quraanku waxa u sheegay inay faral yeelidda salaadda ay tahay mid xumaanta iyo xaaraanta reebaysa. Ilaahay sarreeye oo korreeye wuxa uu yidhi: (إِنَّ الصَّلَاةَ تَنْهَىٰ عَنِ الْفَحْشَاءِ وَالْمُنْكَرِ) (*Al Cankabuut* 45). Sidoo kale marka Xajka lugu guda jiro waxa la amray in ay fisqi iyo muranba ay reebanyihiin, wuxu yidhi Ilaahay (فَلَا رَفَتْ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ) (*Al Baqra* 197). Ujeeddada Sakada laga leeyahayna nebigu SCWS waxa uu ku sheegay “xoolo laga qaadayo kuwa qaniga ah oo la siinayo kuwa saboolka ah”. Dhammaan axkaamta sharciga ah ee la xidhiidha mucaamlaatku waxay xaqiijinayaan yool akhlaaqeed oo qoto dheer, sida dhawrida xuquuqda maaliga ah, iyo cadaaladda, iyo ammaanada, iyo ilaalinta kawa taagta daran, iwm. Haddii shareecada si toos ah loo fuliyo, akhlaaqdu si fudud bay ugu faafaysaa bulshada dhexdeeda.

Waydiin: Quraanku waxa uu sheegay in uu nebi Muxamed SCWS u yahay naxariis loo soo diray dunida, sidee ayey taasi u dhaboobaysaa innagoo arkayna adadyga shareecada Islaamka? Miyayna ku jirin iska hor imaansho adadayga shareecada iyo naxariista Nebi Muxamad loo soo diray?

Warcelin: Haa, nebi Muxamed SCWS naxariis baa loo soo diray (وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعَالَمِينَ) (*Al-Anbiya* 107). Waxan se arkaa inay mushkaliddu tahay qaabka loo fahmay shareecada nidaamkeeda akhleeqeed. Waxaan xusuustaa kalmado uu leeyahay faqiiha wayn ee *Ibnu Al Qayim* (oo geeriyooday 748 H, 1347 M). Wuxu yidhi :

“Shareecadu waxay ku binaysantahay seeskeeduna yahay maslaxadda adoomaha, giddigeedna waa caddaalad. Iyo naxariis, iyo xikmad, iyo maslaxad. Arrin kasta oo ka baxsan cadaallada ama naxariista ama lid ku ah danta ama xikmadda ka hor imanaya, shareecada ka mid maaha xitaa haddii loo tiiriyo”.

Dhibta wayni waxau ka timi dadka badan ee ku dhaqanka shareecada si qaldan u fahmay, ee daabadeed sawir khaldan ka bixiyay shareecada Isalaamka sida waydiinta ku muuqta. Iyadoo shareecada lafteedu uu hadafkeedu yahay in ay xaqiijiso ujeeddooyinka ah cadaaallada iyo naxariista iyo xikamadda iyo danaha. Dadka qaar leh mansib diineed ama siyaas ah oo muhiim ah ayaa si xun u adeegsada shareecada si ay dantooda ugu ilaashadaan. Waxayna ku dadaalaan in ay fahankooda khaldan sii faafiyaan si ay liibaantooda adduun u sii badato, waxa shaki la’aan ah in ay kuwaasi Islaamka wax yeelo ku hayaan ka wayn ta cadwga Islaamku ku hayo.

Waydiin: Jacaylku qiimo wayn buu nolosha ugu fadhiyaa, qof walbana waxa ugu wayn ee uu ku taamaa waa in uu qof munaasab ay isku yihiin jacayl ka helo. Maxay shareecadu nuugu dayn wayday si xorriyad ah in aan jacaylka ugu raaxaysanno, culays iyo dhibta qoyska la'aantii. Sidee ayey u tahay in jidhka laga xaaraantinimeeyo midhaha jacalyka? Oo waliba laga dhigo qayb ka mid ah "Ujeeddeda akhlaaqeed ee shareecda"?

Warcelin: Tani waa dhinac ka mid ah dhinacyada ay muslinka kaga tagrifaleen shareecada. Haa, waa sax in uu jacaylku ka mid yahay nimcooyinka Ilaahay inna siiyay kuwa ugu waawayn, waxaana aad u dabiiciya in uu qofku jeclaado qof kale, iyo in uu la sameeyo calaaqad jidh ahaaneed oo ka tarjumaysa jacaylkaa, Islaamkuna lid kuma aha oo ma diidayo arrinkaa dabiicaga ah, se wuu nidaaminayaa . Yaa yidhi Islaamku jacaylka ayuu ka soo horjeedaa? Islaamku waxa qudha ee uu diiday waa "isku raaxaysiga jidheed ee laba qof oo aan is qabin". Islaamkuna waxa uu taa u xaaraantimeeyay waxa uu isku miisaamayaa dareenka jacaylka iyo qiyamka kale oo ah kobaca iyo liibaanta qoyska, qoyskuna waa seeska liibtaanta bulshada.

Haddii uu nin xaas leh ama gabadh la qabaa ay sino ku dhacaan, Islaamku wuxu uu arkaa inay danbi wayn galeen. Maxaa yeelay, falka ay ku dhaceen, haba ahaado muujin jacayl e, wuxu si toosa lid ugu

yahay qiimaha qoyska ee Islaamku farayo in la adkeeyo. Laakiin haddii ay laba aan is qabin ay is jeclaadaan; Islaamku ma diidayo in ay isu cabbiraan jecaylkaas, se waxa uu diidayaa oo kaliya in ay qaab jidheed isugu cabbiraan. Iyada oo loo jeeddo in la isku miisaamo jacaylka iyo qiimaha qoyska, wuxuuna dhiiri galinayaa islaamku guurka siyaabo kala duwanna wuu u fududaynayaa, Nebiguna waxuu yidhi: *“maan arag dad isku jecel sida dadka is qaba”*. Waxaana is waydiin leh haddii u ka dhasho ilmo yari xidhiidh jidheed oo xaaraan ah miyaanay xil-kasnimo darro ahayn, iyo xad gudub ilmaha yar loo geystay?.

Haddii ay door bidaan labada lammaane in ay dhasha dib u dhigaan. sababo awgeed, sida da’dooda oo aan munaasib ku ahayn, ama sida waydiintaadaba ku jirtay sabab la xidhiidha howsha iyo culayska qoska, Islaamku arrinkaa ma diidayo. Ilmuhuna waa inuu ku soo kordho qoys ishaysta oo qurux badan. Sidaaas ayaa lagu badbaadin karaa korriinka dadnimo ee ilmaha.

Waydiin: Maxaad u tidhaahdaan Islaamku waa nidaam akhlaaqeed. Isagoo taageeraya argagixasanimada?.

Warcelin: Su’aashan waxa aan kaga jawaabi doonaa inaan caddeeyo waa maxay fahanka saxda ah ee

aragagixasanimadu. Dabadeed jawaabta waydiintaadu way iska caddaan doontaa.

*Argagixisanimadu diin ma leh. Saxna ma aha in Islaamka lugu xidho. Ama kiristanka. Ama yuhuudiyadda ama hunduuska, ama buudiyadda, midkoodna sax ma aha inuu argagixsanimada taageerayo. Miyayna ahayn meesha uugu habboon ee diin kasta laga ogaan karo kitaabkeeda muqaddaska ah? Kutubta muquddaska ah ee diimahaas oo dhan dadka raacsan waxay farayaan mabaadi' ku dhisan akhlaaq iyo ruux sare. Iyadoo ku kala duwan qaababka ay u dhigeen.

* Gacan-ka-hadalku ma ah argagixisnimo, dadka caqliga leh oo dhami waxay isku raacsanyihiin in gacankahadalku marmarka qaarkood sharci yahay, waxaana laysku raacsanyahy in uu qofku istacmaali karo gacankahadal si u naftiisa u difaaco. Sidoo kale waxa sharci ah cunfiga danbiilayaasha lugu qaado. (waana shaqada dowladda casriga ah), dadkuna waxa ay u adeegsadaan cunfiga in ay ku ugaadhsadaan (haddayna ahayn dadka ugaadhsiga ka soo horjeeda). Tusaala yaashaas oo dhan dadku uma arkaan cunfi. Cunfiguna sidiisa dambi ma aha. Waxa ka dhigaya daw ama dembi waa kolba sida loo adeegsado. In ay dhibi ku jirto iyo in kale. Macnaha guud unbaa cunfiga danbi ka dhigi kara ama gar ka dhigi kara.

* Naftaada oo aad difaacdaa ma aha aragagixisnimo. Tusaala ahaan, waxaad suuraysaa in ay dad hubaysani ku soo weeraraan, oo ay hoygaaga kaa eryaan. oo ay xoog kugu qabsadaan. Miyayna kula ahayn markaas oo kale in aad xaq u leedahay in aad difaacdo naftaada?. Hasayeeshee marka aad naftaada difaacayso ma aha in aad cid aan waxba ku gaysan weerarto. Waa in aad ciddii ku weerartay oo qudha aad beegsato.

* Argagixisanimadu ku ma koobna dad gaar ah. Waxaa argagixisa noqon kara kooxo iyo dowlado u adeegsada ciidankooda in ay dad aan waxba u gaysan ku laayaan. Waxaana dadka wax yeeli kara noocyo argagixiso dadban ah, sida gaajaysiinta, Jidhdilka, daryeel la'aanta caafmaad, cuna qabatooyin dhaqaale ee baahsan, iwm.

* Aragagixisinimadu kuma koobna meelaha xasilloon ee ayna colaaduhu ka jirin, balse inta badan waxa ay ka dhacdaa goobaha dagaalka. taasina waxa ay timaaddaa marka laga tago anshaxa asaasiga ah ee dagaalka ee la xidhaadha sida loola dhaqmayo rayidka, askarta, ama maxaabiista dagaalka.

Waxaynu markaa halkaa kala soo dhex bixi karnaa in fal noqon karo fal argagixisinimo haddii dhib iyo waxyeello ku soo gaadho dad rayid ah ama askar aan wax dambe ah lahayn oo loola dhaqmo si ka

baxsan mabaadi'da cadaaladda iyo xuquuqda dadka. Markaa waxaynu immika tilmaami karnaa fasiraadda aragagixisiinimada ee la xidhiidha aragtida ujeeddooyinka, oo ah, "Argagixisiinimadu waa fal keenaya waxyeelo, noocay doontaba ha ahaatee, ku dhacda dad rayid ah ama cid kale, iyada oo la baal marayo mabaad'ida cadaaladda iyo xuquuqda aadanaha.

Gunaanad

Fulinta la fulinayo Shareecada Islaamka casrigan (ama dhab ahaan sida xun ee loo fulinayo) wuxuu yahay mid goos-goos ah oo aan dhammayn; mid hadal ah oo aan dhaqan ahayn; mid waji keliya leh oo aan wejiyo badan lahayn. Waxa lagu eegaa arrimaha aragti ah caddaan ama madow, iyada oo aan taxgelin la siin in ay dhinacyo badan yeelan karaan. taasina waa kala daadin ee ururin ma aha. Waxaanay ku tiirsantahay tilmaamo iyo erayo goos-goos ah ee kuma tiirsana ujeeddooyinka iyo himilooyinka ka dambeeya axkaamta Shareecada. Intaa waxa raaca sheegashada qayaxan ee la sheeganayo “Cilmi Sugaan” (ama taa dhiggeeda oo ah “Duudista caqliga markii la cusboonaysiiyay”).

Ciddii tidhaahda mujtahidiintu ama weriyeyaasha axaadiistu “cismo” ayay leeyihiin (ama dhinaca kale wixii taariikhda nusuusta Shareecada lafteeda ku saabsan), waxay sii kordhinaysaa taag darrida rawxaaniyaadka. Waxa kale oo ay sii kordhinaysaa soo dhowayn la’aanta kala duwanaasha aragtiyeed; iyada oo ay dhinaca kalena soo kordhinayso aragtiyaha mintidka ah, xoriyadda oo lunta, iyo maamulo siyaasi ah oo macangag ah.

Haddaba, haddii aynu u noqonno aragtida “Ujeeddooyinka Shareecada” waxaynu arkaynaa in ay aad kor ugu qaadayso heerka lagaga doodayo

arrimaha Shareecada ku saabsan, siiba falsafad ahaan. Waxaanay ka gudbaysaa kala duwanaanshihii taariikhiga ah ee keenay muranka madaahibta. Iyada oo dhinaca kalena dhiirigelinaysa dhaqanka heshiiska iyo kuwada noolaanshaha nabadda; kuwaas oo maanta caalamka oo dhan aad iyo aad loogu baahi qabo.

Ugu dambayn, fulinta Ujeeddooyinka Shareecada waa inay mudnaan iyo tixgalin weyn siiyaan culimada Shareecda iyo dejiyeyaasha iyo fuliyeyaasha siyaasadda, iyada oo aan madhab iyo magac aan la eegayn, ee la eegayo aasaaska oo ah “Islaax/hagaajin” kastaa ama “Ijtihaad” kastaa wuxa uu ku xidhanyahay kolba sida loo fuliyo Ujeeddooyinka Shareecada.

Dhammaad..!



About Prof. Jasser Auda

Professor Auda is Al-Shatibi Chair of Maqasid Studies at the International Peace College South Africa, the Executive Director of the Maqasid Institute, a global think tank based in London, and a Visiting Professor of Islamic Law at Carleton University in Canada. He is a Founding and Board Member of the International Union of Muslim Scholars, Member of the European Council for Fatwa and Research, Fellow of the Islamic Fiqh Academy of India. He has a PhD in the philosophy of Islamic law from University of Wales in the UK, and a PhD in systems analysis from University of Waterloo in Canada. He previously worked as: Founding Director of the Maqasid Center in the Philosophy of Islamic Law in London; Founding Deputy Director of the Center for Islamic Ethics in Doha; professor at the University of Waterloo in Canada, Alexandria University in Egypt, Islamic University of Novi Pazar in Sanjaq, Qatar Faculty of Islamic Studies, and the American University of Sharjah. He lectured and trained on Islam, its law, spirituality and ethics in dozens of other universities and organizations around the world. He wrote 25 books in Arabic and English, some of which were translated to 25 languages.